



**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA**

XEER-NIDAAMIYAHA MAARAYNTA MAALIYADDA GUUD, 2022

SOO BAXAY: TAARIKHDA:/...../2022

**DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XEER-NIDAAMIYAHA MAARAYNTA MAALIYADDA GUUD, 2022**

Qaab-dhismeedka Xeer-Nidaamiyaha



MOF/OM/639/2022

May 19, 2022

Ku: Dhammaan Hay'adaha Dowladda
Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Ujeeddo: Wareegtada Faafinta Xeer-Nidaamiyaha Maaraynta Maaliyadda Guud, 2022
kaas oo ay ansixiyeen Golaha Wasiirada 19/05/2022.

Aniga oo raacaya Qodobka 62-aad ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, waxa aan soo saaray Xeer-Nidaamiyaha Maaraynta Maaliyadda Guud, 2022, kaas oo aan u gudbiyey Golaha Wasiirada si ay u ansixiyaan manta oo taariikhdu tahay 19/05/2022.

Golaha Wasiirada fadhigoodii dhacay manta 19/05/2022 ayey ku ansixiyeen Xeer-Nidaamiyaha Maaraynta Maaliyadda Guud, 2022, iyaga oona ansixiyay nuqulka Af-ka Soomaliga ah iyo midka Afka-Ingiriiska ah, kuwaa oo is taageeri doona.

Haddaba, waxaa la'idin ogeysiinayaa in Xeer-Nidaamiyaha Maaraynta Maaliyadda Guud, 2022, uu sidaas dhaqangal kuyahay laga bilaabo 19/05/2022, waxaana la idinka doonayaa in aad u hogaansantaan.

Ujeeddada Xeer-Nidaamiyahaan ayaa ah in la balaariyo oo la sharaxo Nidaamyada iyo Qodobada guud ee uu dejiyey Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17), isticmaalkiisuna wuxuu sahlayaa in uu si sax ah ushaqeeyo Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 17), wuxuuna sidoo kale hubin doonaa in Maaliyadda Guud loo maamulo habka ugu waxtarka badan uguna hufan.

Sida Xeer-Nidaamiyuhu dhigayo, nuqullada Af-Ingiriisiga ah iyo midka Afka-Soomaaliga ayaad ka heli kartaan mareegta (website) Wasaaradda Maaliyadda, halkaas oo Hay'ad kasta ay kala soo degi karto si'ay u isticmaasho.

Mahadsanid,

Dr. Cabdiraxmaan Ducaale Beyle
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda



Qaybta I. Qodobada guud

1. Tixraaca iyo muuqaalka
2. Dabaqidda

Qaybta II. Awoodaha, masuuliyadaha iyo doorka wakiillada

3. Wakiillada uu leeyahay Wasiirka
4. Wakiillada uu leeyahay Xisaabiyaha guud
5. Wakiillada ay leeyihiin Saraakiisha Ogolaanshaha
6. Diididda iyo hawl gelinta Wakiillada hay'addaha
7. Amarka Wasiiku ugu ogolaanayo hawl gelinta saraakiisha ogolaanshaha

Qaybta III. Diyaarinta miisaaniyadda

8. Qaab dhismeedka siyaasadda maaliyadda
9. Baaqa soo gudbinta miisaaniyadda
10. Gudbinta iyo dhegeysiga miisaaniyadda
11. Kala saarista barnaamijyada
12. Aaasaaska guud iyo Qaybahay daboolayso miisaaniyadda
13. Kala saarista kharashaadka qarsoodiga ah
14. Qoraallada Miisaaniyadda Qaran
15. Gaarsiinta dadweynaha miisaaniyadda

Qaybta IV. Fulinta miisaaniyadda iyo Maamulka kharashaadka

Qayb hoosaadka I. Ilaalinta Kharashaadka

16. Bixinta lacagtu inay soo dhaafto qaybta xisaabaadka
17. Diyaarinta iyo gudbinta qorshayaaasha kharash garaynta (Qod. 28(2))
18. Qoondaynta miisaaniyadda
19. Amarka lagu bixinayo kharashaadka
20. Codsiyada iyo meel marinta kharashaadka la ogolaaday in la bixiyo
21. Amarka libka
22. Lacag bixinta looga baahan yahay heerar iyo wakhti kala duwan
23. Alaabta la soo iibiyey, iyadoon lagu dhaqmin ama lala socodsiin guddiyada xisaabaadka
24. Balanqaadyada codsiyada iyo meel marinta Wasiirka
25. Codsiga ku aadan balanqaadyada lacag bixinta kala duwan
26. Haraaga aan la isticmaalin ee kharashka la ogolaaday
27. Bedelidda Qoondaymaha miisaaniyadda
28. Qodobada heshiisyada iibka
29. Kordhinta cadadka lacageed ee balanqaadka la meel mariyey
30. Joojinta ama yaraynta qiimaha lacageed ee la meel mariyey
31. Ka warbixinta lacagbixinta

Qayb hooskaadka II. Habraaca lacag bixinta

32. Lacag bixinta ka timid miisaaniyadda qaran
33. Masuuliyadaha lacag bixinta

34. Cadaymaha dhamaystirka
35. Cadaynta dhamaystirka shaqada iyo alaabta badan ee la soo iibinayo
36. Kaydinta iyo soo gudbinta warqadaha lacag bixinta
37. Meel marinta warqadaha lacag bixinta ee ku jira habka SFMIS
38. Kaydinta qoraalada tageeraya hawlaha SFMIS
39. Lacag bixinta lagu kala wareejiyo habka elektarnokada ah
40. Lacagaha Jeegga lagu bixiyo
41. Lacagaha kaashaka ama caddaanka lagu bixiyo
42. La socoshada iyo maaraynta kharashaadka qarsoodiga ah

Qodob hoosaadka: Hab raaca Mushahar bixinta

43. Masuuliyadaha habraaca mushahar bixinta
44. Nidaamyada maamulka shaqaalaha iyo lacag bixinta
45. Taariikhda mushahar bixinta
46. Lacagbixinta loo adeegsado habka aan gacanta ahaayn (electronic)
47. Wax ka bedelka mushahar bixinta
48. Xaqijinta mushaharka ka hor inta aan marka ugu danbaysa la bixin
49. Warqadaha lacag bixinta iyo balanqaadyada
50. Mushahar bixinta
51. Kaydinta xogta iyo khidmadaha laga gooyey lacagaha la bixiyey
52. Joojinta mushahar bixinta
53. Hab raaca loo marayo lacagaha laga goynayo mushaharka

Qodobhooska IV. Lacagaha caddaanka ah ee loo hormarinayo hay'adaha dowladda

54. Xadiga ku jaan go'an lacagaha caddaanka ah ee loo hormarinayo hay'adaha dowladda ka tirsan
55. Bixinta iyo horumarinta lacagta kaashka ah ee la siinayo xubnaha dowladda
56. Xisaabinta lacagta caddaanka ee la hormarinyo loo xisaabinayo hanti
57. Kharashaadka iyo lacag bixinta ka imanaysa lacagaha caddaanka ah ee la hormariyey
58. La wareegidda lacagaha kaashka lagu wareejinayo xubnaha dowladda
59. Xisaabinta kaashka la bixinayo
60. Lacagta kaashka ah ee hawl gabka ah ee la siinayo xubnaha dowladda
61. Lacaga yar yar ee hawlaha maalin laha ah lagu bixinayo

Qodob hoosaadka VI. Lacagaha loo hormarinayo shaqaalaha hay'adaha dowladda

62. Xadiga lagu jaan goynayo lacagaha la siinayo shaqaalaha hay'addaha dowladda
63. Ogolaanshaha iyo bixinta lacagaha loo hormarinayo shaqaalaha dowladda
64. Xisaabaadka lacagaha la hormariyey
65. Go'aaminta bixinta lacagaha hormariska ah ee la siinayo shaqaalaha hay'addaha dowladda.
66. Xisaabaadka lacagaha la hormariyey bixintooda
67. Lacagaha loo hormariyey hawl gabka shaqaalaha hay'addaha dowladda

Qaybta Iskudubaridka Bangiga iyo maamulka lacagta

Qodob hoosaadka I. Hawlaha Baanka

68. Muuqaalka nidaamka Maaliyadeed ee Baangiga Dhexe Soomaaliya
69. Khidmadaha lagu bixinayo Baanka dhexe ee Soomaaliya
70. Khasnadda Maaliyadda Dowlaadda Treasury Single Account
71. Akoonka maaliyadda dheeraadka ah
72. Balaadhinta Khasnadda Maaliyadda dowladda
73. Heerka heshiisyada adeegyada
74. Helitaanka xisaabaadka baanka iyo diwaan gelintooda r
75. Iswaafajinta xisaab xirka Baanka iyo diwaanada maaliyadda

Qodob hoosaadka II. Maaraynta lacagta kaashka Subpart II. Cash Management

76. Nidaamka maamulka lacagta caddaanka ah Cash Management System
77. Ururinta xogta lacagta kaashka ah ee la saadaalinayo Data collection for cash forecasting

Qaybta VI. Maamulka Deymaha iyo Deeqaha

78. Ujeedooyinka Deeymaha
79. Xeeladaha maaraynta deymaha iyo barnaamijyada daymaha Dawladda
80. Sida deyntu ula falgaleeyso miisaaniyadda
81. Bixinta deymaha
82. Nidaamka maaraynta deynta ee habka kumbuyuutarka
83. Shuruudaha dammaanad-qaadyada iyo deyn-bixinta
84. Oggolaanshaha dammaanad-qaadyada iyo deyn-bixinta
85. Diiwangelinta damaanadaha iyo deymaha
86. Kharashka dulsaaran damaanadaha Dawladda
87. Habka deyn aruurinta
88. Oggolaanshaha deymaha/deeqaha lasiinaayo hay'adaha Dawladda
89. Deymaha/deeqaha lasiiyo Hay'adda Dawladda waa in Miisaniyadda kamid ahaadaan
90. Deeqaha la siiyo hay'adaha aan dawliga ahayn
91. Deeqaha lasiiyo Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka
92. Deeqaha aan lacagta aheyn
93. Nidaamka Habka Kombuuterka ah ee Maareynta Deeqaha

Qaybta VII. Maaraynta Lacag u wareejinta dowlad goboleedka

94. Lacag bixinta shardiga leh iyo taan shardiga lahayn deeqaha la siinayo dowladaha xubnaha ka ah Federaalka
95. Codsiyada iyo dirista lacagaha taakulada ee shuruud iyo shuruud la'aanta ah
96. Kormeerka u hogaansamidda iyo isu duwidda shuruudaha iyo shuruudo la'aanta deeqaha

Qaybta VIII. Xisaabinta iyo Warbixinta

97. Heerka tayada xisaabinta iyo soo saarista habka loo marayo xisaabinta
98. Haynta iyo baabi'inta warqadaha xisaabaadka iyo kaydada maaliyadeed
99. Muujinta jaantuska muuqaalka xisaabaadka
100. Masuuliyadaha aasaasidda iyo joogtaynta habka SFMIS
101. Warbixinaha maaliyadeed ee billaha iyo kuwa aan maaliyadda ahayn ee ka imanaya hay'addaha dowladda
102. Warbixinno maaliyadeedka saddex biloodlaha ah ee ka imaanaya hay'addaha dowladda
103. Warbixinno sanadeedka maaliyadda hay'addaha dowladda
104. Warbixinno sanadeedka hay'addaha dowladda
105. Warbixinaha ku saabsan habka loo fuliyey Miisaaniyadda bileh
106. Qoraalka maaliyadeed ee sanadka ee dowladda federaalka
107. Xisaab xidhka bille iyo dhamaadka sanadka
108. Warbixinaha ka imanaya Xubnaha Dowladaha Federaalka iyo Dowladaha hoose
109. Xogta maaliyadda dowladda
110. Warbixinta shirkadaha dowladdu leedahay iyo kuwa qaata lacagaha dowladda

Qaybta IX. Ilaalinta gudaha iyo hanti dhowrka

111. Magacaabidda hantidhowrka u gaarka ah hay'adkastaa
112. Abuuridda iyo waajibaadka uu ku shaqaynayo hantidhowrka hoos imanaya Wasaaradda
113. Abuuridda Guddiga Hantidhowrka ee Dowladda Federaalka
114. Wajibaadka iyo Masuuliyadaha Guddiga Hantidhowrka
115. Abuurista Nidaamyada Ilaalinta gudaha

Qaybta X. Maamulka hantida iyo alaabada Dowladda Federaalka

116. Masuuliyadda maamulka Hantida Dowladda
117. Maamulka iyo kaydinta hantida ma guurtada ah
118. Maamulka agabka dowladda

Qaybta XI: Maamulka Dakhliga ka soo xeroodka Khayraadka dabiiciga ah

119. Aburidda sanduuqa Dakhliga khayraadka dabiiciga ah
120. Ururinta iyo ku shubista Sanduuqa dakhliga khayraadka dabiiciga ah
121. Ururinta faa'iidada dakhli ee ka soo baxa maalgashiga Sanduuqa kharyaad
122. Maalingelimaha Sanduuqa
123. Kharashaadka hawl galka Sanduuqa
124. Lacagta laga bixinayo Sanduuqa
125. Mamnuucidda in dhaqaalaha sanduuqa looga faa'iidaysto si aan sharci ahayn
126. Guddiga la talinta maalgelinta sanduuqa
127. Warbixinaha Baanka Dhexe ee Soomaaliy
128. Xisaabinta yo Warbixinta Sanduuqa Dakhliga Khayraadka Dabiiciga ah
129. Hantidhowrka Sanduuqa

Qaybta XII. Maareynta Maalgelinta Guud

130. Isticmaalka qeybtaan
131. Mabda'a miisaaniyadda mideeysan
132. Xaqiijinta in la awoodi karo (Verification of affordability)
133. Dukumintiyada Miisaaniyadda
134. Heshiisyada Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah (public-private partnerships)
135. Isbedellada Mashruuca

Qaybta XIII. Xanibaadaha iyo Sharciyada dheeraadka ah

136. Xanibaadaha
137. Xisaabinta iyo qoraalka ka hadlaya khasaaraha ku dhaca lacag ama hanti dowlad
138. Wakhtiga Xeer-nidaamiyahan uu dhaqangal noqonayo iyo fulinta.

Qaybta I. Qodobada guud

1. Tixraaca iyo isticmaalka

- (1) Xeer-Nidaamiyahaan waxaa loo soo xigan karaa sidaan “Xeer-Nidaamiyaha Maaraynta Maaliyadda Guud, 2022”.
- (2) Xeer-Nidaamiyahaan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan hay’addaha dowladda, mashaariicda deeq bixiyayaashu maal geliyaan iyo hay’addaha dowladdu leedahay.
- (3) Xeer-Nidaamiyahaan wuxuu khuseeya dhammaan maamul hoosaadyada ka tirsan Dowladda Federaalka.
- (4) Xeer-Nidaamiyahaan wuxuu khuseeyaan oo lagu dhaqayaa Maamul goboleedyada xubnaha ka ah Federaalka, keliya marka sharcigu si gaar ah u quseeyo iyaga.

2. Faahfaahin

Xeer-Nidaamiyahaan Gudihiisa, haddii aan si kale loo dhigin, erayada soo socda waxa ay leeyihiin macnaha ku horyaala:

“Sharci” Waxaa loola jeedaa Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 2019;

“*Maaraynta gargaarka*” waxaa loola jeedaa hanaan ay dowladda federaalku u qorshaysay, kuna fulinayso barnaamijyada gargaar ee ay maal gelisay, kormeeridda, qiimaynta mashariicda, barnaamijyada iyo inay bixiso islaxisaabtan lala sameeyo cidda masuulka ka ah iyo la hawl galayaasha horumarinta. Maamulka gargaarku waa wada shaqayn iyo hab ka qayb gal oo ay ku lug leeyihiin daneeyayaal badan oo kuwada hawl galla heerar kala duwan iyo hawl wadeenno kala duwan, laakiin ay isu keentay shaqadoodu hab wareegga gargaarka. Shaqooyinkaasina waxay daboolaan barnaamijyada gargaarka, bixinta dhaqaalaha gargaarka, maamulka fulinta, isla xisaabtanka, kormeerka iyo qiimaynta gargaarka.

“*Kaash ama lacag cadaan ah*” waxaa loola jeedaa lacagta caddaanka ah ee gacanta ku jirta, lacagta bangiga taalla, midda lagu shubo iyo lacagta la midka ee markaas la heli karo, hantida degdegga u noqon karta lacag, taasoo u diyaar ah in lacag kaash ah loo bedelo saddex bilood gudahooda, taasoo aan khatar ugu jirin in qiimaheedu isbedel weynku ku dhaco;

“*Koontada ama xisaabta Lacagta caddaanka ah ku jirto*” waxaa loola jeedaa akoonka ama koontada loo aqoonsaday in lagu ururiyo dakhliga, laguna kaydiyo, laguna diwaan geliyo marka lacagta caddaanka lagu shubo iyo marka kharashaadka laga bixiyo, laga diwaan geliyo marka lacagta cadaanka ah laga bixiyo;

“*Qoraalka habraaca hawlgalka dhamaystiran*” waxaa loola jeedaa siyaasadda maamul ee Wasiirku caddeeyey in loo maro maaliyadda dawladda, waana,

siyaasadda, hab raaca, nidaamka iyo sharciyado ay tahay in ay maraan saraakiisha ka shaqaynaysa iyo shaqaalaha dawladda si dhamaystiran iyo maarayn wax tar leh oo lagu maamulo khayraadka iyo dhaqaalaha dowladda;

“Kharashaadka qarsoodiga loo bixiyo” waxaa loola jeedaa kharashaadka iyo balanqaadyada dhaqaale ee ay gashay hay’ad la ogolaaday oo ku shaqo leh ururinta iyo faafinta warbixinaha la xiriira danta amniga qaranka, waxaana ku jira qiimaha lagu bixiyey waxyaalaha la soo iibiyey iyo dayactirka hantida lagu sameeyey

“Masuuliyadda isku xiran” Waxaa loola jeedaa:

- (a) Waajibaadka suurtoogalka ah ee ka dhasha dhacdooyinkii hore oo jiritaankoodana la xaqiijin doono inay xaqiiq ahaayeen ama aysan dhicin hal ama wax ka badan oo mustaqbalka oo aan la hubin, kuligoodna aan ku jirin gacanta maamulka.
- (b) Wajibaadka wakhtigaas la joogo ka dhashay dhacdooyin la soo dhaafay oo aan la aqoonsan sababahaan soo socda dartood:
 - (i) suurtagal maaha in soo la helo dhaqaale xambaarsan faa iidooyin dhaqaale ama adeeg looga baahan doono in lagu xalliyo waajibaadka; ama
 - (ii) Cadadka lacageed ee ku baxaya waajibaadka aan la cabiri karin masuuliyadooda.

“Shaqaaale” waxaa loola jeedaa qofkastoo ka shaqeeya hay’addaha dowladda oo ay ku jiraan shaqalaaha rayidka iyo saraakiisha la doortay ama la magacaabay.

“Kharashaadka aan la bixin” waxaa loola jeeda isu geynta wixii la soo iibsatay oo bixinta xisaabtooda ay u taagan tahay in lagu bixiyo heshiis ama hab agaasin qandaraas, welise aan la bixin muddo ka badan 3 bilood markii alaabta la keenay iyo adeegyada la qabtay, haddii ay mushahar ama guno kale tahayna muddo bil ah.

“Dhaqaalaha Miisaaniyadda dheeriga ah” waxay leedahay macno loo dejiyey oo loogu aqoonsaday Sharciga Caalamiga ah Hanaanka Xisaabaadka maaliyadda;

“Sarkaalka Idman lacag bixinta ee Dowladda Federaalka” Waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda Federaalka; iyo

“Sarkaalka ogolaanaya lacag bixinta ee maamulka xubinta ka ah Federaalka” waxaa u taagan Agaasimaha Wasaaradda Maaliyadda ee Maamul goboleedka xubinta ka ah Federaalka.

“Hay’ad Dowlad Federaal” waxaa ku jira hay’adda dowladda, sanduuqa, mashaariicda deeqbixiyaashu maalgeliyaan, hay’addaha dowladdu leedahay iyo dowlad hoosyaadyada xiriirka la leh dowladda federaalka;

“Iltisaamaad ama masuuliyadaha Maaliyadeed” waa loola jeedaa masuuliyad kastoo kutimaadda waajibaad qandaraas, oo ah;

- (a) si loogu diro lacag caddaan an ama hanti maaliyadeed kale hay’ad kale; ama

(b) si loogu beddelo qalab maaliyadeed hay'ad kale, iyada oo lagu xirayo shuruudo aan macquul ahayn..

“Hantida dhaqaale” waxay ka kooban tahay hantida la sheegay, caadi ahaan noocyada hantidaas waa lacagta cadaanka ah, haraaga lacageed ee baanka ku haray, lacagaha lagu shubay baanka, daymaha, lacagaha taariikhaysan bixintooda ee dowladdu leedahay, lacagaha dakhliyada cashuuraha ee aan la bixin iyo xisaabaadka kale ee la heli karo;

“*Lacagaha la bixiyey ee aysan waxba ka soo noqon*” waxaa loola jeeda lacago in dowladda bixiso ay ku taha lama huraan haddana aysan wax dhaqaale ah uga soo noqonayn, dowladdana aysan wax faa'iido ah ka soo gelayn, lacagahaas waxaa ka mid ah kuwo lagu soo ijaarto adeegyada xirfadaha, kuwaasoo adeegyaday bixiyaan aan xaqiiqiyan la isticmaalin, lacagaha lagu bixiyey kirooyin deegaan laakiin aan la isticmaalin ama lacagaha lagu bixiyey alaabooyinka si khaldan loo dalbay ama si aan sharci ahayn loo aqbalay ama dayac ku yimid go'aan khaldan oo la qaatay.

“Dowladda guud” macno ahaan waxaa loo dejiyey habka caalamiga ah ee sharciga xisaabaadku aqbalay;

“Gargaarka aan lacagta ahayn” waxaa loola jeedaa wax aan lacag ahayn oo la isku warejiyey oo ka timid dowlado kale ama Hay'addaha Caalamiga ah (Maamulayaasha sare) iyo deeqaha, gargaarka ama tabarucaadka ka imanaya Ururada aan dawlaga ahayn iyo kuwa gaarka loo leeyahay;

“Hantidhowraha gudaha” waxaa loola jeeda xubin madaxbanaan, shaqadiisuna tahay xaqiijinta iyo hawlaha la talinta hay'adda, si kor loogu qaaddo tayada, loona wanaajiyayo habraaca maaliyadeed ee hay'adda;

“Ilaalinta gudaha” waxaa loola jeedaa habka loo dejiyey in loo maro xaqiijinta maan galka ah ee la xiriirta fulinta hawlaha, ujeedkuna waa kuwa ku xusan qaybahaan soo socda::

- (a) Hawlaha inay noqdaan kuwo wax ku ool ah oo hufan.
- (b) La helo warbixin maaliyadeed la isku halayn karo.
- (c) U hogaansamidda fulinta sharciyada iyo xeerarka.
- (d) Ilaalinta Hantida.

“*Diwaanka hantida*” waxaa micnahooda lagu dejiyey *Habka sharciga caalamiga ah ee xisaabta dowladda ama habab kastoo kale oo caalamiya oo waafaqsan sharciyada xisaabaadka.*

“*Deyn*” macnaheedu waa waajibaad lacageed taas oo ubaahan in lasiiyo dulsaar ama deynta laftigeeda ama laba-doodaba deyn-bixiyaha xilliga ay waajibtay, waxaana kamida daamanadaha deynta, iyo kharashaadka kale ee ubaahan in la bixiyo.

“*Deyn bixin*” waxaa kamida bixinta dulsaarka iyo deynta asalka ah.

“Wasiirka ku shaqada leh” waxaa loola jeedaa wasiirka uu Raysalwasaaruhu u magacaabay kormeerka iyo la socoshada maamulka hay’adda dowladda;

“Dowladda hoose” waxaa loola jeedaa sida lagu cadeeyey habka uu ogol yahay sharciga caalamiga ah ee sharciyada tira koobka;

“Wasiir” waxaa loola jeeda wasiirka Maaliyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya ;

“Hantida ma guurtada ah” waxaa loola jeedaa sida lagu dhiga Sharciga caalamiga ah Xisaabaadka laamaha dowladda ama sharci kastoo caalamiya oo la xiriira sharciyada xisaabaadka;

“Kasoo baxay” waxaa loola jeedaa alaabta la soo saaray ama adeegyada la qabtay maxsuulka ka soo baxay;

“Lacagta dowladda” waxaa loola jeedaa lacagta hay’ad dowladeed ama loo qaaday ujeedo shaqo oo dowladdu leedahay, waxaa ka mid ah macaashka dakhliga, cashuuraha iyo khidmadkastoo dowladdu qaaddo, hab raaca daymaha lagu bixiyey ama lagu qaatay magaca dowladda, deeqaha ay dowladda heshay, lacagaha ka soo xerooday daymaha la bixiyey, macaashyada ka yimid maal gelimaha, iibka ama damaanad qaadka bedqab, hab raaca iibka hantida dowladda iyo wixii kale ee la helo ama lacag kastoo kale oo ujeedo dowladda ah lagu helay, waxaa kale oo ka mid ah lacag kasta oo Wasiirka ama xisaabiyaha guud uu amar ku bixiyey in si toos ah loo siiyo dowladda ama lagu bixiyo bangi rasmiya oo dowladdu leedahay;

“Sarkaal dowladeed” waxaa loola jeedaa qofkastoo loo shaqaalaysiiyey dowladda ama qofkastoo mushaharkiisa laga bixiyo lacag u baahan in xisaabteeda uu xisaabiyo xisaabiyaha guud;

“Iskaashi ee udhaxeeya Hay’adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah (Public Private Partnership)” macnihiisu waa heshiis muddo dheer jiraaya ee udhaxeeya :

(a) Hay’ad Dawladeed iyo

(b) mid kale taasoo oo la wareegta ama dhista hanti-dawladeed muddo cayiman, kadibna dib-ugu soo celisa gacanta hay’addas dawladeed hantidaas.

“Khatarta” waxaa loola jeedaa dhacdo suurto gal ah oo dhacaysa oo saamayn ku yeelan doonta fulinta ujeedooyinka hay’ad. Khatarta waxaa lagu cabiri doonaa noocyada saamayn ee ay yeelanayso iyo heerka suurto galnimada inay dhacayso;

“Maaraynta khatarta” waxaa loola jeedaa hab raaca si loo cadeeyo, loo qiimeeyo, loo maamulo iyo in la xakameeyo dhibka khatarta leedahay, si loo bixiyo damanad qaad bed qab oo macquul ah oo la xiriirta fulinta ujeedooyinka hay’adda;

“SFMS” waa Nidaamka lagu kaydinayo xogta Maamulka Maaliyadda Soomaaliya, waana habka rasmiga ah ee Dowladda Federaalku u isticmalayso maamulka maaliyadda, si ay ugu qorshayso miisaaniyadda, fullinta miisaaniyadda, xisaabaadka iyo warbixinta maaliyadeed;

“*Khasnadda*” waxay la xiriirtaa waaxda hoos imanaysa xafiiska Xisaabiyaha guud oo isagu maasuul ka ah hawlaha Khasnadda;

Qaybta II. Awooda, Masuuliyadaha iyo Doorka Wakiilada

3. Wakiilka wasiirka

- (1) Wasiirku wuxuu u wakiilan karaa qoraal ahaan wasiir kale, isagoo u wakiilan kara wax kastoo ka mid ah shaqooyinkiisa ama awoodaha loo xilsaaray ka wasiir ahaan inuu fuliyo sida axdigu qabo ee ku haboon in loogu dhiibo karo wasiir kale, iyadoo wakiiladu lagu soo rogi doono xanibaado ama shuruudo kasta oo ay tahay in wasiirku soo rogi karo.
- (2) Wakiilada wasiirku ee hoos imanaya qaybtaan kama dulqaadayso Wasiirka mas'uuliyadda fulinta howsha loo igmaday ama awoodda shaqo ee laga rabo in uu fuliyo.
- (3) Wasiirku markuu doonayo in uu wakiilkii uu igmaday kala noqdo wakiilniada wuxuu kaga noqonayaa isagoo samaynayo qoraal uu kagala noqonayo wakiilka hawl kasta ama awood kasta ama qayb ka mid ah wixii loo igmaday, wuxuuna kala noqoshadaas ku qorayaa qoraal sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah.
- (4) Wasiirku wuxuu xaqiijin karaa, diidi karaa ama laali karaa go'aan kasta oo uu gaaray wasiirka la wakiishay, iyadoo ujeedku yahay wax kastoo la xiriira xuquuq sharci ee la xiriirta fulinta masuuliyaddaha iyo awoodda wasiirka la wakiishay, wuxuuna ku cadayn doonaa wasiirku go'aanka uu ku diiday ama kaga hor yimid go'aanada wakiilka qoraal sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah.
- (5) Wakiilada lagu dhisay Axdigaan ma hor istaagi karaan shaqada iyo awoodaha fulineed ee Wasiirka
- (6) Wakiilada lagu dhisay qodobada xeer-nidaamiyahaan hoos imaanaya waxay sii wadan doonaan shaqada haddii wasiirkii soo magacaabay wakiilka laga joojiyey shaqadii xafiiska, waxayna sii wadanayaan shaqada ilaa inta wasiirka cusub ee bedeli doonaa uu isagu wakiilka shaqada ka joojinayo ama u ogolanayo inay sii wadaan.

4. Wakiilka xisaabiyaha guud

- (1) Xisaabiyaha guud wuxuu qoraal ahaan ugu wakiilanayaa meel kastoo lagama maarmaan ah, shaqo kasta ama awood kasta oo uu leeyahay xisaabiyaaha guud, isagoo u eegaya Sharciga ay tahay inuu ku soo magacwoda wakiil ah sarkaalka dowladeed oo xafiiska xisaabiyaha guud ka shaqaynaya iyo in wakiilkaasi ku shaqayn doono xayndaabyada ama shuruudaha uu soo rogi karo Xisaabiyaha guud.
- (2) Xisaabiyaha guud wuxuu xaqiijin doonaa in awoodda wakiilkaas uu ugu qoondeeyey sarkaalka shaqada dowladda ee Xisaabiyaha Guud ay ku caddahay xaaladdaha awoodeed ee shaqada u wakiilkaasi ku shaqaynayo, jagada iyo magaca sarkaalka ay tahay in awoodda wakiilka loo dhiibo, taariikhda ay bilaabanayso iyo taariikhda ay dhammanayso shaqada wakiilnimado iyo xaddiga maaliyadeed ee wakiilkaas loo qoondaynayo.

- (7) Wakiilka xisaabiyaha guud ee hoos imanaya qaybtaan sharci, kama dulqaadayso Xisaabiyaha guud mas'uuliyadda fulinta howsha loo igmaday ama awoodda shaqo ee laga rabo in uu fuliyo.

5. Wakiilka Saraakiisha ogolaanshaha lacag bixinta

- (1) Sarkaalka Idman ee hay'ad dowladeed sida lagu dabaqayo Sharcigaan, wuxuu qoraal ahaan ugu wakiilan karaa wax kastoo ka mid ah shaqadiisa ama awood uu lahaa Sarkaalka Idman, sida ku cad xeerka awoodahaas wuxuu u wakiilan karaa sarkaal dowladeed, iyadoo uu xadaynayo, shuruudana ku soo rogayo sarkaalkaas lacag bixintu.
- (2) Wakiilka Sarkaalka Idman lacag bixinta ee lagu dhisay sida hoos imanaysa xeerkaan ma qaadi karo masuuliyadaha fulinta shaqo iyo awoodaha uu leeyahay Sarkaalka Idman.
- (3) Sarkaalka Idmanwuxuu xaqiijin karaa, diidi karaa ama ka noqon karaa go'aan kasta oo sarkaalka la wakiishay ku qaato oo ku salaysan ku-dhaqanka mas'uuliyadda ama awoodda loo igmaday, iyadoo loo cuskanayo xuquuq kasta oo sharci oo la xiriirta ku-dhaqanka mas'uuliyadda loo igmaday ama awoodda sarkaalka dowladda ee mas'uulka ama awoodda loo wakiishay, wuxuuna ku soo saarayaa qoraal waxa keenay isbedelka ama sababaha keenay inuu ka horyimaaddo go'aamada wakiilka, sida ugu dhakhsaha badan ee suurto galka ah.
- (4) Sarkaalka ruqsad bixinta wuxuu u sheegi doonaa Wasiirka isagoo nuqul ka mid ah siinaya Xisaabiyaha guud wakiil kasta oo uu Xeerkan ku dhisay.
- (5) Wakiilka lagu dhisay sida Xeerkani qabo ma hor istaagi karo ku dhaqanka awooddaha uu leeyahay sarkaalka ruqsad bixintu.
- (6) Wakiilka lagu magacaabay sida xeerkaani qabo wuxuu sii wadanayaa shaqada iyo wax qabadkiisa marka Sarkaalka Idmanee wakiilka soo magacaabay laga joojiyo xafiiska shaqada, ilaa inta qofka kale ee ogolaansho bixiyaha ah ee lagu bedelay uu ka qaadayo xilka.
- (7) Sarkaal kasta oo Ogolaansho bixinaya waa inuu hubiyaa in wakiilkasta oo lagu magacaabay xeerkaan uu ku dhaqmayo awoodaha xeer ee loogu wakiishay shaqada.
- (8) Sarkaalkasta Ogolaansho bixiye ahi wuxuu xaqiijin doonaa in awoodda wakiilka uu u siiyey shaqada dowladda uusan u sii wakiilan karin sarkaal kale oo dowladda ah, haddi warqad rasmiya oo ogolaansho ah aysan ka soo bixin hay'addii wakiilka soo magacaabatay.

6. Hawlgelinta iyo eryidda Wakiilada hay'addaha dowliga

- (1) Wakiilada lagu sameeyay Xeer-Nidaamiyahaan way wadanayaan shaqadooda ilaa inta lagala noqonayo wakiilnimadii, haddiise Wasiirka ama xisaabiyaha Guud ama Sarkaalka Ogolaansho bixinta laga qaaday xafiiskii, wakiiladu way sii wadayaan shaqada ilaa inta cidda bedelaya Wasiirka, Xisaabiyaha guud ama Ogolaansho bixiyaha ay imanayaan oo ay bedelayaan.

- (2) Wakiil kasta oo lagu magacaabay Xeer-Nidaamiyahaan waxaa laga qaadi karaa xilkaaas wakiilnimada markii la doono, iyadoo sida ugu suurta galsan warqad loogu qorayo, ma jiro cid wakiil ah oo hor istaagi kara fulinta awood kasta oo uu leeyahay Wasiir ama Xisaabiye guud ama Sarkaalka Ogolaansho bixinta.

7. Amarka wasiiku ugu ogolaanayo hawl gelinta saraakiisha ogolaanshah

- (1) Wajibaad kasta oo uu bixiyo wasiirka ama wasiirka shaqada haya, amarkaas oo saameyn dhaqaale ku leh sarkaalka ogolaansho bixinta ee hay'ad dawladeed kaasoo xeerkaani lagu dabaqayo, waxaa amarkaasi noqon doonaa mid qoraal ah.
- (2) Haddii fulinta amarka ay noqotay inay ka dhalatay kharashaad dhaqaale oo aan la fasixin, sarkaalka ogolaansho bixinta lacagtu wuxuu u sheegi doonaa wasiirka iyo Wasiirka hawsha la wadaaga, qoraal ahaan uu ku cadaynayo siday tahay kharashaadka aan la ogolaan ee yimid, wuxuuna dib u dhigayaa fulinta amarkaas.
- (3) Marka la hello warbixinta ku saabsan Qodob hoosaadka (2) ee kor ku xusan, Wasiirka maaliyaddu wuxuu la tashan doonaa Wasiirka raysal wasaaruhu u xilsaaray masuuliyadda kormeerka hawlaha shaqo ee wasaradaha dowladda, wuxuuna ogaysiis qoraal ah siinayaa Sarkaalka Ogolaansho bixinta lacagta inuu bilaabo habraaca fulinta amarka iyo haddii ay arrintu tahay;-
- (a) Wasiirka maaliyaddu wuxuu u sheegi doonaa qoraal ahaan Go'aanka wasiirka iyo xisaabiyaha guud, wuxuuna ku darayaa warbixinta ku saabsan ogolaanshaha go'aanka iyo sababta uu go'aankaas u qaatay; iyo
- (b) Xisaabiyaha Guud wuxuu bixin doonaa warbixin, laba todobaad gudahood marka uu warbixinta ka helay Wasiirka maaliyadda, wuxuuna warbixinta siinayaa wasiirka isagoo u dejinaya shax taariikhaysan inuu xogta ugu gubiyo Baarlamaanka, isagoo u sheegaya inay rayigooda ka dhiibtaa in go'aanka fulinta amarkaasi uu waafaqsan yahay xeerka.
- (4) Haddii go'aanka lagu tix raacay xeer hoosaadka ku qoran jumlada 3(a) ee kore loo arko inay sharci darro tahay, Sarkaalka Idmanma qaadi doono masuuliyadda ka dhalatay go'aanka wasiirka ama masuuliyadda wax kastoo talaabo anshaxsiin ama ganaax ah oo ka timaadda go'aanka Wasiirka.

Qaybta III. Diyaarinta Miisaaniyadda

8. Qoraalka Qaab dhismeedka Maaliyadda

- (1) Ujeedada Qodobka 13 ee xeerka, Wasiirka Maaliyaddu wuxuu soo gudbin doonaa Siyaasadda Qaab dhismeedka qoraalka Maaliyadda, isagoo u gudbinaya Golaha Wasiirada si ay u meel mariyaan, taasoo waafaqsan sida ku cad taariikhda iyo wakhtiga la meel marinayo miisaaniyadda.
- (2) Siyaasadda Qaabdhismeedka Qoraalka Maaliyadda waxaa ku jiri doona:-
- (a) tuducyada ama qaybta uu cadeeyey sharcigu;

- (b) qiimaynta aasaaska u ah dakhliga, kharashaadka, banaananta ama madhnaanta maaliyadeed ee miisaaniyadda iyo sanadaha soo socda ee ay ku qotonto;
- (c) jaangoynta uusan kharashka dhaafi karin;
- (d) mudnaanta dowladda ee hagaysa diyaarinta miisaaniyadda; iyo
- (e) wixii kale ee qaybo ah ee wasiirka uu u arko inay ku haboontahay in lagu daro miisaaniyadda..

(3) Markay gollaha wasiiradu meel mariyaan, Wasiirka maaliyaddu wuxuu ku faafinayaa Qaab dhismeedka Qoraalka Siyaasadda Maaliyada bogga mareegta internetka ee wasaaradda.

(4) Wasiirka maaliyaddu wuxuu raadin doonaa argtiyaha ka imanaya guddiga baarlamaanka ee ku aadan maduucyada la xiriira qoraalka siyaasadda qaab dhismeedka Maaliyadda.

(5) Xayndaabka kharashaadka ee ku qoran siyaasadihii horey u jiray ee lagu xusay jumlada (2) ee kor ku qoran waxaa lagu dhejinayaa miisaaniyadda la soo gudbiyey, waxaana lagu darayaa sida ay tahay tilmaamaha kharashaadka ku baxayaa sanadka soo socda.

9. Baaqa soo gudbinta miisaaniyadda

(1) Ujeedka Qodobka 17(6) ee Sharciga, Wasiirka maaliyadda wuxuu bixin doonaa baaq uu ku dalbanayo in la soo gudbiyo miisaaniyadda iyo in uu ku faafiyo barta mareegta internetka.

(2) Baaqa soo gudbinta miisaaniyadda waxaa lagu dalban doonaa sida waafaqsan taariikhda loo qoondeeyey meel marinta miisaaniyadda, inaysan ka danbayn lix bilood ka hor inta miisaaniyad sanadeedku aysan bilaaban.

(3) Baaqa dalbashada miisaaniyad sanadeedka waxaa ka mid noqon doona: –

- (a) taariikhda miisaaniyadda, taasoo loo asteeyey wakhti cad oo qoran, iyadoo la tixgelinayo diyaarinta iyo meel marinta miisaaniyadda qaran.
- (b) siyaasadihii horey u jirey ee xaddiga lagu sargooyey kharashaadka ee lagu meel mariyey Qaab dhismeedka qoraalka Siyaasadda Maaliyadda;
- (c) tilmaamaha ay tahay in ay u hoggaansamaan hay'adaha dawliga ahi inta lagu guda jiray soo gudbinta maaliyadda oo ay ku jiraan hab raaca siyaasadaha cusub ee ay soo jeediyeen ee ku aadan maaliyadda;
- (d) hab raaca ku salaysan muuqaaladda ay soo jeediyeen hay'addaha dowladda ee ku aadan soo gudbinta miisaaniyadda; iyo
- (e) wixii kale ee khuseeya arrimaha ee uu soo gudbin karo Wasiirka Maaliyaddu.

10. Dhegeysiga iyo soo gudbinta Miisaaniyadda

(1) Ujeedada Qodobka 17 ee Sharciga, Sarkaalka Idman ee hay'ad kastoo

dowladeed wuxuu u soo gudbinta doonaa Wasiirka miisaaniyadda waafaqsan habka iyo taariikhda lagu cadeeyey dalabka soo gudbinta miisaaniyadda.

- (2) Soo gudbinta Miisaaniyadda ee hay'adaha dowladda ee lagu cadeeyey jumlada (1) ee kor ku xusan waxaa ku jiri doona miisaaniyadda soo gudbiyeen qoraal sharaxaya ujeedooyinka iyo shaqooyinka xubnaha shaqaalaha dowladda iyo hawlahay qabtaan iyo cadaymaha tilmaamaya wax qabadkooda wakhtigii la soo dhaafay iyo miisaaniyad sanadeedka ku baxaya hawlahay qabanayaan.
- (3) Qoraalada sharaxaadda ah ee lagu cadeeyey jumlada (2) ee kor ku qoran waa in loo diyaariyaa sida waafaqsan awaamiirta wasiirku soo jeediyey.
- (4) Siyaasadihii horey u jirey ee khuseeyey kharashaadka ku jira miisaaniyadda la soo gudbiyey waa inaysan ka badan xayndaabka kharashaadka lagu cadeeyey Habdhismeedka qoraalka Siyaasadda Maaliyadda iyo Dalbashada soo gudbinta miisaaniyadda.
- (5) Soojeedimaha siyaasadaha cusub oo lagu soo daray soo gudbinta miisaaniyadda waxaa lagu diyaarin doonaa qaabka lagu cadeeyey dalabka soogudbinta miisaaniyadda iyo tilmaamaha uu u dejiyey Wasiirku.
- (6) Haddii isu geyta guud ee kharashaadka ku jiray siyaasadihii kharash bixinta ee horay u jiray ee ay dejisay hay'ad dowladeed ee ku jira miisaaniyadda la soo gudbiyey uu dhafo xayndaabka kharashaadka maaliyadda loogu tala galay ee lagu cadeeyey Qaabdhismeedka Qoraalka Siyaasadda maaliyadda iyo dalabka soo gudbinta miisaaniyadda ee hay'adaha dowladd, gollaha wasiiradu waxay qaadan doonaan qodobadaan;
 - (a) Inay diidaan, dibna u soo celiyeen miisaaniyadda la soo gudbiyey oo ay ku soo celiyaan Sarkaalka soo gudbiyey ee hay'addaas u qaabilsan Odolaanshaha, ama
 - (b) Cadeeyaan soo gudbinta miisaaniyadda iyagoo la tashanaya hay'adda dowladda, si ay ugu sargooyaan xaddiga kharashaadka loogu tala galay.
- (7) Iyadoo muhiimadda la siinayo codsiyada gollaha wasiiradda, si ay u fuliyaan awooddooda sharci ee hoos imanaysa jumlada (6) ee kor ku qoran, Wasiirku wuxuu la tashan doonaa hay'adda dowladda isagoo u diraya codsi wakhtiga la dhegeysanayo miisaaniyadda, si uu ula socda habka waafaqsan taariikhda miisaaniyadda lagu cadeeyey ee ku xusan dalabka soo gudbinta miisaaniyadda.
- (8) Ujeedada ugu horaysa ee ku aadan dhegeysiga miisaaniyadda waxay noqon doontaa dib u eegis lagu sameeyo qorshaha istitaariiyadeed iyo qiyaasaha hay'addaha dowladda ay soo gudbisteen, si loo xaqiijiyo in qorshayaasha iyo qiyaasaha lagu daray miisaaniyadda ay soo gudbiyeen hay'addaha ay waafaqsan tahay hab dhiska maaliyadeed ee dowladda iyo qaab dhismeedka siyaasadda maaliyadda.
- (9) Gollaha wasiiradu waxay ka yeelan doonaan doodo ku aadan siyaasadaha cusub ee lagu soo daray miisaaniyadda la soo gudbiyey, kuwaasoo Wasiirka uu ula wadaagi doono qoraal ahaan miisaaniyadda Qaran iyo sar goynta qiyaasta sanadka soo socda sida ku haboon.
- (10) Marka go'aamada ku saabsan Miisaaniyadda Qaran ay dhamaystiraan dhammaan gollaha wasiiradu, wasiirku wuxuu ku dari doonaa xogaha la isla ogolaaday Qaab dhismeedka qoraalka siyaasadda Miisaaniyadda oo uu sal

ugu dhigayo xogta ugu danbaysa ee la saadaaliyey, wuxuuna gollaha wasiirada u gudbinayaa Qoraalka Miisaaniyadda Qaran ee kama danbaysta ah wakhtiga loo qabtay soo gudbinta Miisaaniyadda.

11. Kala saarista barnaamijka

- (1) Ujeedka qodobka 14(1) ee Sharciga, isticmaalka kala soocidda barnaamijka kharashaadka ee miisaaniyadda qaran, waa inay martaa shuruudhaan soo socda:
 - (a) Ujeedooyinka waxa ka soo baxaya iyo hawlaha uu ka kooban yahay barnaamijkasta waa in la cadeeyaa, laguna qiimeeyaa marka ay socoto diyaarinta miisaaniyadda;
 - (b) Kala saarista barnaamijyada waxay ka muuqanaysa muujinta xisaabaadka iyo Nidaamka lagu kaydinayo xogta Maamulka Maaliyadda Soomaaliya (SFMIS), iyo
 - (c) In la raaciyo wixii kale ee looga baahan yahay sida uu cadeeyo Wasiirka maaliyaddu.
- (2) Wasiirka maaliyaddu wuxuu bixin doonaa hagidda lagama maarmaanka u ah fulinta xeer-nidaamiyahaan.

12. Aaasaaska guud iyo Qaybahay daboolayso miisaaniyaddu

Iyadoo la raacayo Qodobka 15aad ee Sharciga, dhammaan dakhliyada iyo kharashaadka Dowladda Federaalka waa in lagu daraa Miisaaniyadda Qaranka si guud. Taasi waa kharashka la ururiyey aan laga goyn doonin dakhliga iyo haddii qayb kasto la hayo sidoo kale lama goynayo.

13. Kala qoondaynta kharashaadka qarsoodiga ah

- (1) Haddii miisaaniyadda qaran ama qaybaha miisaaniyadda la soo gudbiyey, kala qoondaynta miisaaniyadeed lagu saleeyey kharashaadka ku baxaya hawlaha qarsoon ee dowladda, faafaahinta ku aadan qaybahaas lakala qoondayey waa in la muujiyaa, waana in uu ogolaadda hogaanka Baarlamaanku.
- (2) Marka uu ogolaaddo hogaanka Baarlamaanku, kadib faahfaahinta, isugeynta hoose ama isu geyntooda guud waxaa lagu muujinayaa Miisaaniyadda Qaran ama waxaa lagu darayaa muujin kale oo lagu muujiyo Miisaaniyadda Qaran ama Miisaaniyadda dheeriga ah.

14. Qoraalka Miisaaniyadda Qaran

- (1) Ujeedka qodobka 18 ee Sharciga, Miisaaniyadda Qaran ee la soo gudbiyo waa in lagu soo daraa:—
 - (a) Qoraalada ama mawduucyada lagu cadeeyey Sharciga;
 - (b) Warbixinaha ku aadan kharashaadka maaliyadeed ee dibadda ka soo gelaya hay'addaha dowladda, kaasoo aan ku jirin Miisaaniyadda Qaran

- (c) Warbixinta ku aadan hawlaha maaliyadeed iyo miisaaniyadda Maamul goboleedyada xubnaha ka ah Federaalka.
 - (d) Qoraallada sharaxaya miisaaniyadda hay'addaha dowladda ee ku xusan Qodobka 5(2) ee Xeer-nidaamiyahan.
 - (e) Liiska ballanqaadyada lacag bixinta badan ee kala duwan;
 - (f) Warbixin ka socota Wasaaradda oo qeexaysa talaabooyinka ay qaaday Dowladdu, si loo dhaqan geliyo talooyinka hanti dhowrka ee sanadkii la soo dhaafay iyo jawaabta laga helay natiijooyinka guddiyada Baarlamaanka ee u xilsaaran baaritaanka warbixinnada waxqabadka iyo xisaabaadka sannadlaha ah; iyo
 - (g) wixii kale ee ku jira ee uu u arko Wasiirkuk inay ku haboon tahay.
- (2) Marka baarlamaanka loo gudbiyo, Wasiirku wuxuu ku faafin doonaa bogga mareegta internetka ee Wasaaradda miisaaniyadda Qaran ee la gudbiyey, oo ay ku jiraan dhammaan qaybaha lagu qeexay Qodobka 18 ee Sharciga iyo Xeer-nidaamiyahan.
- (3) Marka Baarlamaanku meel mariyo, Madaxweynaha Dowladda Federaalka Soomaaliyana qalinka ku duugo. Wasiirku wuxuu ku daabici doonaa si rasmiya bogga mareegta internetka Wasaaradda Miisaaniyadda Qaran ee la meel mariyey, oo ay ku jiraan dhammaan qaybaha lagu cadeeyey qodobka 18 ee Sharciga iyo Xeer-nidaamiyahan.

15. Gaarsiinta dadweynaha miisaaniyadda

- (1) Iyadoo la tixgelinayo ujeedooyinka amniga qaranka, dadweynaha waxaa la siinayaa fursad buuxda oo ay ku helaan dhammaan macluumaadka ku habboon ee la xiriira arrimaha maaliyadeed ee Dowladda Federaalka. Warbixinaha la siinayo waxaa ku jiri doona oo aan xadidnayn warbixinaha ku saabsan qiyaasaha horumarinta miisaaniyadda sannadlaha ah iyo kaabista, warbixinnada waxqabadka miisaaniyadda saddexdii biloodba mar ee ay soo saarto Wasaaradda, iyo xisaabaadka xisaab xir ee sannadlaha ah ee Dowladda Federaalka.
- (2) Marka miisaaniyadda lagu daabaco bogga mareegta internetka ee Wasaaradda, Wasiirku wuxuu u daabici doonaa dadweynaha miisaaniyadda si uu ugu sharraxo una soo koobo miisaaniyadda la ansixiyay, iyadoo la adeegsanayo shuruudo fudud oo aan farsamo ahayn.
- (3) Hay'adaha dawliga ahi waa inay u diyaariyaan Wasiirka dhammaan macluumaadka maaliyadeed ee ku habboon, kaasoo u soo bandhigaya macluumaadkaas warbaahinta guud.

Qaybta IV. Fulinta miisaaniyadda iyo maaraynta kharashka

Qayb hoosaadka I. Ilaalinta kharashka

16. Lacag bixinta ku xiran qaybta ilaalinta lacagaha la balan qaaday in la bixiyo

- (1) Ujeedka qodobka 27(6) ee Sharciga, dhammaan lacag bixinta khusaysa kharashaadka soo socoda iyo lacagaha la siinayo hay'ad kastoo dowladeed waa in ay ku baxaa hanaanka SFMIS iyo ilaalinta lacagahala balan qaaday in la bixiyo ee hoos imanaysa Xeer-Nidaamiyahaan;
 - (a) Dhammaan kharashaadka lagu qoondeeyey Miisaaniyadda Qaranka
 - (b) Dhammaan bixinta daaynta iyo lacagahaan la bixin ee la doonayo in laga bixiyo Miisaaniyadda Qaran
 - (c) Lacagaha horumarinta lagu bixinayo ee hoos imanaya Miisaaniyadda Qaran;
 - (d) Lacagaha dib looga bixinayo dakhliga ee hoos imanaya Miisaaniyadda Qaran; iyo
 - (e) Wax kastoo lacag gudbin ah oo keenaya lacag caddaan ah oo baxaysa oo ka baxaysa Miisaaniyadda Qaran..
- (2) Wasiirku wuxuu amri karaa, fulinta ilaalinta bixinta lacagaha la balan qaaday oo hoos imanaysa Xeer-Nidaamiyahaan, isagoo ku samaynayaa kharashaadka iyo lacagaha la siinayo hay'addaha dowladda, tanoo ah wax ka dheeraad ah qodobada ku qoran jumlada (1) ee kore, wakhtiga baaritaankaas uu amrayana isaga go'aamin kara.

17. Diyaarinta iyo gudbinta qorshayaaasha kharash garayn

- (1) Iyadoo la raacayo qodobka 28 (1) ee Sharciga iyo ka dib marka loo gudbiyo Hindise Sharciyeedka Qoondeynta ee Golaha, Wasiirka wuxuu uga baahan doonaa Saraakiisha Ogolaanshaha in ay diyaariyaan una soo gudbiyaan Wasaaradda aasaaska miisaaniyadda Qaran ee ay soo diyaariyeen, iyadoo ay ku qeexan tahay qorshayashooda ay ku kala cadeeyeen siday lacagaha u isticmalayaan bil ksta iyo inay ku jirto qorshayaasha shaqaalaha dowladda ee qorsha hawleedkooda shaqo ee sanadka, sidoo kale ay ku jiraa qorshayaasha ay ugu tala galeen inay ku soo iibsadaan alaabooyin iyo shaqaalayn cusub.
- (2) Marka Miisaaniyadda Qaran uu baarlamaanku meel mariyo, Wasiirku wuxuu ogoaysiin doonaa Saraakiisha ogolaansha lacag bixinta ee Shaqaalaha dowladda miisaaniyadooda loo ansixiyey iyo inuu ka cosado faafaahin dheeraad ah oo ku aadan qorshayaashooda ugu danbeeya ee ay sanadka ku isticmalayaan miisaaniyadda loo ansixiyey.
- (3) Hay'ad kastoo dowladeed waxay diyaarin doontaa, soona gudbin doontaa qorshaheeda ay ku kharash garaynayso miisaaniyad sanadeedka, iyadoo ku dejisay habka SFMIS.
- (4) Qorsheyaasha isticmaalka miisaaniyadda sanadeed ee loo maray hanaanka SFMIS waxaa loo kala qaybinayaa sida bil kasta loogu qoondeeyey, iyadoo lagu lifaaqayo qorshaha shaqada sanadka, qorshayaasha alaab iibinta iyo shaqaalaynta.
- (5) Xisaabiyaha Guud ayaa diyaarinaya, kadib oggolaanshaha Wasiirka, qorsho dhameeystiran ee kharashbixin kaaso ku saleysan qorshayaasha ay soo

gudbiyaan saraakiisha idman ee Hay'adaha, kadib waxaa loo gudbinayaa Wasiirka si loo ansixiyo, iyadoo qeyb ka ah qorshaha kharash-bixinta sanadka iyo qiyaastiisa.

- (6) Iyadoo la waafajinayo Qodobka 28 (2) ee Sharciga, hay'ad dowladeed waxay soo jeedin kartaa in ay xaqiijiso in qorshaha isticmaalka maaliyadeed ee sanadka uu yahay midkii hadda ama ay ka codsato wasiirka, iyadoo u gudbinaysa Wasiirka iyo Xisaabiyaha Guud qorshayaasheeda kharashgaraynta lacagta oo ay qiimaysay, dhamaadka hal bil gudaheed.

18. Qoondaynta Miisaaniyadda

- (1) Ujeedka Qodobka 27(1) ee Sharciga; Qoondaynta hoos imanaysa Miisaaniyadda Qaran waxaa lagu dejinayaa xayndaabka ku aadan xaddiga kharashgarayn ee la ogolaaday, kaasoo lagu codsaday wakhtiga ay daboolayso qoondooyinka miisaaniyaddu.
- (2) Wasiirka ama Sarkaal katirsan Wasaarada ee uu Wasiirku wakiishay ayaa ku soo saaraya Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) isagoona ogeysiinaaya saraakiisha xisaabaadka ee hay'adaha Dawladda cadadka qoondo ee ay Miisaaniyadda ku leeyihiin iyo waqtiga ay isticmaali karaan sannad maaliyadeedka oo ku saleysan qorshaha kharash ee la soo gudbiyey si waafaqsan qodobka 27aad farqadiisa 1aad ee sharcigan. Qoondada waxaa loo soo saari karaa bille ama rubucle ama iyadoo latixgelinaayo codsi gaar ah.
- (3) Iyadoo aan la eegayn jumlada (2) ee kore, qoondaynta miisaaniyadda ee mashaariicda banaanka laga maal geliyey waxaa la soo saari doonaa ugu yaraan saddex biloodle.
- (4) Wadarta guud ee miisaaniyada loo qoondeeyay waa inaysan ka badnaan qadarka lacagaha la heli karo mudada ay kujirto qoondeynta miisaaniyada, ee lagu saadaaliyay saadaashii ugu dambeysay ee lacag caddaan ah ee uu ansixiyay Wasiirka kadib soo jeedinta Guddiga Maamulka Khasnada.
- (5) Qoondaynta Miisaaniyadda waxaa loo soo saari doonaa Hay'ad kasta oo Dawladeed, saddex heer ayaana qaybaheeda dhaqaalaha loogu muujinayaa jaantuska xisaabaadka ama heerkii kale sida uu ku go'aamin karo Wasiirku.
- (6) Qoondeynta miisaaniyadda ee loo soo saaray si waafaqsan faqrada 5-aad, waxaa gelinaaya Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) Agaasimaha Miisaaniyada, waxaana hubinaaya Xisaabiyaha Guud, kadibna waxaa lagu wargelinayaa hay'addaha Dawladda kahor inta aysan bilaaban waqtiga qoondada loogu talagalay.
- (7) Inta lagu guda jiro xilliga qoondada miisaaniyaddu shaqeyneyso, haddii loo baahdo xaaladda daruuri ah oo jira awgood, iyadoon lagu xadgudbeen faqrada 4-aad, Wasiirka ayaa kordhin kara ama hoos udhigi kara qoondo miisaaniyadeed ee hay'ad kasta isaga oo isticmaalaya Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), lana socodsiinaaya Sarkaalka Idman ee Hay'adda.

- (8) Kordhinta iyo nusqaaminta ama yaraynta qoondooyinka misaaniyadeed ee hoos imanaya jumlada (7) ee kore waxay u bahan doontaa markay dhaqan geleyso in uu meel mariyo Xisaabiyaha Guud.

19. Amarka bixinta Kharashaadka

- (1) Iyadoo la raacayo qodobka 30 (5) ee Sharciga, amarada kharashka lagu bixinayo ayaa la soo saari doonaa, si loogu dejiyo xadka ballanqaadyada lacag bixinta ee dhammaan kharashaadka iyo lacagaha ku qoran qaanuunka 16 (1) in la sameeyo inta lagu jiro xilliga ku cad amarada bixinta kharashka.
- (2) Iyadoo lagu salaynayo sida loo heli karo lacag, amarada kharash bixinta waxaa lagu soo saari doonaa bille ama saddex biloodle ama hadba sidii codsiyo gaar ah loo sameeyo.
- (3) Iyadoo aan laga tegeyn jumlada (2), amarada bixinta kharashka ee mashaariicda dibadda laga maalgeliyo waxaa la soo saari doonaa ugu yaraa saddex biloodle.
- (4) Isu geynta guud ee xaddiga lacageed ee la amray in lagu bixiyo kharash waa inaysan ka badnaan xaddiga lacagta maaliyadeed ee qoondada miisaaniyadda eek u jaan go'an kharashka ku baxaya agabkaas iyo lacag bixinta loogu tala galay mudada balanqaadka lacag bixintu soconayso.
- (5) Sarkaalka Idman ee hay'adda dowladeed wuxuu dalban doonaa amar ku aadan kharashka ku jira qoondada miisaaniyada ee harsan lanaheli karo, taasoo ku jirta qoondada miisaaniyadda ee gaarka loogu qoondeeyey.
- (6) Wasiirka ama Sarkaal Wasiirku u igmaday ayaa hubin doona sax-ahaanshaha awood siinta kharash bixinta (expenditure warrant) kahor inta Xisaabiyaha Guud uusan ku fasixin SFMIS gudihisa.
- (7) Hanaanka SFMIS wuxuu diidi doonaa codsiyada ku aadan amarada kharashaadka, haddii codsigu kahor imaanaayo faqradda (4).
- (8) Ujeedka Qodobka 11(c) ee Sharciga, amarka lagu bixinayo kharashka ee uu meel mariyey Xisaabiyaha Guud waxaa si dhakhso ah loogu sheegayaa Xisaabiyaha Guud iyadoo loo amrsiinayo diwaan gelinta habka SFMIS.
- (9) Siwaafaqsan Qodobka 3(13) iyo Qodobka 11(j) ee Sharciga, awood siinta kharash bixinta (expenditure warrant) ee uu ansixiyay Xisaabiyaha Guud waxaa isla markiiba lagu ogeysiinaya Hantidhawraha Guud gudaha Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) si'uu u diiwaangeliyo. Diiwangelinta waxa loola jeedaa la socodsiinta Hantidhowraha Guud awood siinta kharash bixinta si u dib ugu sameeyo baaritaan kolka kharashku baxo, diiwangelinta awood siinta kharash bixinta looma adeegsan karo qaab ansixin ah.
- (10) Si looga fogaado shaki iyo in la hareer maro jumlada (8), kharahsaadka la amray waxay ku dhaqan gelayaan in lagu bixiyo, aguna maamulo nidaamka SFMIS marka Xisaabiyaha Guud uu ku meel mariyo qodobka sharci ee hoos imanaya jumlada (6).

- (11) Codsiyada, oggolaanshaha iyo diiwaangelinta amarada bixinta kharashka ee ku xusan faqradaha (5), (6), (7), (8) iyo (9) waa in loo adeegsadaa keliya nidaamka SFMIS, iyada oo aan loo adeegsanayn wax warqad la qorayo. Qoraal kasta oo taageeraya amarada kharash bixinta waxaa lagu darayaa xogtooda warbixinta SFMIS.

20. Codsiyadii iyo meel marinta kharashaadka la ogolaaday in la bixiyo

- (1) Ujeedka Qodobka 30(1) ee Sharciga, Sarkaalka Ogolaanaya lacag bixinta ee hay'adda dowladda ka tirsan wuxuu ku cadayn doonaa codsiyada lacagaha la ogolaaday in la bixiyo Nidaamka lagu kaydinayo xogta maaliyadda ee SFMIS-
- (a) Ka hor intaan la meelayn dalabka ama aan la bixin dalabka alaab, haddii agabka la iibinayaa uu hoos imaanayo qaab dhismeedka heshiisyada.
 - (b) Intaan la bixin qandaraaska, haddii wax iibinta loo isticmaalay qandaraas dowladeed;
 - (c) Intaan Xiisaabiyaha guud meel marin qiimaha kala duwan, haddii qiimaha kordhay ama ay soo baxday lacago dheeraad ah oo ku korortay qiimaha qandaraaskii hore loogu bixiyey alaab iibinta;
 - (d) Sida ugu degdegga badan marka la helo warqadaha qaan sheegadka, bixinta adeegyada dheeraadka ah, kirooyinka, wixii kale ee kharash soo noqda ama lacago la ogolaaday oo u diyaara in la bixiyo iyo daymaha la bixinayo;
 - (e) Intaan la gaarin go'aamada ka dhasha amarada lacag bixinta, haddii ay yihiin deeqbixin, kabiid ama lacago la wareejinayo; iyo
 - (f) Intaan la bixin warqadaha lacag dalbashada, haddii ay yihiin lacago la hormarinayo, dib loogu celinayo cid lahayd iyo bixinta deymihii alaabooyinka la soo gaday ee la bixinayo.
- (2) Sarkaalka Idmanwuxuu meel marin karaa codsiyada lacag bixinta keliya marka codsiyada lacag bixinta la soo dalbaday ay ku eg yihiin lacagta la heli karo ee kharashaadka la amray ka mid ah.
- (3) Markastoo la meel mariyo codsi lagu bixinayo kharashaad la amray waxay yarayn doontaa lacagta la heli karo ee ku jirta nidaamka SFMIS ee ah lacagaha la balan qaaday in la bixiyo.
- (4) Codsiyada lacag bixinta waxaa lagu samayndoonaa, laguna meel marin doonaa keliya iyadoo loo marayo hanaanka SFMIS iyadoo wax warqad ah oo kale aan la keenin. Wixii kale ee qoraalo taageeraya lacagahaas la bixinayo waxaa lagu dari doonaa xogtooda nidaamka SFMIS.
- (5) Codsiyada lacag bixinta ee ku aadan magdhowga shaqaalaha waxaa lagu dejin doonaa iyadoo loo eegayo qayb hoosaadka III ee Qaybtaan III ee Xeer-Nidaamiyahaan.

21. Amarka iibka

- (1) Marka la samaynayo codsiyada lacag bixinta allaabooyinka la soo iibinayo, waxaa lagu meel marinayaa Qodobka 20-aad ee Xeer-nidaamiyahan, habraaca

alaab iibinta waxaa la waafajinayaa sida waafaqsan Sharciga libka Qaranka, 2016 (iyo wax-kabadlkiisa).

- (2) Marka alaab soo iibiyaha la xusho sida ku cad jumlada (1), Sarkaalka Idman lacag bixinta wuxuu abuurayaa xogta ku aadan amarka iibka oo uu gelinayo hanaanka SFMIS, wuxuuna u gudbinayaa Xisaabiyaha Guud, isagoo u maraya in uu ugu gudbiyohabka SFMIS, iyadoo ay la socdaan dhammaan warqadaha kale ee taageeraya cadaymaha alaabooyinka la soo iibinayo.
- (3) Xubnaha u gaarka ilaalinta khaaska ah ee lacag bixinta waxaa la siin doonaa xogta ku jira SFMIS ee ku saabsan wax kastoo dalab alaab la soo iibinayo.
- (4) Xisaabiyaha Guud ayaa ansixin doona Amarka dalabka wax soo iibsashada, markii cadadka ballanqaadka lacageed ee lagu bixinayaa aanu ka badnayn xaddiga lacagta caddaanka ah ee la heli karo ee taal ama ay u badan tahay in la heli karo lacagtaas wakhtiga ay tahay in la bixiyo.
- (5) Marka laga soo tago jumlada (4), ansixinta amarada wax iibiinta ee lagu cadeeyey hanaanka SFMIS ee lacagta la ogolaaday in lagu bixinayo lacag cadaan ah oo hormarin ah oo uu bixinayo Xisaabta Bangi ay maamusho hay'add dowladeed sida lagu amray Qodobka tirsigiisu yahay 70(1)(b)(iv) ee Xeer-nidaamiyahan, waxa hawshaas iska leh sarkaalka idman ee hay'adda dowladda.
- (6) Meel marinta amarada wax iibinta ee ku qoran jumladaha (4) iyo (5) waa la daabici doonaa, waana la xaqiijindoonaa iyadoo la saxiixayo, shaanbadna lagu dhufanayo ka hor intaan la siin cidda wax soo iibinaysa.
- (7) Gudbinta iyo meel marinta dalabaadka wax iibin iyo warqadaha cadaynaya waxaa si toos ah loo marsiinayaa nidaamka SFMIS, iyadoo aysan jirin wax warqad gaar ah oo loo samaynayo ama warqado kale oo la daabacayo oo loo adeegsanayo.
- (8) Xeer-nidaamiyahaan wuxuu khuseeyaa dhammaan mashaariicda dibadda laga maalgeliyo ee ku jira Miisaaniyadda Qaranka iyada oo aan waxba laga reebin.

22. Lacag bixinta looga baahan yahay heerar iyo wakhti kala duwan

Haddii lacagbixin ay tahay in looga baahan yahay in lagu bixiyo heerar kala duwan oo bilo kala gedisan ah waxay noqonaysaa;-

- (a) Sarkaalka u idaman lacag bixinta wuxuu meel marin karaa codsiyada lacagaha la ogolaaday in la bixiyo keliya marka cadadka guud ee lacagahas la wada bixinayo la wada heli karo oo ay ku jiraan kharashaadka la amray ee bishaas baxaya; iyo
- (b) Isu geynta cadadka dhammaan lacagahaan la bixinayo waxaa laga bixin doonaa kharaashaadka la ogolaaday ee ku jira bishaas, qiimahas la bixiyeyna waxaa laga dhimayaa xaddiga haraaga lacageed ee ku haray xogta maaliyadeed ee ku qoran SFMIS.

23. Alaabta la soo iibiyey iyadoon lagu dhaqmmiin nidaamka ilaalinta lacag bixinta

- (1) Heshiisyada, qandaraasyada, dalabka ama codsiyada alaab iibinta ee hay'ad dowladeed ee hoos imanaya Miisaaniyadda Qaran waa waxba kama jiraan, mana lagu dhaqmayo, haddii alaab iibiyaha ama adeeg bixiyaha uusan helin Dalabka alaab iibinta ee lagu sameeyey laguna meel mariyey hanaanka SFMIS iyo hadduusan la imaan lambarka tirsiga ee ilaalinta lacag bixinta ee lagu bixiyey nidaamka kaydka xogta Maaliyadda Soomaaliya (SFMIS).
- (2) Heshiis, qandaraas, dalab ama cosi lagu abuuray amar lacag bixin oo ah lacago wakhtiyo kala duwan la bixinayo waa wax kama jiraan, mana lagu dhaqmayo, haddii alaab keenaha ama adeeg bixiyaha uusan helin Dalab wax iibin rasmiya oo lagu abuuray, laguna meel mariyey hanaanka kaydka xogta maaliyadda SFMIS oo ay ku jiraan dhammaan lacagahaas la bixinayo, uusanna la imaan tirsiga lambar ee lagu bixiyey habka kaydinta xogta maaliyadda SFMIS.

24. Codsiyada lacag bixinta iyo ogolaanshaha Wasiirka

- (1) Ujeeddada Qodobka 30 (3) ee Sharciga, hey'ad dowladeed ma geli karto wax ballanqaad ah oo ku saabsan alaab iibin iyo adeegyo, iyada oo aan ogolaansho laga helin Wasiirka, haddii weli lacagihii sanadihii hore ay wax ku soo iibsatay hay'adda dowladdu ee lagu lahaa ay buugga ku yaalaan oon la bixin.
- (2) Sarkaal kastoo ogolaanshaha ah oo doonaya inuu bixiyo kharashaad soo hoos gelaya sida ku cad jumlada (1) ee kore, waxaa looga baahan doonaa inuu raadiyo ogolaanshaha Wasiirka, isagoo qoraal ahaan ugu gudbinayo cadaymaha ku fulan ee sababay wax kharashaadkaasi dib ugu dhacay in la bixiyo.
- (3) Wasiirku wuxuu bixindoonaa qoraal uu ku aqbalayo ama ku diidayo codsigaas muddo 7 maalmood gudahood ah oo ka bilamanaysa marka uu codsiga helo; haddii codsiga uu diido, Wasiirku wuxuu cadayn doonaa sababaha keenay diidmada, isagoo raacinaya tilmaamo rasmiya oo uu siinayo Sarkaalka Idman, si uu u xaqiijiyo in wax kastoo Wasiirka ka yimid ay ku filan yihiin jawaab ahaan codsigiisii.

25. Codsiyada ku aadan lacag bixinta sanado badan

- (1) Ujeedka Qodobka 30(4) ee Sharciga, Sarkaalka Idman ee hay'ad dowlad ma meel marin karo codsiyo lacag bixin oo loogu tala galay qaybta sanadkaan in loo meel marinayo lacag bixin sanado ah sida hoos imanaysa qodobka tirsigiisu yahay 20 ee Xeer-nidaamiyaha, haddii aan codsiyada ku aadan lacag bixinta sanado badan uusan Wasiirka ku meel marin sida xeer-nidaamiyahan waafaqsan.
- (2) Si guud ah iyo sida ku cad Qodobka 27(1) ee Shariga, Lacag bixin sanado badan ah laguma dari karo hay'ad dowladeed, iyadoo aan wax qoondayn ah loogu darin Miisaaniyadda Qaran.
- (3) Lacagaha loo balanqaaday in la bixinayo sanado badan oo is xig xiga marka ugu horaysa waxaa lagu soo gudbinayaa dalabkooda habraaca miisaaniyadda qaran ee sanadlaha iyo ballan-qaadyada cusub ee lacagaha la bixinayo sanado kala duwan waxaa keliya la qoondayn doonaa marka la xaqiijiyo in balanqaadyada hadda jira lagu habeeyey miisaaniyadda.
- (4) Marka laga hadlayo mashaariicda ama waxqabadyada ay maalgeliyaan la-hawlgalayaasha horumarinta, qoondaynta miisaaniyadeed waa in la sameeyaa

waqtiga saxiixayaashu ay saxeexaan heshiisyada maaliyadeed ee khuseeya kaalmada horumarinta.

- (5) Codsiyada lacagaha la bixinayo sanado badan oo is xig xiga waxaa loo gudbin doonaa Waasiirka, si uu u meel mariyo arrintaas sida ay tahay in loogu cadeeyo baaqa soo jeedinta miisaaniyadda ee wasiirku soo saaray iyadoo la waafajinayo Qodobka 27(7) ee Sharciga..
- (6) Marka codsiga lacag bixinta sanado badan la meel mariyo, sida uu qabo qodobka (5) ee kore, xaddiga lacageed ee sanadaha soo socda loo qoondaynayo lacag bixinta sanadaha badan waxaa lagu qorayaa hanaanka xogta kaydka maaliyadda ee SFMIS ama habkii kale ee Wasiirku qeexo.
- (7) Miisaaniyadda qaran waxaa markasta lagu joogtayn doonaa liiska lacagaha taagan ee ah kuwa ay tahay in sanado badan oo is xigxiga la bixiya sida waafaqsan qodobka 14(1)(e).

26. Lacagaha ka haray kharashaadka la amray ee aan la isticmaalin

- (1) Haraaga lacageed ee kharashaadka la amaray ee ku hara qoondooyinka iyo meelahay ku jiraan ee aan la isticmaalin dhamad wakhtiga xilli miisaaniyadeedka ee ah kharashaadka la amaray waxaa loo sii rarayaa xilliyada ku xiga, laakiin dhammaadka sanad maaliyadeedka waa dhacayaa haraagaasi.
- (2) Sida waafaqsan Qodobka 34(3) ee Sharciga, codsiyada lacag bixinaha kharashaadka waxay dhammaanayaan 10 Diiseembar ee sanad miisaaniyadeedka. Lacag bixinta ku saabsan lacagaha la amray in la bixiyo waxaa loo diyaarin doonaa hab u dejisan oo lagu bixiyo muddo 30 maalmood gudahood ah oo ka bilamanaysa dhammaadka sanad maaliyadeedka.
- (3) Wasiirku wuxuu cadayn doonaa, faahfaahinta ku aadan kaydinta xogta ee fulinta miisaaniyaddii la soo gudbiyey, xisaabinta iyo warbixinta haraaga lacagahaan la bixin iyo lacagaha la amray in la bixiyo ee weli aan la bixin dhammaadka sanad maaliyadeedka.

27. Bedelidda qoondaymaha miisaaniyadda

(1) Markii la abuurto ama la beddelo qoondeyn miisaaniyadeed sababahan soo socda awgood, Wasiirka ama Sarkaal uu idmay, isagoo isticmaalaya SFMIS-ka wuxuu dib u eegis ku sameeynayaa qoondeynta miisaaniyadda si uu u ansixiyo Xisaabiyaha Guud, si u ogolaado isbeddelada lagama maarmaanka ah ee kharashyada horay loo amray bixintooda ee lagu daray qoondaynta miisaaniyadda dib loo eegay:

- (a) Anxisinta miisaaniyadda dheeriga ah waxay hoos imanaysa Qodobka 23(1) ee Sharciga;
- (b) Meel marinta kala wareejinta degdegga ah ee qaybaha qoondada waxay hoos imanaysaa Qodobka 19 (2) ee Sharciga;
- (c) Meel marinta wareejinta qoondada waxay hoos imanaysaa Qodobka 33 ee Sharciga.

28. Qodobada Qandaraasyada libka

- (1) Heshiis kasta oo qaab-dhismeed ah oo lagu saleeyo Xeerka Soo-iibsiga, iibinta iyo Alaab keenidda, 2016 (sida lagu meel mariyey) una baahan kharash laga bixinayo Miisaaniyadda Qaranka waxaa loo qaadan doonaa inay ku jirto qodobadaan soo socda:
 - (a) Dalab ama codsi lagu diyaariyey qaab dhismeedka heshiis wuxuu keliya taabo gal yahay marka la abuurto keliya Dalab wax iibsi oo ka imanaya xogta maaliyadda SFMIS oo leh lambar tirsi oo u gaar ah oo guddiga ilaalinta lacag bixintu soo saareen; iyo
 - (b) Qandaraasluhu xaq uma lahan magdhow wax kastoo uu qabtay, iyadoo laga jawaabaya dalab ama codsi amar Alaab iibin oon lahayn tirsi lambar u gaar ah oo kormeerka lacag bixinta ka soo baxay.
- (2) Qandaraas kasta, oo ka baxsan qaab dhismeedka heshiis ee hoos imanaya Sharciga Wax iibinta dowlada, tanaasulka iyo gadista (sida dib loogu eegay), wax iibinta kharashkaasina uu ka baxayo Miisaaniyadda Qaran waxaa loo marayaa qodobadaan soo socda;
 - (a) Qandaraaska si toos ah ayuu u noqonayaa wax kama jiraan, haddii qandaraasluhu uusan haysan Amarka wax iibina ee lagu sameeyey xogta kaydka maaliyadda SFMIS, kaasoo leh lambar tirsi lacag bixin oo abuurmay markii qandaraaska lagu darayey hab maaliyadeedka; iyo
 - (b) Qandaraaslaha wax lacag ah lagama siin doona wax qabadkiisa wakhtigaas la laalay qandaraaskii ilaa inta qandaraasluhu uu helayo Amarka wax iibinta oo ay la socoto lambar tirsiga u gaarka ah eek a imanaya guddiga ilaalinta lacag bixinta.

29. Kordhinta cadadka lacageed ee la meel mariyey in la bixiyo

- (1) Marka qoondo lacageed ay tahay in la bixiyo la doonayo in la kordhiyo, kordhintaas waxaa loola dhaqmi doonaa lacag bixin cusub.
- (2) Cadadkii lacageed ee lagu kordhiyey lacagbixintii markii hore la mariyey waxay noqon doontaa wax kama jiraan, ilaa inta lagu meel marinayo, laguna qorayo habka waafaqsan Xeer-Nidaamiyahaan oo ah lacag bixin cusub.

30. Joojinta ama dhimista qiimaha lacageed ee la meelmariyey in la bixiyo

Marka lacag bixin la meel mariyey ay noqoto mid aan loo baahnayn, sababo la xiriiira in la iska daayey alaab iibin, qandaraaska ama go'aamo ka yimid hay'adihii lahaa, xogaha lacag loo qoondeeyey in la bixiyo waa la tirtirayaa, waxaana baabi'inaya Sarkaalka Idman bixinta lacagta.

31. Ka warbixinta lacagta la bixinayo

- (1) Wasiirka ayaa tilmaamaya fulinta dalabyada Miisaaniyadda ama qoraalka ku aadan Nidaamyada Howlgalka oo dhameystiran, isagoo qoraya;

- (a) waxyaabaha ku jira warbixinnada lacagaha la amray in la bixiyo ee laga soo saari doono xogta maaliyadda ee SFMIS; iyo
 - (b) shuruudaha warbixin ee laga rabo lacagaha la amray in la bixiyo iyo waxa baaqiga ku ah hay'ad kasta oo dowladeed
- (2) Warbixinaha lacag bixinta ee xogta SFMIS ee ku qeexan jumlada (1)(a) ee kore, waxaa lagu dari doonaa haraaga lacagaha la bixinayo ee weli taagan, lacagta la bixin karo ee aan la bixin iyo baaqiga markastoo la soo saarayo warbixin dhamaadka wakhtiga, iyadoo lagu astaynayo wakhtigooda.

Qayb hoosaadka II. Habraaca lacag bixinta

32. Lacagaha laga bixinayo Miisaaniyadda Qaran

- (1) Ujeedka qodobka 31(1) ee Sharciga, Lacag bixinaha soo socda ee ay samaynayaan dhammaan hay'addaha dowladda waxaa lagu dejin doonaa in lagu bixiyo habka xogta maaliyadda ee SFMIs iyo shuruudaha looga baahan yahay ee hoos imanaya Xeer-Nidaamiyahaan:
- (a) Dhammaan kharashaadka lagu qoondeeyey Miisaaniyadda Qaran;
 - (b) Dhammaan bixinta daymaha iyo haraaga ee laga bixinayo Miisaaniyadda Qaran;
 - (c) Lacag bixinaha hormariska ah ee laga bixinayo Miisaaniyadda Qaran;
 - (d) Dhammaan kharashaadka loo bixiyey horumaris ee ka imanaya Miisaaniyadda qaran;
 - (e) Lacagaha dakhliga ee dib loo bixiyey ee ka imanaya Miisaaniyadda Qaran
 - (f) Wax kastoo lacag isu gudbin ah oo keenaya in lacagi ka baxdo Miisaaniyadda Qaran.
- (2) Wasiirku wuxuu amri karaa, fulinta habraaca lacag bixinta sida hoos imanaysa Xeer-Nidaamiyahaan in kharash iyo lacag bixin kasta oo ay samaynayaan hay'addaha dowladda oo aan ahayn kuwa ku xusan jumlada (1) ee kore, amarkaas waxaa laga bilaabayaa taariikhda uu go'aamiyey Wasiirku
- (3) Lacag bixinta la xiriirta magdhowga shaqaalaha iyo lacagaha hormariska waxaa loo marayaa sida ku cad Qaybhoosaadka III iyo IV ee Qaybta III ee Xeer-Nidaamiyahaan.

33. Masuliyadaha lacagbixinta

- (1) Ujeedka Qodobka (32)(1) ee Sharciga, Xisaabiyaha Guud ayaa masuul ka ah dejina dhammaan lacagaha laga bixinayo Sanduuqa Miisaaniyada Qaran sida ku qoran jumlada (1), wuxuu noqonayaa hay'adda keliya ee bixinaysa lacag bixin kasta oo laga bixinayo Miisaaniyadda Qaranka
- (2) Iyadoo aan la eegayn jumlada (1), haddii Hay'ad Dowladeed lagu ogolaaday sida hoos imanaysa Qodobka 70(1)(b)(iv) ee Xeer-nidaamiyaha in ay ka hawl gasho Xisaabta Baanka kasoo laga bixin kara lacag caddaan ah oo hormaris ah,

Sarkaalka Ogolaanaya lacag bixinta wuxuu masuul ka noqon doonaa dejinta lacag bixinta ka imanaysa Xisaabta (Akoonka) Hay'adda Dowladda.

- (3) Ujeedka Qodobka 31(1) ee Sharciga, Sarkaalka Ogolanaya lacag bixinta ee hay'adda dowladda wuxuu masuul ka noqon doonaa u hogaansamidda uu kula soconayo lacagaha ka baxaya Miisaaniyadda Qaran, isagoo fulinaya;
 - (a) Xaqiijinta ansaxsanaanta, saxsanaanta iyo sharcinimada lacagta la sheeganayo, waxaana ku jira qaybaha uu xaqiijinayo in shaqada lacagta lagu bixinayo la dhamaystiray, in haddii alaab la soo iibinayey alaabta la keenay iyadoo dhamaystiran iyo haddii adeeg shaqo oo la bixinayey ahayd in adeegaas la dhamaystiran sidii lagu balamayna loo qabtay, sidoo kale wuxuu xaqiijinayaa saxsanaanta lambarada lacag bixinta.
 - (b) Kaydinta dhammaan qoraalada iyo dukumentiyada taageeraya;
 - (c) Xaqiijinta in dhammaan lacagaha la balanqaaday in la bixiyo la meel mariyey si waafaqsan Xeer-Nidaamiyahaanyo xaddiga lacageed ee la bixinayaa inuusan ka badnayn ama dhaafsiisnayn lacag bixinta la meel mariyey.
- (4) Sarkaalka ogolaanaya lacag bixinta ayaa si shakhsi ah masuul uga ah inuu dib u bixiyo lacagaha Misaaniyadda Qaran ee ku baxay hab aan buuxin shuruudihii lacag bixinta ee hoos imanaya jumlada sharci ee (2).

34. Cadaynta dhamaystirka shaqo ama iib

- (1) Marka shaqo ama alaab la keenayo ama adeeg la bixinayo la dhamays tiray, Sarkaalka u idman lacag bixinta ee hay'adda dowladda ama sarkaalkii kale ee u idman lacag bixinta wuxuu diyaarin doonaa qoraal cadaynaya alaabta la helay ama qoraal cadaynaya oo lagu daray xogta Maaliyadda SFMIS, waxaana qoraalkaas ka mid ah caddadka iyo khaas ahaan shaqada iyo agabka la keenay xogtooda oo dhamays tiran, habka loo kormeeray iyo jawaabihii ka soo baxay kormeerka iyo wixii kale ee cadaymo ama qoraal ah ee taageerayo maxsuulka ka soo baxay hawlahaas la fuliyey.
- (2) Haddii Sarkaalka Idman ama sarkaalka idman uu cadeeyo in shaqooyinka, alaabta, ama adeegyada la bixiyay ama qiimahoodu aanu waafaqsanayn qandaraasyada ama cadaymihii horey loo hayey, isagu ama iyadu waxay diidi doonaan in alaabtaas la keeno ama waxay qoraal ahaan ku cadaynayaan talaabooyinka lagama maarmaanka ah ee looga bahan yahay in lagu saxo khaladka jira ama laga qaado iyagoo qoraal ahaan ku diyaarinaya, una gudbinaya Sarkaalka Idman.
- (3) Marka cadaymaha shaqooyinka, alaabta ama adeegyada la qabanayo ee hoos imanaya jumlada (1) waxay u bahan yihiin in sida loo qabtay ay cadeyaan xirfadlayaal, Sarkaalka Idmanwuxuu magacaabi karaa xubin madax banana ama shirkad ku samaysa kormeer.

35. Cadaymaha Dhamaystirka Shaqooyinka iyo Alaabooyinka badan ee la keenayo

- (1) Marka la cadaynayo dhamaystirka shaqooyinka iyo alaabooyinka badan ee la keenayo, Sarkaalka Idmanama sarkaalka u idman ama sarkaalka/saraakiisha loo xilsaaray waxay kormeer ku samaynayaa waxa muuqda ee shaqada la qabtay iyo alaabta la keenay.
- (2) Kormeerka shaqooyinka la dhamays tiray iyo alaabaha badan ee la soo iibiyey waxaa la fulin doonaa:-
 - (a) Marka shaqada iyo alaabta la soo ibiyey si buuxda loo dhamays tiro; iyo
 - (b) Intaan la bilaabin lacag bixinta ama hormarinta lacagta loo baahan yahay sida qandaraaska lagu gaaray, si loo cadeeyo fulinta shaqooyinka iyo alaabta la keenayo waxaa loo baahan yahay fulinta habraaca lacag bixinta laga sameeyey.
- (3) Sarkaalka Idman ama sarkaalka/saraakiisha u idman ma cadayn doonaan dhamaystirka shaqada, ilaa in:-
 - (a) qandaraasluhu u hogaansamay dhammaan xeerarka Qandaraasyada; iyo
 - (b) xaddiga, tayada iyo waxqabad muuqda ee shaqada la qabtay ay waafaqsan tahay sidii lagu gaaray heshiiska iyo cadamyaha shaqooyinka la rabay.
- (4) Sarkaalka u idman ee uu magacaabay Sarkaalka Idman lacag bixintu wuxuu fulin doonaa kormeer sida ku cad jumlada (1), wuxuuna yeelan doonaa khubaro ku fulan oo la fulisa kormeerka lagu samaynayo dhismaha, injineernimada iyo wixii kale ee la xiriira farsamada goobta shaqadu ka socoto.
- (5) Wasiirku wuxuu ku dari doonaa Fulinta Dalabka Miisaaniyadda, isagoo ku cadaynaya in shaqada la qabtay iyo alaabta la keenay ay waafaqsan tahay xeer-nidaamiyahaan..

36. Kaydinta iyo soo gudbinta warqadaha lacag bixinta

- (1) Ujeedka Qodobkaan 32(4) ee Sharciga, Sarkaalka Idman lacag bixinta ee hay'adda dowladdu wuxuu xaqiijin doonaa in dhammaan warqadaha lagu dalbanayo lacag bixinta ee hay'adda dowladdu heshay ee ay tahay in lacagtaas laga bixiyo Miisaaniyadda Qaranka in lagu cadeeyo, laguna diwaan geliyo xogta maaliyadeed ee SFMIS, iyadoo ay la socdaa dhammaan faahfaahinta sida ugu dhakhsaha badan marka la helo warqadaha iyo in dhammaan codsiayda ku aadan lacag bixinta tooska ah loo gudbiyo Xisaabiyaha Guud ka hor wakhtiyada ku taariikhaysan lacag bixinta warqadahaas lacagaha lagu dalbanayo.
- (2) Haddii taariikhda lacag bixinta aysan ku qornayn warqadaha qandaraaska ama heshiiska, lacag bixintaas waxaa lagu dejinayaa in lagu bixiyo 30 maalmood gudahood oo ka bilamanaysa taariikhda la helo warqadaha lagacaha lagu dalbanayo.
- (3) Xogta Maaliyada ee SFMIS ayaa si joogto ah loogula soconayaa la socodka xogta, haddii hubinta u hogaansanaanta iyo bixinta lacagta in lagu dhamaystiray sida waafaqsan warqad kastoo lagu dalbanayo lacag.
- (4) Haddii Sarkaalka Idman lacag bixintu ku guul daraysto inuu xaqiijiyo inuu kaydiyo warqadaha lagu dalbanayo lacagaha, xogtoodana uu ku daro xogta maaliyadda SFMIS sida lagu qeexay jumlada (1),

- (a) Hanaanka xogta kaydka maaliyadda ee SFMIS si toos ah ayey u diidaysaa lacag bixinta ku qoran warqadaas lagu dalbanayo lacagta laga rabo Miisaaniyadda Qaran; iyo
- (b) Sarkaalka Idman ayaana qof ahaan masuul ka noqon doonaa masuuliyadda lacag bixin ee warqadaas lagu dalbanayo lacagta ka timaadda.

37. Meel marinta warqadaha lacag bixinta ee SFMIS

- (1) Ujeedka Qodobka 31(1) ee Sharciga, lacag bixin kasta oo hay'ad dowladeed oo laga bixinayo Miisaaniyadda Qaran waxay u bahan tahay warqad lacag bixin oo ay ansixiyeen:
 - (a) Sarkaalka Ogolanaya lacag bixinta ama sarkaal u idman oo hay'adda dowladda ah; ama
 - (b) Sarkaalka Ogolaansha ee Wasaaradda Maaliyadda ama sarkaal u idman haddii ay jirto –
 - (i) Daymo dib loo bixinayo iyo lacagaha haray;
 - (ii) Bixinta lacagaha la celinayo;
- (2) Warqad kastoo lacag bixin ah oo looga bahan yahay in ay hoos timaaddo jumlada (1) waxaa lagu dejinayaa laguna meel marinayaa habka SFMIS, iyadoo aan loo abuurayn wax kale oo warqado ah.
- (3) Habka SFMIS wuxuu si toos ah u diidayaa warqadaha lacag bixinta haddii;-
 - (a) warqadaha lacag bixinta xogtoodu aysan ku jirin xogta maaliyadda ee SFMIS sida ku cad qodobka sharci ee 36(1);
 - (b) haddii lacag bixinta alabooyin la soo gaday, warqadaha lagu keenay ama qoraalada cadaymaha aan lagu cusboonaysiin xogtooda habka SFMIS;
 - (c) aysan jirin codsi lacag bixin ku cad SFMIS iyo dalab iibsiga ku qoran SFMIS marka lagu dabaqo bixinta lagu ansixiyey habka SFMIS ka hor inta aan la kaydinta warqadaha qaansheegadka oo la siiyo lambar u gaar ah ilaalinta lacag bixinta;
 - (d) in xaddiga lacagta ay tahay in la bixiyo ay ka badan tahay qiimaha loo meel mariyey ee la codsaday in la bixiyo; ama
 - (e) haddii ay dhacdo in la bixiyo qayb ka mid ah lacago badan oo la amray in la bixiyo, oo aysan jirin wax codsi lacag bixin ah oo lagu oggolaaday SFMIS oo daboolaya wadarta guud ee dhammaan lacagahaas badan ee looga baahan yahay in ay hoos yimaadaan hal heshiis ama qandaraas.
 - (f) jumlada (e) laguma dabaqi karo adeegyada la talinta ah, kuwaasoo codsiyadooda fulinta lacagbixinta lagu meel marin karo habka SFMIS, oo habkooda cadiga ah ee xaddiga shakhsi ee bixinta lacageed uu hoos imanyo hal heshiis ama qandaraas

38. Kaydinta Qoraalada Taageeraya ee SFMIS

- (1) Ka hor intaan la meel marin warqadaa lacag bixinta, Sarkaalka Oglaanshuhu wuxuu gelin doonaa nidaamka SFMIS dhammaan qoraalada taageeraya hawsha la qabtay.
- (2) Iyadoo la raacayo Qodobka 32 (4) ee Sharciga, Nidaam hawleed qoraal oo dhameystiran oo uu soo saaray Wasiirku ayaa qeexi doonaa faahfaahinta looga baahan yahay qoraalatada taageeraya.

39. Lacag bixinta la isugu wareejiyo habka Elektaroonikada

- (1) Iyadoo la raacayo qodobka 56 ee xeerka, marka laga reebo lacagaha kaashka ah ee qasnadaha yaryar ee loogu tala galay waxyaalaha maalinlaha ah in lagu iibiyo, dhammaan lacagaha ka baxa Miisaaniyadda Qaranka waxaa lagu bixinayaa qaab wareejinta elektarooniga.
- (2) Marka warqadaha lacag bixinta lagu meel mariyo sida uu qabo Sharciga 37, warqadihii lacag bixinta ee la meel mariyey iyo qoraaladii taageerayay waxaa si toos ah loogu gudbin doonaa Xisaabiyaha Guud, iyadoo loo marsiinayo habka SFMIS, iyadoo aan wax warqado la qoray ama la daabacay ah aan loo marayn.
- (3) Xisaabiyaha Guud ama sarkaalka u idman wuxu meel marin doonaa hab raaca lagu wareejinayo lacagta ee elektarooniga ah isagoo warqadaha lacag bixinta ku meel marinaya habka SFMIS, marka uu xaqiijiyo/xaqiijsi lacagta kaashka ah ee la heli karo ama diyaarka ah.
- (4) Habka SFMIS wuxuu si buuxda uga muuqanayaa nidaamka Bangiyeynta ee Baanka Dhexe ee Soomaaliya, kaasoo si toos ah looga helayo habraaca.
- (5) Hab raaca lacag wareejinta elektaroonikada ee lagu meel mariyey sida hoos imanaysa jumlada sharci ee (3) eek or ku xusan, waxaa lacagtaas gudbinaya habka SFMIS oo maraysa hanaanka Bangeyeynta ee Baanka Dhexe Soomaaliya iyadoo aysan jirin warqad qoraal ah ama la daabacayo oo loo marayo.
- (6) Nidaamka bangiyeynta ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliya waa inuu fuliyaa tilmaam ku saabsan wareejinta lacagta elektaroonigga ah ee ku xusan jumlada (5) iyada aan lagu hubin ama lagu qorin gacan.
- (7) Iyadoo aan loo eegin jumlada (4) ilaa (6), tilmaamaha ku saabsan wareejinta lacagta elektaroonigga ah waa in la gudbiyaa oo loo fuliyaa sida ay ku heshiiyeen Wasaaradda iyo Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, kaas oo soo celin doona habraaca kaliya marka uu khalad ka jiro faahfaahinta koontada baanka lagu dirayo lacagtaas, mana jirto jiri doonto hubin kale.
- (8) Qoraalka Nidaam Hawleed dhameystiran ayaa qeexi doona habraacyada iyo ilaalinta lagula soconayo habka wareejinta lacagaha elektaroonigga ah iyo habraaca loo xalinayo gudbinta lacagaha aan u gudbin habka elektaroonikada.

40. Lacag bixinta Jeegga

Wax lacag bixin ah oo ka mid ah Miisaaniyadda Qaran laguma bixin doono Jeeg.

41. Lacag bixinta caddaanka

Marka laga soo tago lacagaha yar yar ee baahiyaha maalinlaha lagu bixiyo, hay'addaha dowladdu wax lacag bixin ah oo kaash ama lacag caddaan ah kuma bixin karaan lacagta Miisaaniyadda Qaran.

42. Ilaalinta iyo Maaraynta kharashaadka qarsoodiga lagu bixiyo

Wasiirku wuxuu amri doonaa isku duwidda lagu cadaynayo ilaalinta iyo maaraynta habka loo marayo kharashaadka qarsoodiga ah, sida lagu cadeeey qodob sharciyeedka 13.

Qayb hoosaadka III. Habraaca Mushahar bixinta

43. Masuuliyadaha habraaca mushahar iyo lacag bixinta

Sarkaalka Idman lacag bixinta ee Hay'adda Dowladda ayaa shakhsi ahaan masuul uga ah inuu xaqiijiyo in –

- (a) Shaqaalaysiinta, dalacsiinta, kordhinta mushaharka, gunooyinka, waxqabadka gunooyinka iyo wixii kale ee kharash ee la siinayo shaqaalaha, shaqalahaas oo lacagahooda laga bixinayo Miisaaniyadda Qaranka;
- (b) Dhammaan shaqaalaha maraya habraaca mushahar bixinta hay'ad dowladeed waa –
 - (i) In ka diwaan gashan yahay diwaanka Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka oo loo qoondeeyay hay'adda dawladda; iyo
 - (ii) Si firfircoon uga shaqeeyey oo ay u hawl galisay hay'ad dowladeed mudadii lagu guda jiray mushahar bixinta; iyo
- (c) Hab raaca mushahar bixinta hay'adda dowladu waa ansax, sharci iyo sax.

44. Nidaamyada Maamulka shaqaalaha iyo habraaca mushahar bixinta

- (1) Habka SFMIS ayaa noqon doonta halka rasmiga ah ee nidaamka hab raaca mushahar bixinta Shaqaalaha Dowladda ee ka tirsan hay'adaha dowladda ee lacagtooda laga bixinayo Miisaaniyadda Qaran.
- (2) Marka habka kaabuter garaysan ee maamulka shaqaalaha lagu hormariyo ama lagu maamulo hay'adda dowladda, habka SFMIS wuxuu si buuxda u noqonayaa mid xogta shaqaalaha iyo lacagaha la siinayaaba ay ku wada jiraan, lagana wada arki karo hanaanka kaabuterka ee nidaamka maamulka shaqaaluhu.
- (3) Hay'addaha dowladda ee hawshaani la xiriirta iyo Guddiga Shaqaalaha Qaranka waxay kala shaqaynayaan Wasiirka si loo fuliyo jumlada (2) ee Sharciga, si loo hawl geliyo nidaamka kaabuter garaysan ee maamulka shaqaalaha.
- (4) Ilaa inta laga fulinayo jumlada (2), Wasiirku wuxuu uga baahan karaa hay'ad kastoo dowladeed inay u keento wax kastoo xog ah la xiriira maamulka shaqaalaha ee hay'addas ay ku shaqaynayso, wakhtigay ku soo gaarsiin doonaanna wasiirka ayaa go'aaminaya.

45. Taariikhda mushahar bixinta

Mushaharka dhammaan shaqaalaha hay'addaha dowladda waa in laga bixiyaa Miisaaniyadda Qaran, waxaana si toos ah loogu bixinayaa xisaabtooda ama koontadooda bangi wakhitaga ama ka hor maalinta ugu danbaysa ee bil kasta.

46. Lacagbixinta lagu wareejiyey eletaroonikada

Dhammaan xuquuq lacageed la siinayo shaqaalaha hay'addaha dowladda waxaa lagu bixin doonaa habka wareejinta elektaroonikada.

47. Wax ka bedelka mushahar bixinta

- (1) Marka nidaamka SFMIS uu si buuxda ugu hawl gallo muuqaalkiisu nidaamka kaabuter garaysan ee Maamulka shaqaalaha, sarkaalka odolaanshuhu wuxuu wax ka bedeli karaa xogta faahfaahsan ee qofka kuna kaydsan nidaamka kaabuterka ee maamulka shaqaalaha, kaasoo markuu wax ka bedelo ay si toos ah isu bedelayso xogta ku jirta nidaamka SFMIS, iyadoo ay suurto gal tahay in meel marin looga baahdo Guddiga Qaran ee shaqaalaha rayidka, iyadoo aan wax warqad ah la qorin ama wax kale la daabicin ama aan gacan lagu qorin.
- (2) Guddiga Qaran ee Shaqaalaha Rayidku wuxuu cadayn doonaa –
 - (a) waqtiga loogu talagalay in wax looga beddelo macluumaadka ku saabsan shaqaalaha ee lagu kaydiyey nidaamka kaabuterka ee maamulka shaqaalaha, iyo
 - (b) liiska magacayada saraakiisha u idman inay masuul ka yihiin wax ka bedelista macluumaadka ku saabsan shaqaalaha.
- (3) Ilaa inta laga hormarinayo nidaamka Kaabuter ee maamulka shaqaalaha, Guddiga Qaran ee Shaqaalaha Rayidku waxay masuul ka noqon doonaa wax ka bedelka habaraaca lacag bixinta ee ku kaydsan nidaamka SFMIS, iyadoo ku bedeli kara codsi uga yimadda Sarkaalka Idman ee hay'adda dowladda.
- (4) Codsiga ku aadan wax-ka-beddelka mushaharka ama isbeddellada ku xusan jumlada (3), waa in lagu soo gudbiyaa wax ka bedelkaas sida ay go'aamiyaan Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka.
- (5) Isbeddellada mushaharka ee shaqaalaynta shaqaalaha cusub, waxaa keliya la tix gelin doonaa mushahar buuxa inta lagu jiro muddada mushahar bixinta, waa haddii shaqaalaha cusub uu si firfircoon uga shaqeeyay oo uga hawl galay hay'adda dowladda kahor maalinta 15 ee muddada mushahar bixinta.

48. Xaqiijinta mushaharka ka hor intaan la bixin

- (1) Marka si buuxda loo hawl geliyo hanaanka kaydinta xogta maaliyadda ee SFMIS oo lagu hawl geliyo kaabuterada nidaamka maamulka shaqaalaha, sarkaalka ogolaanaya lacag bixinta ee ku cad Sharciga qodobkiisu yaahy 47, wuxuu xaqiijin doonaa saxnaanta xogta mushaharka ka hor intaan kama danbayn la bixin, qaabkaas waxaa lagu cadeeyey Qoraalka Nidaaminaya Hawgalka Dhamaystiran.

- (2) Cadaynta mushahar bixinta ee lagu sheegay jumlada (1) ee kore waxaa lagu samaynayaa iyadoo la adeegsanayo hanaanka kaabuterka ee maamulka shaqaalaha iyadoo aan wax qoraal ah ama daabacad kale ah la samayn.
- (3) Ilaa inta hanaanka caabuterka ee maamulka shaqaalaha la diyaarin, Xisaabiyaha Guud wuxuu u baahan doonaa in sarkaalka ogolaanaya lacag bixinta ee hay'adda dowladda uu xaqiijiyo saxnaanta xogta mushaharka ka hor intaan kama danbays la bixin, qaabkas uu ku hubinayo waxaa cadaynta Xisaabiyaha Guud.

49. Warqadaha hab raaca lacag bixinta iyo balanqaadayada

- (1) Isla marka uu cadeeyo Xooghayaha Guud, sarkaalka ogolanaya lacag bixinta ee hay'ad kastoo dowladeed wuxuu meel-marinayaa warqadaha lagu bixinayo lacagaha mushaharaad ee ku jira habka SFMIS, kuwaasoo si toos ah ugu gudbinaya warqadaha lacag bixinta iyo mushar bixinta Xisaabiyaha Guud, waana inaysan ka danbayn wakhtigaas la gudbinayo warqadaha lacag bixinta 25ka bisha wakhtigaas.
- (2) Habka SFMIS wuxuu si toos ah u kaydinayaa xogta cadadka gud ee lacagaha lagu bixiyey mushaharka, kuwaasoo lagu meel mariyey warqadaha lacag bixinta ee mushaharka, iyadoo aan gacan lagu qorin.
- (3) Meel marinta warqadaha lacag bixinta ee mushaharaadka iyo gudbinta lacagaha iyo hab raaca mushahar bixinta waxaa lagu samaynayaa iyadoo wax warqado ah aan la buuxin ama aan la daabicin.

50. Habraaca mushahar bixinta

- (1) Ugu yaraan maalin ka hor taariikhda lacag bixinta sida ku cad Qodobka 45 ee Xeer-nidaamiyahaan, Xisaabiyaha Guud wuxuu diri doonaa isagoo adeegsanaya hanaanka SFMIS habraaca baangi oo uu u diirayso Baanka Dhexe ee Soomaaliya si uu hab elektaronid ugu wareejiyo lacagaha mushahaarka lagu bixinayo.
- (2) Habka Bangi ee Baanka Dhexe ee Soomaaliya wuxuu si toos ah oo iskii ah u fulinayaa lacagaha lagu amray hab electronig oo uu ku wareejiyo lacagaha mushaharka iyo xogaha gudbinta mushaharka oo uu dirayo bangiyada ganacsiga, iyadoo aan cid ku samayn hubin gacanta ah ama aan cid wax la gelin.

51. Kaydinta iyo Lacagaha musharka laga jaro

- (1) Marka warqadaha mushaharka lagu bixinayo la meel mariyo, habka SFMIS wuxuu si toos ah oo iskiis ah u kaydinayaa cadadka lacageed ee dakhliga cashuuraadka laga jaray iyo dakhliyada kale ee Miisaaniyadda Qaran ee laga jaray mushaharaadka shaqaalaha dowladda.
- (2) Lacagaha laga jarayo mushaharaadka ee la sinayo qayb saddexaad waxaa lagu siinayaa qaybtaas saddexaad habka electarooniga, iyadoo ay wehliso lacagta saafiga ah ee sahqaalaha la siinayo.

- (3) Habka SFMIS waxaa lagu dari doonaa faahfaahinta ku aadan lacagaha loo jarayo qayb saddexaad –
- (a) Mushahar kasta;
 - (b) Warqadaha lacagaha lagu dalbayo ee mushahar bixinta; iyo
 - (c) Habraaca baanka lagu bixinayo lacagta mushaharka.

52. Joojinta bixinta Mushaharaadka

- (1) Haddii aysan jirin si kale oo loo cadeeyey oo lagu meel mariyey sharci kale, lacagaha mushaharaadka ee shaqaalaha soo socda ee u shaqeeya hay'adda dowladda waa la joojin doonaa wakhtiga ku cad taariikhda soo socota:
- (a) Shaqaalaha dhintay; (maalinta ugu horaysa ee bisha xigta markii shaqaaluhu dhintay);
 - (b) Shaqaalaha lagu helay inuu galay denbi ku lug leh xatooyo ama is daba marin sharci darro ama lagu xukumay xabsi gelin; taariikhda denbiga lagu helo ayaa la joojinayaa;
 - (c) Shaqaalaha qaata fasax aysan mushahar ku helayn; maalinta ugu horaysa ee fasax bilowdo;
 - (d) Shaqaalaha waajibaadkiisa shaqo ka maqan isagoon fasax ku maqnayn; maalinta ugu horaysa ee uu maqnaado;
 - (e) Shaqaalaha laga joojiyey shaqada; maalinta ugu horaysa ee shaqada laga joojiyo; iyo
 - (f) Shaqaalaha is casila ama hawl gab noqda: (maalinta ugu horaysa bisha ku xigta marka shaqaaluhu is casilay ama hawl gab noqday).
- (2) Marka Sarkaal Ogolanaya lacag bixinta ama sarkaal u idman lacag bixinta hay'ad dowladeed sida ku cad xeerka qodobkiisu yahay 47, wuxuu cadaynayaa in saxsanaanta dhacdooyinka lagu xusay jumlada (1) ee kore aan lagu diwaan gelin, lagu kaydin xogtaas habka kaydinta xogta maaliyadda ee SfMIS kama danbays taariikhda la joojiyey mushaharka, Sarkaalka Idman ama sarkaalka kale ee u idman wuxuu si degdeg ah ugu sheegayaa Guddiga Shaqaalaha Qaran ee Rayidka iyo Xisaabiyaha guud xaqiida faahfaahinta xogta.
- (3) Haddii mushahar la siiyey qofka lagu xusay waxyaabaha ku qoran jumlada (1) ee kore kadib markii la joojiyey musharkiisii, Xisaabiyaha Guud ayaa ka qadaya talaaboyinka loo bahan yahay si uu usoo celiyo lacagtii la bixiyey.
- (4) Lacagta dib loo soo celiyey sida ku cad jumlada (3) ee kore, waxaa dib loogu soo celinayaa Khasnadda Dowladda, waxaana lagu xisaabinayaa sheyga ku habboon ee kharash ahaan loogu bixin karo ama shey dakhli ku habboon haddii ay dhacdo lacag celintaas sanad maaliyadeedka socda.
- (5) Habraaca iyo talaabooyinka looga bahan yahay in lagu soo celiyo lacagta lagu cadeeyey jumlada (3) ee kore waxaa lagu caddayn doonaa qoraalka loo dejiyey habraaca shaxada shaqada ee Wasiirka bixiyo.

53. Lacagaha laga jarayo mushaharaadka

- (1) Lacagaha laga jarayo mushahraadka shaqaalaha dowladda waxay ku xadaysan yihiin qaybahaan soo socda:
 - (a) Lacagaha loo jarayo cashuurta iyo tabarucaadka bulshada;
 - (b) ka-goynta macaashka si loo fududeeyo bixinta qaddarka lagu leeyahay ee la siinayo Dowladda ee ka dhashay dheefaha shaqaalaha;
 - (c) lacagaha loo jaray ganaax, khasaare uu geystay ama waxyeelo lagu go'aamiyey iyadoo loo maray habraaca anshaxsiinta shaqaalaha;
 - (d) lacagaha shaqaalaha looga jaro hormaris ama daymo ay qaateen haddii ay jirto;
 - (e) lacagaha looga jaro markii loo baahdo ama lagu ogolaado sharci ama amar maxkamadeed; iyo
 - (f) wax kastoo lacag ah oo la gooyo, taasoo shaqaalaha uu ku ogolaaday heshiis qoraal ah, tasoo uu meel mariyey Xisaabiyaha Guud. .
- (2) Sarkaalka Idman ama sarkaalkastoo loo idmaday hay'add dowladeed inuu masuul uga noqdo lacag bixinta ma samayn karo wax lacag goyn ah oo uu iskiis u doono, lacag goymayhaas oo aan ku cadayn jumlada (1).
- (3) Marka la saxo xogta mushahar bixinta, Sarkaalka Idman ama sarkaalka u idman hay'adda dowladda lacag bixinta wuxuu caddayn doonaa xaddiga lacageed ee laga jaray mushaharkaas inuu yahay intii caadiga ahayd ee laga jarayey iyo inaysan jirin qayb kale oo laga jaray mushaharka si ikhyaar ah.

Qayb hoosaadka IV. Hormarinta lacagaha la sinayo hay'addaha dowladda

54. Xadiga lacagta kaashka ah ee loo hormarinayo hay'adaha dowladda

- (1) Lacag cadaan ah oo kaash ah ee la siin karo hay'adaha dowladda waa –
 - (a) Lacagaha yar yare e lagu daboolayo wax maalinlaha la soo gado;
 - (b) Kharashaadka maamul ee ku baxa safaaradaha iyo xafisiyada dibadda; iyo
 - (c) Wixii kale ee arrin dheeraad ah ee uu ogolaaday Wasiirku oo uu u sheegay Xisaabiyaha Guud
- (2) Ma jiro wax lacag caddaan ah oo hormarin loo siinayaa hay'ad dowladeed sida hoos imanaysa jumlada (1)(c), haddii dhammaan wixii lacag caddaan ah ee horay loo siiyey hay'ad dowladeed ee lagu bixiyey sida hoos imanaysa isla jumlada aysan wax khalad ah ka soo noqon.
- (3) Cadadka lacag bixin kasta oo ah lacag loo hormarinayo hay'addaha dowlada sida ku cad jumlada (1)(c) waxaa go'aaminaya Wasiirka isagoo talo gelinayo Xisaabiyaha Guud.

55. Balanqaadyada lacag bixintaiyo lacag bixinta caddaanka ah ee loo hormarinayo hay'addaha dowladda

- (1) Codsiyada balanqaadyada lacag bixin iyo warqadaha lacag bixinta ee lacag kastoo caddaan ah oo la siinayo hay'addaha dowladda waxaa ansixinaya Xisaabiyaha Guud.

- (2) Si hay'ad dowladeed ay u codsato lacag caddaan ah oo loo hormariyo, Sarkaalka Idman ee hay'addaas ayaa gudbinaya codsi uu marinayo hanaanka SFMIS oo uu ku codsanayo lacag bixin uu kaga codsanayo Xisaabiyaha guud, isagoo ku lifaaqaya warqadaha dheeraadka ah ee faahfaahinta, taageerayana dalabkiisa lacageed.
- (3) Xisaabiyaha guud wuxuu meel marin karaa codsiyada lacag bixinta ee lagu dalbanayo lacagaha caddaanka ee hormariska loo rabo keliya markii –
 - (a) dhammaan lacagaha caddaanka horumariska ahaa ee horay loo siiyey hay'adda dowladeed sida ku cad qodobka sharci ee 54(1)(c) la saxay oo aan khalad lagu arkin; iyo
 - (b) la codsado lacagta diyaarka ee la heli karo ee loogu tala galay kharashaadka la ogolaaday ee daboolaya agabka lagu bixinayo kharashaadka la doonayo in loo isticmaalo lacagaha hormariska loo rabo.
- (4) Habka SFMIS wuxuu dhimi doonaa haraaga la heli karo ee kharashaadka la ogolaaday markastoo la mel mariyey codsiyada lac bixinta ee lacagta caddaanka ah ee la hormariska loo rabo, iyadoo ay ka go'ayso cadadka lacageed ee la bixiyey.
- (5) Meel marinta ku aadan codsiyada bixinta lacagaha caddaanka ah ee ay rabto hay'ad dowladeed, Xisaabiyaha Guud isagoo u maraya habka SFMIS ayuu samayn doonaa qodobadaan, –
 - (a) meel marinta warqadaha lagu dalbanayo lacagaha caddaanka ah hormariska ah, kuwasoo si iskood ah ama toos ah ugu abuurmay habka SFMIS; iyo
 - (b) marka la cadeeyo haraaga lacageed ee la heli karo, wuxuu u dirayaa hab raac bank ee Baanka Dhexe ee Soomaaliya oo lacagta hab elektaronid ugu soo warjinaya koontada Bangi ee hay'adda dowladdu leedahay.
- (6) . lacag caddaan ah oo hormaris ah oo naqad ah lama siin doona hay'adda dowladda.
- (7) Codsiga iyo meel marinta codsiyada lacag bixinta iyo warqadaha lacagaha lagu dalbanayo lacagaha caddaanka hormariska ah eey rabto hay'ad dowladeed waxa lagu samayn doonaa iyadoon wax warqad ah la qorayn ama wax qoraal ah la soo daabacayn.

56. Hantida loo hormarinayo xisaab lacag cadaan ah

Ujeedka Qodobka 31(4) ee Sharciga, marka lacagta caddaanka ah ee hormariska ah la siiyo hay'ad dowlad, hanaanka SFMIS ayaa si toos ah u kaydinaya xogta cadadka lacageed ee laga heli karo kharashka loogu tala galay haydda dowladda.

57. Kharashka iyo lacag bixinta ka imanaysa lacagaha hormariska ah

- (1) Guud ahaan, sida ku cad Xeer-Nidaamiyahaan waxaa lagu dhaqi doonaa kharashaadka lagu galo, lagana bixiyo lacagaha la siinayo hay'ad dowladeed.

- (2) Qodob sharciyeedka 20(1) codsiyada lacag bixinta lagu dalbaday iyo kuwa lagu meel mariyey hanaanka SFMIS ee uu ku meel mariyey Sarkaalka Idman lacag bixinta ee Hay'ad dowlad.
- (3) Sarkaalka Idman lacag bixinta wuxuu meel marin karaa amarada lacag bixin keliya marka codsiyada lacag bixinta la soo jeediyey ay ku jaan go'an tahay lacagta haraaga ah ee la heli karo, taasoo ah tan loogu tala galay kharashka alaabta loo meel mariyey in lagu iibiyo lacagta hormariska cadaanka.
- (4) Xogta Kaydka maaliyadda ee SFMIS waxa ka dhinmi doonaa lacag kasta oo la meel mariyey markii la soo codsaday bixinteed in la bixiyo xadigaas.
- (5) Ujeedka qodobka 21(1) ee Sharciga iyo waxa ku saabsan xulashada alaab keenaha, dalabka wax iibinta waxaa lagu ogolaan karaa, laguna meel marin karaa hanaanka SFMIS oo uu ku ogolanayo Sarkaalka Idman ee u qaabilsan Hay'ad dowlad. Si looga hortago shaki, dalabadkaas alaab iibin uma baahan doonaan hab uu ku meel mariyo Xisaabiyaha Guud.
- (6) Ansixinta warqadaha lacag bixinta loogu talagalay kharashka lagu bixinayo lacagaha caddaanka ah ee hormariska ah waxaa la waafajinayaa sida ku cad Qodobka tirsigiisu yahay 37 ee Xeer-nidaamiyahaan, hadba sida loogu baahdo.
- (7) Marka warqadaha lacag bixinta la meel mariyo sida hoos imanaysa jumlada (6), Sarkaalka Idman lacag bixinta wuxuu meel marin doonaan hab raaca lacag bixinta oo ah habka ku gudbinta lacagta ee elektaroonigga ah, si uu u meel mariyo warqadaha lacag bixinta ee ku jira xogta kaydka maaliyadda SFMIS, marka isagu/iyadu xaqiijiso kaashka la heli karo ee ku haray koontada lacagta loogu tala galay hawl maalmeedka ah ee loo furay hay'adda dowladda sida ku qeexan Qodobka tirsigiisu yahay 70(1)(b) **Error! Reference source not found.** ee Xeer-nidaamiyahaan. .
- (8) Habraaca lacag ku wareejina habka electaroonikada ee lagu meel mariyey sida hoos imanaysa jumlada (7) waxay lacagtaasi ku bixi doontaa si iskeed oo toos ah marka lagu meel mariyey habka SFMIS ee nidaamka Baanka ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliya iyadoo aan wax warqad ah la qorin.
- (9) Kharashka iyo lacagaha la kala gudbiyey sida ku cad xeerkan waxaa loo marayaa habka SFMIS oo ay fulinayso hay'adda dowladdu, iyadoo aan wax warqado ah la qorin ama la daabicin dokumeentiyo.

58. Go'aaminta lacagta kaashka hormariska ee la siinayo hay'addaha dowladda

- (1) Iyadoo la raacayo qaab dhismeedka uu cadeeyey Xisaabiyaha Guud, Sarkaalka ogolanaya lacag bixinta ee hay'ad dowlad wuxuu u gudbin doonaa Xisaabiyaha Guud codsi isagoo adeegsanaya hanaanka SFMIS, codsigaasoo ku saabsan go'aaminta bixinta lacagaha caddaanka ee la isticmaalay.
- (2) Ka hor intuuusan gudbin codsiga go'aaminta lacagta la hormarinayo, Sarkaalka Idman lacag bixintu wuxu gelin doonaa nidaamka SFMIS dhammaan warqadaha taageeraya ee la xiriira lacagaha loo isticmaalay lacagaha la hor mariyey, warqaduhuu gelinayo nidaamka waxaa ku jira qoraalka xogta xisaab xirka baanka ee ugu danbeysay ee ku qoran buugga xisaabta Baanka iyo xog xisaabeedka baanka.

- (3) Xisaabiyaha Guud wuxuu ku meel marin karaa habka SFMIS codsiga bixinta lacagta hormariska ah iyo kharashaadka taagani inaan la hor istaaagin karin, keliya markuu yahay –
- (a) in dhammaan warqadihii taageerayey ee looga baahnaa la geliyey habka SFMIS ama ay diyaar ku yihiin SFMIS, hadba sida ay noqoto;
 - (b) ansaxnaanta, saxnaanta iyo sharcinimada kharashgaraynta loo isticmaalayo lacagta caddaanka ah ee hormariska ay cadeeyaan warqadaha taageeraya; iyo
 - (c) in lagu caddeeyey warqadaha taageraya in lacagtaas hormariska ah loo isticmaalay ujeedkii lagu sheegay markii la soo gudbinayey codsiyada dalabka lacagta hormariska ah, haddii lacag caddaan ah oo hormaris ah ay tahay sida ku cad Qodobka tirsigiisu yahay 54(1)**Error! Reference source not found.** ee Xeer-nidaamiyahan.
- (4) haddii codsiga dalabka lacagta hormariska ah uu diido Xisaabiyaha Guud, Sarkaalka Idman lacag bixinta ee hay'adda dowladdu wuxuu xaqiijin doonaa in sarkaalka masuulka ka ah uu qaadi doona masuuliyadda qofeed dib u bixinta xaddiga lacagta hormariska ah.
- (5) Codsiga bixinta lacagta hormariska ah iyo gudbinta warqadaha taageeraya ee la xiriira kharashgaraynta lacagaha hormariska waxaa lagu diyaarinayo iyadoo aan loo marin wax warqado ah oo la qorayo ama warqado la soo daabacayo.

59. Xisaabinta lacagaha hormariska ah ee la go'aamiyey in la bixiyo

- (1) Ujeedka Qodobka 31(4) ee Sharciga, marka la sameeyo codsi go'aaminta bixinta lacagta caddaanka hormariska ah ee la siinayo hay'ad dowlad, ee uu meel mariyo Xisaabiyaha Guud, habkii SFMIS wuxuu si toos ah u noqon doonaa –
- (a) Mid yaraynaya xaddiga lacagta laga heli karo ee ku jirta khasnadda hay'adda dowladeed, oo waxaa ka go'aya xaddiga lacageed ee la go'aamiyey in loo bixiyo hormaris; iyo
 - (b) xogta xaddiga lacageed ee la go'aamiyey in hormaris loo bixiyo waxay gelaysaa khasnadda kharashka taasoo ah lacagaha hormariska ah ee la isticmaalay.
- (2) Haddii codsiyada go'aaminta lacag bixinta caddaanka ah hormariska ah ee ay rabto hay'ad dowladeed uu diido Xisaabiyaha Guud, hanaanka SFMIS si iskiis ah ayuu ugu celinayaa lacagtii oo uu ka soo celinayaa hay'adda dowladda iyadoo soo maraysa Sarkaalka Idman.

60. Lacagaha hawlgabka ee sinayo hay'addaha dowladda

- (1) Ujeeddada Qodobka 31 (3) ee Sharciga, dhammaan lacagaha kaashka ah ee la gaarsiiyo hay'ad dowladeed waa inay si buuxda uga muuqataa una gashaa, haddii ay la bixiyey ama lacagu celiyo Khasnadda Weyn dhammaadka sannad-maaliyadeedka
- (2) 30 maalmood gudahdood kadib dhammaadka xisaab sanadeedka, Sarkaalka Idman lacag bixinta hay'ad dowlad wuxuu –

- (a) Samaydoonaa inuu hab elektaroonika ugu shubo Khasnadda Dowladda xaddiga dhammaan lacagaha la siiyey hay'adda dowladda ee aa la isticmaalin; iyo
 - (b) Xogta xaddiga lacageed ee lagu wareejiyey habka elektarooniga ah in la geliyo nidaamka SFMIS.
- (3) Marka qaddarka lacagta caddaanka ah dib loogu celiyo Khasnadda Weyn, hanaanka SFMIS wuxuu is iskiis ah (automatic) yareyneysaa qaddarka lacageed ee ay soo celin karto hay'adda dowlad oo ay markale dib u heli karto.
- (4) haddii ay jiraan xaddi lacag caddaan hormaris ah oo la siiyey hay'ad dowlad taasoo weli u taal ahay'adda dowladda, taasoo aan la go'aamin bixinteed ama lagu soo celin 30 maalin gudahood marka uu sanad maaliyadeedku dhammaado, Xisaabiyaha Gud wuxuu ka jari doonaa xaddigaas lacagta taagan weli mushaharka sarkaalka masuulka ka ah hay'addaas dowladda.

61. Lacagaha yaryar ee kaashka ah

- (1) Lacagaha weli taagan ee kaashka yaryarka ah ee hay'ad dowladeed waa inaysan ka badnaan karin xaddiga lacageed ee waafaqsan sida uu cadeeyey Wasiirka ee ku jirta Qoraalka Nidaamiyaha Habraaca Hawlaha.
- (2) Xaddi kastoo lacagaha caddaanka ee yar yar ee hay'ad dowlad kama badnaan karaan xaddigaasi sida lagu cadeeyey Qoraalka Nidaamiyaha Habraaca Hawlaha.
- (3) Lacagaha yar yar ee caddaanka ah hayntooda waxaa masuul ka ah Sarkaalka Idman, isagoo masuul ka ah;
- (a) ilaalinta lacagaha cadaanka ah ee gacmaha ku jira;
 - (b) ilaalinta buugga lagu qoro kaashka iyo xogaha; iyo
 - (c) joogtaynta xisaabta maalin kasta baxda ee la hayo oo lagu qoro buugga lacagaha kaashka ah lagu qoro.
- (4) Wasiirku wuxuu fulin doonaa soo saarista Qoraalka Nidaamiyaha Habraaca hawlaha, kaasoo ay ku caddahay sharciyo faahfaahsan oo la xiriira maamulka lacagaha yar yar ee kaashka ah ee hay'ad dowlad la siinayo. .

Qayb hoosaad VI. Lacagaha loo hormarinayo Shaqaalaha Hay'addaha Dowladda

62. Xaddiga lacagaha caddaanka ah ee loo hormarinayo hay'addaha dowladda

- (1) Lacago kaash ah oo hormaris ah waa la siin karaa shaqaale ka tirsan hay'ad dowladeed, waxaase loo siin karaa keliya waa–
- (a) Lacago safar oo isaga bixinayo kharashaadka safarkaas ku baxaya, taasoo aan si toos ah loogu bixin karin hab elektaroonik ah haddii uu wax soo iibinayo; iyo
 - (b) Ujeedooyinki kale ee lacag lagu bixin karo waxaa go'aaminaya Wasiirka isagoo talada go'aanka u sheegaya Xisaabiyaha Guud.

- (2) Wax lacag caddaan ah lama siin karo shaqaalaha hay'ad dowlad, haddii dhammaan wixii lacago horay loo siiyey shaqaalaha aan la sixin siday ku baxeen.
- (3) Si looga hortago shaki, Shaqaalaha oo loola jeedo qofkastoo ka shaqeeya xarun rasmiya oo dowladdu leedahay oo ay ku jiraan shaqaalaha rayidka, kuwo la magacaabay ama saraakiil lasoo doortay.

63. Ogolaanshaha iyo bixinta lacagaha loo hormarinyo shaqaalaha hay'addaha dowladda

- (1) Codsia ogolaanshaha lacag bixinta iyo warqadaha lagu dalbanayo lacag kastoo caddaan hormaris ah oo la siinayo shaqaale hay'ad dowlad waxaa ansixinaya Sarkaalka u qaybsan lacag bixinta ee hay'adda dowladda.
- (2) Si shaqaalaha hay'ad dowlad u codsado lacag cadaan, sarkaalka ogolaada lacag bixinta ee hay'adda doowladda wuxuu gelinayaa codsigaa SFMIS, ansixinta amarka lacag bixinta codsiga wuxuu nodon doonaa keliya marka –
 - (a) Dhammaan lacagihii horay loo siiyey shaqalahaas marka la saxay oo aysan wax khalad ah lahayn; iyo
 - (b) Bixinta lacagta la codsaday waa marka lacagtaas la heli karo oo ay haraa ku tahay khasnadda loogu amray in lagu bixiyo alaabta la doonayo in loo isticmaalo lacagaha la rabo.
- (3) Nidaamka SFMIS wuxuu yaraynayaa haraaga ku harsan khasnadda kharashaadka la ogolaaday ee codsiyadooda lacag caddaan ahaanta loo meel mariyey.
- (4) Meel marinta codsiyada lacag bixinta ku aadan lacagaha la siinayo shaqaalaha hay'ad dowlad, Sarkaalka ogolaanaya lacag bixinta ee hay'adda dowladda wuxuu fulin donaa in uu geliyo warqadaha lacagaha lagu dalbaday nidaamka SFMIS, uuna u gudbiyo Xisaabiyaha Guud.
- (5) Meel marinta warqadaha dalbashada lacagaha ee ku cad jumlada (4) ee xeerka, marka la cadeeyo lacagta la heli karo, ayaa Xisaabiyaha Guud u diri donaa habraaca bangi ee lagu dirayo Baanka Dhexe ee Somaaliya si uu hab elegtaroonig ah ugu wareejiyo koontada bangiga uga furan shaqaalaha.
- (6) Codsiga iyo meel marinta codsiyada la balan qaaday iyo warqadaha lacag bixinta ee lacagaha la siinayo shaqaalahaha dowladda waxaa la diyaarinayaa iyadoon wax warqad ah la qorin ama la daabicin. Hab elegtaroonig ah ayaa loo diyaarinaya.

64. Xisaabinta hantida loo bixiyey sida lacag

Ujeedka qodobka 31(4) ee Sharciga, marka lacag hormaris ah lagu bixinayo xisaab shaqaale dowladeed uga furan bangi, hanaanka SFMIS si iskiis ah ayuu u kaydinayaa macluumaadka xaddiga lacageed ee xisaabta bangi loogu shubay shaqaalaha.

65. Go'aaminta bixinta lacagaha hormariska ah ee la siinayo shaqaalaha hay'addaha dowladda

- (1) Sida lagu cadeeyey qaab dhismeedka Qoraalka Nidaaminaya Hawlaha, Sarkaalka Idman lacag bixinta hay'adda dowladda wuxuu ku abuuri doonaa, kuna meel marinayaa habka SFMIS, codsiyada go'aaminta lacagaha la siinayo shaqaalaha dowladda, keliya markii; –
 - (a) dhammaan warqadaha loo baahan yahay ee taageeraya lacagtaas waxa loo siinayo loo gudbiyo Sarkaalka Idman qaabilsan;
 - (b) ay ku caddahay warqadaha taageeraya xogta lacagta ee cadaynaya ansaxnaanta, saxnaanta iyo sharcinimada siduu u kharash gareeyey lacagta; iyo
 - (c) shaqaaluhu inuu caddeeyey in ay ama uu dib u bixiyey lacagihii ku harsanaa haddii caadi ahaan lacagtuu isticmaalay ay ka yarayd lacagtii caddaanka ahayd ee uu qaatay.
- (2) Marka la meel mariyo codsiyada lagu dalbanayo lacagaha hormariska sida ku cad jumlada (1), Sarkaalka lacag bixintu wuxuu gelinayaa oo ku kaydinayaa dhammaan warqadaha taageerayay dalabka lacagtaas nidaamka SFMIS ee la xiriira kharashgaraynta lacagtuu qaatay.
- (3) Haddii cosiga lacagbixin kaash ah uu diido sarkaalka masuulka ka ah lacag bixintu, shaqaalaha dowladda ee doonayey in uu lacagtaas helo isagaa si shakhsi ah masul uga ah inuu dib u soo celiyo xaddi kastoo lacageed oo loo hormariyey.
- (4) Marka laga soo tago jumladaha (1),(2) iyo (3), hormariska lacagaha loo siinayo shaqaalaha hay'ad dowladeed waxaa la marin karaa in laga gooyo mushaharka shaqaalaha iyo lacagaha kale ee uu dib u bixinayo iyadoo la adeegsanayo nidaamka SFMIS.
- (5) Codsiga lacag bixinta iyo warqadaha taageeraya ee la xiriira kharash garaynta lacagaha ee hoos imanaya xeerkan waxaa la diyaarinayaa iyadoon la adeegsan warqado ama warqado la soo daabacay.

66.Xisaabinta lacagaha la go'aamiyey in la bixiyo

Ujeedka Qodobka 31(4) ee Sharciga, marka lacagta la siinayo shaqaalaha hay'ad dowlad la sii daayo, nidaamka SFMIS isagaa si toos ah u samaynaya; –

- (a) yaraynaya xaddiga lacageed ee uu heli lahaa shaqaaluhu oo uu ka jaraya xaddigii lacageed ee loo sii daayey; iyo
- (b) Xogta lacagta la go'aamiyey in la siyo ee lagu shubay xisaabta koontada taasoo ah tan lacagta loo isticmaalay.

67. Lacagaha hawl gabka ee la siinayo shaqaalaha hay'addaha dowladda

- (1) Ujeedka Qodobka 31(3) ee Sharciga, dhammaan lacagaha kaashka ee la siinayo shaqaalaha hay'addaha dowladda waxaa si buuxda loogu muujin doonaa saxsanaantooda ama wixii dib loo bixiyo dhammaadka sanad xisaabeedka, iyadoo loo dejinayo wakhti astaysan oo lagu caddeeyey Qoraalka Habraaca Wax qabadka shaqada ee wasiirku soo saar.

- (2) Haddii ay jirto lacag la siiyey shaqaale hay'ad dowladeed katirsan oo ku harsan shaqaalaha, lacagtaas oo aysan sugnayn saxnaanteeda ama uusan shaqaaluhu dib u soo celin 30 maalmood gudahood kadib dhammaadka miisaaniyad saadeedka, Xisaabiyaha guud wuxuu ka jari doonaa lacagtaas lagu leeyahay shaqaalaha mushaharkiisa

Qaybta V. Qaybta Iskudubaridka Bangi iyo maamulka lacagaha

Qayb hoosaadka I. Iskudubaridka Bangi

68. Habka muuqaalka bangi ee lagula soconayo hawlaha Baanka Dhexe ee Soomaaliya

- (1) Ujeedka Qodobka 27(6) ee Sharciga –

- (a) Habka kaydina xogta maaliyadeed ee Soomaaliya SFMIS waxaa si buuxda loogu muujinayaa muuqaalka lagula socdo habka bangi ee Baanka Dhexe ee Soomaaliya
- (b) Warbixin xisaabeedka baanka iyo haraaga Khasnadda Guud iyo dhammaan xisaabaadka kale ee ka furan Baanka Dhexe ee Soomaaliya ee ay leeyihiin hay'addaha dowladda si joogto ah oo iskeed ah (automatic) ayaa lagu darayaa hanaanka SFMIS wakhtiga saxda ah ee loo dejiyey; iyo
- (c) Xisaab xirka maaliyadda khasnadda guud iyo xisaabaadka kale ee ka furan Baanka Dhexe ee Soomaaliya ee ay leeyihiin hay'addaha dowladda, waxaa si toos ah loogu hawl fulinayaa shaqooyinkiis maalinle hanaanka SFMIS.

- (2) Baanka Dhexe ee Soomaaliya wuxuu shaqo wadaag la noqonayaa Xisaabiyaha Guud, si loo fuliyo jumlada sharci ee (1) iyo xaqiijinta waxtarka iyo dhamystirnaanta shaqada muuqaalka lagula soconayo nidaamka SFMIS ee nidaamka bangi ee Baanka Dhexe ee Soomaaliya.

69. Lacagaha ay tahay in lagu bixiyo Baanka Dhexe ee Soomaaliya

Si-waafaqsan Qodobka 68 ee Xeer-nidaamiyahaan, lacagaha ay tahay in lagu bixiyo Baanka Dhexe ee Soomaaliya ee ah maamulka xisaabaadka bangi ee dowladda wuxuu nodon doonaa mid ku salaysan, xiriirna la leh qiimaha caadiga ah ee adeegyada lagu bixiyo Baanka Dhexe ee Soomaaliya.

70. Khasnadda Maaliyadda Dowladda

- (1) Ujeedka Qodobka 42(1) ee Sharciga, Wasiirku wuxuu dhisi doonaa Khasnadda Maaliyadda Dowladda, taasoo ay ku saxnaan karto ugu yaraan shuruudahaan soo socda:

- (a) Khasnadda Maaliyadda Dowladda waxaa ka mid ah akoon xisaabeed weyn oo laga furay Baanka Dhexe ee Soomaaliya (kaasoo la yiraahdo Khasnadda Maaliyadda Dowladda), iyo koonto xisaabeed ay sii marto dakhliga cashuuruhu oo laga furay bangiyada ganacsiga;

- (b) Xisaab hoosaadyada ku xiran Khasnadda Maaliyadda Dowladda waxaa noqon kara;
- (i) Xisaabaad bank oo loo furay deeqaha gargaarka ee dibadda
 - (ii) Xisaabaad bangi oo loo furay maaliyadda dheeraadka ah ee hoos imanaysa qodobka 71;
 - (iii) Koonto xisaabeedyo bangiyo oo loo furay safardaha iyo xafiisyada dibadda;
 - (iv) Xisaab bangi oo loo furay dakhliga dhaqaalaha ee ka soo xerooda Khayraadka dabiiciga ah, sida lagu caddeeyey Qodobka tirsigiisu yahay 117(2) ee Xeer-nidaamiyahan; iyo
 - (v) Wixii kale ee dheeraad ah oo xisaab bangi ah ee loo furay hay'addaha dowladda
- (c) Dhammaan cashuurta iyo dakhliga aan cashuurta ahayn iyo wixii kale ee la helay, oo ay ka mid yihiin lacagaha la dhigtay ee hay'addaha dowladda, intaan ka ahayn deeqaha ay bixiyaan deeq bixiyayaashu ee aan ahayn lacagta miisaaniyadda lagu kabo, waxaa lagu shubi doonaa Khasnada Guud ama xisaabaadka (akoonada) uu sii maro dakhligu intaan khasnadda weyn la gaarsiin, laakiin kuma jiri doonaan bangi xisaabeedka loogu tala galay lacagaha dheeraadka ah ee lagu xusay Qodobka 71(1) ee Xeer-nidaamiyahan;
- (d) Iyadoo la waafajinayo Qodobka 42(4) ee Sharciga, dhammaan lacagaha lagu soo shubo akoon xisaabeedka lacagaha dakhligu sii maraan waxaa si toos ah loogu shubayaa Khasnadda guud ee dowladda maalin kasta intaan shaqada laga bixin.
- (e) Dhammaan kharashaadka iyo lacagaha kale ee la siinayo hay'addaha dowladda waxaa laga bixinayaa Khasnada Guud ee dowladda, intaan ka ahayn kharashaadkaan soo socda oo laga bixin karo akoon xisaabeed ka baxsan khasnadda guud, waana kuwaan—
- (i) Kharashaadka ay bixiyeen deeq bixiyayaashu oo aa ku jirin Miisaaniyadda Qaran;
 - (ii) Kharashaadka loo adeegsado alaabaha yar yar ee maalinlaha la soo iibiyo;
 - (iii) Kharashaadka ku baxa safaaradaha iyo xafiisyada dibadda; iyo
- (f) Waxaa jiri doona akoon hoosaad xisaabeed oo noqon doona akoon xisaabeedyo lagu furay habka SFMIS iyo halka lagu shubo lacagaha iyo isu dheelitirka amaahda oo koonto xisaabeed hooseedyada kasta si gooni ah loogu diwaan gelinayo habka kaydinda xogta SFMIS;
- (g) Habka xogkaydinta ee SFMIS waxay si buuxda u soo muujinaysaa muuqaalka xisaabaadkaan oo ay ku soo muujinayso hababka Baangi ee Baanka Dhexe ee Soomaaliya iyo bangiyada ganacsiga, iyadoo ay la socdaan akoon xisaabyada lagu daray ee loo furay, lacagahana u sii maraan Khasnadda guud ee dowladda
- (h) Qoraal xisaabeedyada iyo haraaga lacageed ee dhammaan akoon xisaabeedka hoos yimaadda Khasnadda Guud waxay noqon doonaan

kuwo si joogto ah loogu guro xogta dhaqaalaha ku soo dhaca, iyadoo la adeegsanayo hanaanka SFMIS wakhtiga saxda ahna la joogtaynayo xogtooda;

- (i) Joogtaynta xisaab xirka koontada xisaabaadka bangi oo la ogaanayo waxa ku haray ayaa laga fulinayaa dhammaan koontooyinka xisaabeed oo ay ka mid tahay Khasnadda Dowladdu, waxaana si toos ah (automatic) loogu muujinayaa hanaanka SFMIS maalinkastoo la shaqaynayo.
- (2) Si looga fogaado shakiga iyo iyadoo la fulinayo habka muujinta xogta ee lagu muujinayo SFMIS iyo nidaamka Bangiyada ee Baanka Dhexe ee Soomaaliya, xisaabaha banigaga iyo qoraalada dhammaan mashaariicda deeq bixiyaayasha ee lagu daro miisaaniyadda qaranka si toos ah ayaa loogu shubayaa habka kaydinta xogta maaliyadeed ee SFMIS, waxaana lagu shubayaa xogta wakhtiga saxda ah ee hawsha la hayo.
- (3) Wasiirku wuxuu diyaarin doonaa Qoraalka Nidaaminaya Hawlaha, oo cadaynaya faahfaahin ku aadan sharciyada kusaaya hawlaha qaabdhismeedka Khasnadda guud ee dowladda.

71. Koonto xisaabeedka maaliyadda dheeraadka ah

- (1) Sida uu ogolanayo Wasiirku, Xisaabiyaha Guud wuxuu furi doonaa koonto xisaabeed uu ka furayo Baanka Dhexe ee Soomaaliya, kasoo lagu shubi doono dakhliga Miisaaniyadda Qaran ee lagu ridayo oo ujeedka koontadaani tahay in loo abuurto maaliyadda dheeraadka ah.
- (2) Koonto xisaabeedka maaliyadda dheeraadka ah ee lagu xusay jumlada (1) ee kore waxay lacagta ka soo gelaya, kana wareejinaysa keliya lacag ka imanaysa kuna socota Khasnadda Guud ee Dowladda.
- (3) Dakhliga Miisaaniyadda Qaran laguma shubi doono koonto xisaabeedka maaliyadda dheeraadka ah ee lagu xusay jumlada (1) ee kore, haddii marka hore dakhigaas Miisaaniyadeed aan lagu shubin Khasnadda Guud.
- (4) Wasiirku wuxuu amri kara, cadayna kara sharciyo iyo habraacyo lagu isticmaalo, laguna maamulo koonto xisaabeedka maaliyadda dheeraadka ah ee lagu sheegay jumlada (1) ee kore.

72. Balaadhinta Khasnadda Maaliyadda Dowladda

Ujeedka Qodobka 42(1) ee Sharciga, Wasiirku wuxuu balaaran karaa Khasnadda Maaliyadda Dowladda si uu ugu soo daro koonto xisaabeeydada laga furay bangiyada kale ee gacanta ka geysanaya dhaqaale ururinta, wuxuuna Wasiirku go'aaminayaa wakhtiga la balaarinayo ee la furayo koontooyinkaas.

73. Heerka Heshiisyada adeegga

- (1) Wasiirka iyo Gudoomiyaha Baanka Dhexe ee Soomaaliya waxay diyaarin doonaan heerka heshiiska adeegga la qabanayo, adeegyadaas oo ay ka mid yihiin –
 - (a) Masuuliyadaha Baanka Dhexe ee Soomaaliya ee ku saabsan hawlaha Khasnadda Dowladda;

- (b) Isu dheeli tirka lacagaha mushaharka iyo gunooyinka laga bixinayo Khasnadda Guud;
 - (c) Khidmahada kharash ee lagu bixinayo Baanka Dhexe ee Soomaaliya; iyo
 - (d) Waxyaabihii kale ee lagama maarmaanka u ah hawlaha Khasnadda Guud
- (2) Xisaabiyaha Guud wuxuu la dhamaystiri doonaa heshiisyada heerka adeegga bangiyada ganacsiga ee ay ka furan yihiin koontada xisaabaadka ay sii maraan lacagaha dakhligu ama koonto bangi kasta oo hay'ad dowladeed leedahay oo laga furay bangiyada ganacsiga.
 - (3) Sarkaalka Ogolaansho ee hay'ad kastoo dowladeed wuxuu meel marin doonaa isagoo kaashanaya Xisaabiyaha Guud, inay la gaaraan Baankiyada ganacsiga heshiis ay ku qabanayaan adeegyo oo la xiriira koontoyinka xisaabeed ee looga furayo dhammaan hay'addaha dowladda.
 - (4) Nuqulada heshiisyada heerka adeeg bixin ee lagu xusay jumlada (1) iyo (3) ee kore waxaa loo geyn doonaa Xisaabiyaha Guud.
 - (5) Heshiisyada heerka adeegga ee ku xusan cutubyada (2) iyo (3) waa in lagu caddeeyaa heerka mushaharka ee dheelitirka amaahda ee xisaabaadka bangiga iyo khidmadaha ku saleysan kharashka ee la siinayo bangiyada ganacsiga.

74. Gaaritaanka koontooyinka bangiga iyo diiwaankooda

- (1) Ujeedka Qodobka 41(2) ee Sharciga, Xisaabiyaha Guud wuxuu u leeyahay awood uu ku dalbanayo in baananka ganacsiga ay u soo gudbiyaan warbixinaha xisaabaadka iyo wax kastoo warbixin ah oo la xiriira koonto xisaabeed u furan hay'ad dowladeed, haddii uu hoos tago ama uusan hoos tegin Khasnadda Guud, waana in xogtaas uu helaa wakhtiga iyo marka Xisaabiyaha Guud go'aamiyo ama dalbado.
- (2) Xisaabiyaha Guud wuxuu ogolaan karaa furitaanka koonto bangi sida uu dhigayo qodobka 42(3) ee Sharciga, keliya marka bangiga ganacsigu uu ogolaado inuu warbixinaha la siinayo Xisaabiyaha Guud sida ku cad jumlada (1).
- (3) Haddii bangiga ganacsigu ku guul darayso inuu siiyo waribixinta ku saabsan koonta xisaabeed Xisaabiyaha Guud, sida ku cad jumlada sharci (1), Xisaabiyaha Guud wuxuu xiri doonaa koonta xisaabeedkaas.
- (4) Xisaabiyaha Guud wuxuu joogtayn doonaa inuu ku diwaan geliyo nidaamka SFMIS dhamaan koonto xisaabeedyada laga furay bangiyada ganacsiga iyo Baanka Dhexe ee Soomaaliya ee ay leeyihiin dhammaan hay'addaha dowladda, qayb ha ka ahaadeen ama yeysan ka ahaan Khasnadda Guud.

75. Iswaafajinta xisaabta Baanka iyo diwaanada laca bixinta

- (1) Iyadoo la tixgelinayo koonto xisaabeedka ka baxsan khasnadda dowladda, sarkaalka ogolaanaya lacag bixinta ee hay'ad kasta oo dowladedd wuxuu fulin doonaa hanaanka iswaafajinta xisaabta baanka iyo diwaanada lacagaha baxaya lagu qoro, wuxuuna warbixintii xisaab xirka uu sameeyey u gudbinayaa Xisaabiyaha Guud muddo 7 maalmood gudahood dhammaadka bil kasta.
- (2) Wasiirku wuxuu soo saari doonaa Qoraalka Nidaaminaya Shaqada Dhamaystiran oo cadaynaysa faahfaahina looga baahan yahay iswaafajinta

xisaabta baanka iyo diwaanada lacagaha la bixinayo lagu qorayo, sida hoos imanaysa jumlada (1) ee kore.

Qayb hoosaadka II. Maamulka lacagta

76. Nidaamka Maamulka Lacagta

- (1) Iyadoo la raacayo Qodobka 41 (1) ee Sharciga, Wasiirku wuxuu leeyahay mas'uuliyad guud oo ah inuu hubiyo in habraaca shaqo ee hay'adaha iyo maamulkoodu ay ku habboon yihiin Nidaamka Maamulka Lacageed oo wax tar u leh Dowladda Federaalka.
- (2) Ujeedka Qodobka 41(1) ee Sharciga, Qaybta Maamulka Lacagta waxaa masuuliyadooda lagu dhisayo hoos imaanaysaa Xafiiska Xisaabiyaha Guud oo masuul ka ah inuu soo saaro qiimaynta lacagta Khasnadda Guud iyo wax qabadka masuuliyadaha kale ee looga baahan karo Wasiirka ama Xisaabiyaha Guud.
- (3) Xisaabiyaha Guud wuxuu dhisi doonaa Guddiga Maamulka Maaliyadda, marka la ansixiyo Wasiirka.
- (4) Guddiga Maamulka Maaliyadu waa inay xaqiijiyaan in lacagaha lagu heli karo wakhtigooda, si loogu diyaariyo in lagu bixiyo dhammaan lacagaha la amray in la bixiyo wakhtiga loogu tala galay in laga bixiyo Miisaaniyadda Qaran, waxay kale oo masuul ka noqon doonaan dib u eegid iyo ka talo bixin ay siinayaan Wasiirka oo ku aadan qiyaasta lacagta ku jirta Khasnadda Guud iyo fulinta waajibaadyada kale, hadba sida Wasiirku ugu baahdo.
- (5) Iyadoo la raacayo Qodobka 10 (f) ee Sharciga, Guddiga Maamulka Qasnadda waxaa hoggaaminaya Xisaabiyaha Guud xubnahuna wuxuu ka kooban yahay kuwan soo socda;
 - (i) Xisaabiyaha Guud (Guddoomiye);
 - (ii) Xubin ka socota Xafiiska Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda;
 - (iii) Agaasimaha Miisaaniyadda Qaran;
 - (iv) Agaasimaha Siyaasadda Dhaqaalaha iyo Qorshaynta;
 - (v) Madaxa Waaxda Maamulka Deymaha;
 - (vi) Agaasimaha Guud ee Dakhliga cashuuraha;
 - (vii) Madaxa qaybta Maamulka Lacagta (Xoghayn)
 - (viii) Xubin metelaysa Baanka Dhexe ee Soomaaliya (madaxii hore oo kale) iyo
 - (ix) Iyo Sarkaal kale oo ka socda dowladda hadba siduu ku go'aamiyo Wasiirka Maaliyaddu.
- (6) Guddiga Maamulka Maaliyadda waajibaadkooda Shaqo waa kuwaan soo socda;
 - (a) Dib u eegista misaaniyad sanadeedka si loo damaanad qaado dakhliga billaha;

- (b) Dib-u-eegista miisaaniyadda sanadlaha ah si loo aqoonsado kharashka si aan kutala gal ahayn ku yimaadda kuna baxa iyo qaababka kharashka bil kasta baxaya loogu qiimeyo;
 - (c) Falanqayn qiimayn ay ku sameeyaan qorshayaasha kharash bixinta Hay'adaha Dowladda seddexdii biloodba mar ay soo gudbiyaan;
 - (d) Go'aaminta ilaha laga heli karo ee loogu talagalay kharashaadka hawlgalka, loona dejiyo jaangoyn lacageed oo bille ah hay'ad kasta kharash bixinteed oo ay ku fuliso Waaxda Miisaaniyadda ee ku qoran nidaamka SFMIS.
 - (e) Dib-u-eegista isu-dheelitirka lacagaha kaashka ah bil kasta iyo warbixinnada saadaasha ee Qaybta Maareynta Lacagta ay soo saaraan, isla markaana u soo jeediso talooyin Wasiirka, si wax looga qabto saadaasha ku aadan in lacag la'aani jirto, oo ay ku jiraan istiraatiijiyadaha maalgelinta iyo / ama baahida loo qabo dib-u-eegista miisaaniyadda.
 - (f) Meel marinta iyo dhaqan gelinta warbixinta looga baahan yahay xisaabaadka iyo haraaga maalin kasta ku jirta baanka iyo qoraal xisaabeedka todobaadlaha ee laga diyaarinayo Baanka Dhexe ee Soomaaliya oo loo dirayo Qaybta Maamulka Lacagta.
 - (g) Baadhitaan ku sameeyaan heerarka fulinta miisaaniyadda ee Hay'adaha Dowladda, lana caddeeyo xaaladaha walaaca leh taasoo Wasiirku la soo jeedin karo Sarkaalka Idman iyo Wasiirka.
 - (h) Qaybta Maamulka Lacagtu inay sameeyaan saddex bilood oo kasta dib u eegid kana diyaariyaan warbixin koobaysa.
 - (i) Bixinta qiimeyn guud iyo hagid la siinayo Qaybta Maamulka Lacagta iyo fulinta qorshaynta wax qabadka maamulka lacagta;
 - (j) Kormeerka la xiriira dib u habaynta maamulka lacagta dowladda kaasoo saamayn ku leh maamulka lacagta; iyo
 - (k) La talinta ku saabsan wax kastoo ka soo bixi kara hawlaha oo ah hufnaanta nidaamka maamulka lacagta ee Dowladda Federaalka.
- (7) Ujeedka jumlada (6), Wasiirku wuxuu leeyahay awood uu ku ogaan karo dhammaan isticmaalayaasha miisaaniyadda, uu kaga dalbanayo dhammaan waribixinaha lagama maarmaanka u ah waxtarka hawlahooda ee nidaamka maamulka lacagtay isticmaalaan;
- (8) Wasiirku wuxuu samayn doonaa Qoraalka Nidaaminaya Hawlaha, oo cadaynaya faahfaahinta shuruudaha lagu tixraacayo iyo hab raaca Guddiga Maamulka Khasnadda iyo Qaybta Maamulka Lacagta

77. Ururinta xogta saadaasha lacagta

- (1) Siwaafaqsan Qodobka 41 (1) iyo Qodobka 28(1) ee Sharciga iyo iyadoo aan loo Qodobka 17-aad Xeer-nidaamiyahaan, Sarkaalka Idman hay'ad dowladeed waa inuu u soo gudbiyaa Wasaaradda lacagta iyo qorshooyinka kharashka ee hay'adda dawladda qaabka ay tahay iyo hababka u degsan, waana inuu usoo gudbiyaan sida joogtada ah ee wasiirku u arko inay u tahay lagama maarmaan.

(2) Waxaa dheer jumlada (1), Qaybta Maamulka Lacagta waxay awood u yeelan doonaan inay uga baahdaan waaxaha Maaliyadda iyo dakhliga, Qaybta Maamulka Daymaha iyo qaybtii kale oo kasta ama qaybaha Wasaaradda, iyo qayb kastoo kale oo ka tirsan hay'adaha dowladda in ay u soo gudbiyaan waaxda maamulka lacagta xog kasta iyo qiimayn kasta oo ku saabsan sida lacagahooda u baxaan iyo siday u isticmaalaan, iyaguu u soo gudbinaya habkay u qaabeeyeen, habkay doonayaan iyo wakhtiyada ay doonayaan sida ay go'aamiyaan Qaybta Maamulka Lacagtu.

Qaybta VII. Maamulka Deymaha iyo Deeqaha

78. Ujeedooyinka Deeymaha

Si waafaqsan Qodobka 36 ee Sharciga, Wasiirku waa in uu ku soo daraa Xeerka Qoondada Miisaaniyadda ee sanadkaas, ujeedooyinka Wasiirku wax usoo deysan karo sanadkaas gudihiisa.

79. Xeeladaha maaraynta deymaha iyo barnaamijyada daymaha Dawladda

(1) Si waafaqsan Qodobka 35-aad iyo 36-aad ee Sharciga, Waaxda Maareynta Deymaha oo kaashanaysa Agaasimaha Miisaaniyadda, Xisaabiyaha Guud, iyo Sarkaalka Idman ee Wasaaradda Maaliyadda, ayaa diyaariyaan una gudbiyaan Wasiirka si loo ansixiyo;

(a) istaraatiijiyadda maaraynta deynta muddada-dhexe, kaas oo bixin doona tilmaamo la xiriirta shuruudaha, iyo maaraynta khataraha deynta; iyo

(b) barnaamijka Deynta Dawladda ee sannadlaha ah.

(2) Istaraatiijiyadda maaraynta deynta muddada-dhexe waa in la diyaariyaa iyadoo lala tashanayo Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, laguna daabaco mareegta Interneetka ee Wasaaradda.

(3) Barnaamijka deynta Dawladda ee sannadlaha ah waa inuu qaby ka noqdaa dukumentiyada ku yaal qodobka 14 ee Xeerkan.

80. Sida deyntu ula falgaleeyso miisaaniyadda

(1) Si looga fogaado shaki, -

(a) bixinta dulsaarka waxay noqonaysaa kharashbixin, sidaa darteed waxay u baahantahay in Xeerka Qoondada Miisaaniyaddu u sameeyo qoondo; laakin

(b) dib u bixinta deynta asalka ah ma'ahan kharashbixin, sidaa darteedna uma baahna in Xeerka Qoondada Miisaaniyaddu u sameeyo qoondo;

(2) Miisaaniyadda Qaranku waa inay si kala duwan usoo bandhigtaa odoroska dakhliga ka imaanaya deymaha iyo midka ku socda dib ubixinta deymahaas oo dhinac ah iyo odoroska dakhliga iyo kharashaadka la qoondeeyay.

(3) Iyadoo aan loo eegin farqada (1), bixinta dulsaarka iyo dib u bixinta deynta asalka ah waxay u baahan tahay qoondayn iyo codsi-kharasgbixin (warrants) lagu sheegay Qodobbada 18 iyo 19 ee Xeerkan waxayna ku xiran tahay ansixinta ballan qaadka sida ku cad Qodobka 20 ee Xeerkan.

(4) Waaxda Maareynta Deymaha waa inay ku codsata gudaha Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) qoondaynta iyo codsiga kharashbixinta (warrant) ee lagama maarmaanka u ah deyn bixinta, waqti kufilan kahor inta aan la gaarin taarikhda deyn bixinta.

81. Bixinta deymaha

(1) Waaxda Maareynta Deymaha waa inay ugu yaraan shan iyo toban maalmood ka hor inta aan la gaarin xilligii deyn bixinta, ay ka heshaa deynlaha qaansheegta deynta, kadibna ay ku diiwangelisaa Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), si waafaqsan Qodobka 36-aad ee Xeerkaan.

(2) Xafiiska Xisaabiyaha Guud, waa inuu ku dhex oggolaada Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) ugu yaraan lix maalmood ka hor taariikhda kama dambaysta ah ee deyn bixinta, kadibna utilmaama Bangiga Dhexe ee Soomaaliya bixinta deynta.

(3) Bankiga Dhexe ee Soomaaliya waa in uu ugu yaraan laba maalmood ka hor inta aan la gaarin xilligii deyn bixinta, si elegtroonig ah ugu wareejiyaa deynta deyn-laha ama bangiga dayn-laha, haddii uu sidaa isticmaalo, si uu u fuliyo tilmaamta loo soo diray si waafaqsan farqada (2).

82. Nidaamka maaraynta deynta ee habka kumbuyuutarka

(1) Waaxda Maareynta Deymaha waa in ay si hufan u maamushaa Nidaamka maaraynta deynta ee habka kumbuyuutarka, kaas oo lagu keeydinaayo xogta dhammaan deymaha Dawladda Federaalka iyo jadwalka bixintooda.

(2) Waa in ay jiraan xiriir toos ah (automated interfaces) oo u dhexeeya Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) iyo Nidaamka Maaraynta Deynta ee Habka Kumbuyuutarka, kaasoo oggolanaay in labada nidaam midba midka kale xogta si toos ugu diro ugana helo.

(3) Dhammaan qaansheegyada, boonnada lacag-bixinta, iyo tilmaamaha bangiga loo diray ee deyn bixinta ee dhammaan deymaha Dowladda Federaalka waa in lagu diiwaan-geliyaa, lagu ansixiyaa, oo lagu soo saara Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).

83. Shuruudaha dammaanad-qaadyada iyo deyn-bixinta

(1) Wasiirku waxa uu dammaanad bixin karaa oo keliya, sida uu dhigayo Qodobka 37 ee Sharciga, marka dhammaan shuruudahan soo socda la buuxiyo;

(a) Cidda lasiinaayo damaanadda waa inay tahay Dawlad Xubin ka ah Dawladda Federaalka ama Shirkad Dawladdu leedahay;

(b) Dammaanad qaadka waxaa laga bixinayaa deyn laga helay hay'ad Maaliyadeed oo Caalami ah; iyo

(c) Dammaanadda waxaa laga bixinaya lacag go'an oo xadidan, waxa ayna jiraysaa muddo cayiman.

(2) Wasiirku oo keliya ayaa leh awoodda in deyn laga qaato lacagta dawladda.

(3) Si waafaqsan Qodobka 36(2) Wasiirku wuxuu deyn ka bixin karaa lacagta Dawladda marka dhammaan shuruudaha soo socda la buuxiyo oo keliya;

(a) Cidda lasiinaayo denynta waa inay tahay Dawlad Xubin ka ah Dawladda Federaalka ama Hay'ad Dawladeed.

(b) Deynta waxay ka baxaysaa deyn uu Wasiirka kasoo helay Hay'ad Maaliyadeed oo Caalami, waxaana lagu bixinayaa isla shuruudihii deyntaas caalamiga ah lasocday.

84. Oggolaanshaha dammaanad-qaadyada iyo deyn-bixinta

(1) Siwaafaqsan Qodobka 35-aad iyo 36-aad ee Sharciga, Wasiirku waa in uu Baarlamaanka ka codsadaa ansixinta dammaanadaha iyo daymaha, isaga oo ku daraaya Miisaaniyadda Qaranka, waxaana laga rabaa inuu soo gudbiyo:

(a) Nuqullada qabyo qoraalka ah ee damaanadda iyo heshiiska deyn bixinta;

(b) Heshiiska deynta ee asalka ah ee sahlaya in Dawladdu deynta bixiso;

(c) Qoraal ku saabsan khatarta ka imaan karta damaanadaha iyo deynta.

85. Diiwangelinta damaanadaha iyo deymaha

(1) Siwaafaqsan Qodobka 37(7) ee Sharciga, Waaxda Maareynta Deymaha ayaa ku diwaangelineysa nidaamka maaraynta deynta ee habka kumbuyuutarka, warbixinnada iyo xoggaha soo socda ee quseeya damaanad iyo deyn kasta ee laga bixiyay lacagta Dawladda:

(a) Nuqul damaanadda ah iyo heshiiska deynta;

(b) Nuqul qaraarka Baarlamaanku ku ansixiyay;

(c) Xog ku saabsan shuruudaha damaanada ama/iyo deynta;

(d) Xog ku saabsan awoodda maaliyadeed ee deyn-qaataha;

(e) Haddi deyntu tahay mid kulamaanan damaanad, xog ku saabsan sida loo gudaayo deynta la damaanad qaaday;

(f) Xog ku saabsan dib-ubixinta deynta.

(2) Waaxda Maareynta Deymaha waa inay toban maalmood gudahood dhamaadka sadaxdii biloodba mar, ka dalbataa Hay'adda Caalmiga ah ee Maaliyadda xog ku saabsan fulinta shuruudaha kulamaanan deynkasta taasoo Dawladdu damaanad qaaday, kadibna ku diiwangelisaa nidaamka maareynta deymaha.

(3) Waaxda Maareynta Deymaha waa inay toban maalomood gudahood dhamaadka sadaxdii biloodba mar, dalbataa bayaanka maaliyadda ee hay'adda Dawladdu damaanad qaaday deyn teeda.

86. Kharashka dulsaaran damaanadaha Dawladda

(1) Markii damaanad qaad waafaqsan Qodobka 37 ee Sharciga labixiyo, Wasiirku waa inuu kharash ku filan ee dabooli kara khataraha ka imaan kara damaanad qaadka dulsaarayo damaanadda labixiyay.

(2) Cidda lasiiyay damaanad-qaadka Dawladda waa inay ku shubtaa Qasnada Dawladda lacag horumaris ee ku aadan damaanad lasiiyay.

87. Habka deyn aruurinta

(1) Haddii cidda deynta Dawladda ka qaadatay ama damaanadda lasiiyay ay dib u bixin weeyso deyn ama u ekaato inaysan bixin rabin deynta, Waaxda Maareynta Deynta, iyadoo u hogaansameeysa tilmaamaha Xisaabiyaha Guud, walibana kaashaneysa Garyaqaanka Guud, waa inay Wasiirka talo kusiida ficillada haboon in la qaado si deynta dib loogu soo celsho gacanta Dawladda.

(2) Xisaabiyaha Guud wuxuu isticmaali karaa hay'adda ama shirkad Maaliyadeed ee ku shaqeysata arrimaha deyn aruurinta, si'uu dib ugu soo celsho gacanta Dawladda damaanada iyo deynta horay loo bixiyay.

(3) Ballanqaad iyo lacag-bixin ku aadan dib ubixinta damaanad Dawladdu leedahay waa in loo sameeyay si waafaqsan habka deyn bixinta.

88. Oggolaanshada deymaha/deeqaha lasiinaayo hay'adaha Dawladda

(1) Siwaafaqsan Qodobka 38(2) ee Sharciga, waa in Wasiirku oggoladaa deyn kasta ee lasiinaayo Hay'ad Dawladeed ama Shirkad Dawladdu leedahay, oo kayar \$100,000 ee dollar, kahor inta aan la bixin.

89. Deymaha/deeqaha lasiiyo Hay'adda Dawladda waa in Miisaniyadda kamid ahaadaan

(1) Siwaafaqsan Qodobka 38(1) ee Sharciga, qiyaasta deymaha/deeqaha oo ay helaan Hay'adaha Dawladda iyo dhamaan kharashaadka laga maal geliyo deymahaas/deeqahaas waa in lagu muujiyaa Miisaaniyadda Qaranka.

(2) Wasiirku isaga oo isticmaalay wareegto miisaaniyadeed, ayuu ka dalban karaa Hay'adaha Dawladda inay usoo gudbiyaan qiyaasta deeqaha/deymaha ay heleen

iyo kharashaadka laga bixinaayo deymahaas/deeqahaas, iyaga oo isticmaalaya foomka Wasiirku asteeyay.

90. Deeqaha la siiyo hay'adaha aan dawliga ahayn

(1) Siwaafaqsan Qodobka 38(4) ee Sharciga, markii lahele, lana soo marsiiyo hay'ad Dawladeed deeqo loogu talagalay in lagu maa-geliyo hay'ad aan dawli aheyn, waa in deeqdaasi heesha oggolaanshaha Wasiirka.

(2) Hay'ad aan dawli aheyn ee heshaa deeq lasoo marsiiyo hay'ad Dawladeed, si waafaqsan faqradda 1-aad, waa in:

(a) Laga diiwangeliya hay'addaha ku shaqadaleh ee kajira wadanka hay'addu ka dhisantahay; iyo

(b) Si sanadla ah ay ugu soo gudbiyaan Wasiirka dastuurka hay'adda ee dhaqangalka ah, bayaanka maaliyadda ee baarista maray, iyo warbixinnada kale, iyadoo loo soo gudbinaayo waqtiga iyo nidaamka Wasiirku u dajiyay.

91. Deeqaha lasiiyo Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka

Siwaafaqsan Qodobka 38 (3) ee Sharciga, Dawladkasta ee kamida Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federalka waa in ay usoo gudbisaa Wasiirka nuqul heshiiska ah, hal usbuuc kadib markii heshiiska la dhameeystiray iyo warbixinta ku aadan sida deeqdaas loo bixinaayo.

92. Deeqaha aan lacagta aheyn

Siwaafaqsan Qodobka 38 (2) iyo (3) ee Sharciga, markii Hay'ad Dawladeed, Dawlad Xubin ka ah Dawladda Federalka iyo Shirkad Dawladdu leedahay ay helaan deeq aan lacag aheyn, Sarkaal Idman ee waa inuu usoo gudbiyaa Wasiirka nuqulka warqadda deeqdal hal usbuuc kadib markii deeqda la helay.

93. Nidaamka Habka Kombuuterka ah ee Maareynta Deeqaha

(1) Siwaafaqsan Qodonka 38-aad ee Sharciga, Wasiirka waa inuu hubiyaa in la dhaqangeliyo Nidaam Habka Kombuuterka ah ee Maareynta Deeqaha, kaasoo ay ku jiraan warbixinno iyo xoggo dhameeystiran ee kusaabsan deeqaha, oo ay ka midyihiin deeqaha aan lacagta aheyn, kuwaas oo ay heleen dhamaan Hay'adaha Dawladda, Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federalka iyo Shirkadaha Dawladdu Leedahay.

(2) Nidaamka Habka Kombuuterka ah ee Maareynta Deeqaha waa inuu lafal-galaa Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS)

Qaybta VII. Maaraynta Lacag wareejinta dowlad goboleedka

94. Deeqaha la siinayo dowladaha xubnaha ka ah Federaalka

Iyadoo la raacayo faqradaha Qodobka 6(2) ee Sharciga—

- (a) Wasiirka wuxuu dejin doonaa xeerarka ku aadan qiyaasta maaliyadda kuwaasoo ah deeqaaha shuruuda ku xiran tahay iyo kuwaan shuruudu ku xirnayn ee la siinayo dowladaha xubnaha ka ah Federaalka.
- (b) Qoondaynta miisaaniyadeed ee deeqaha shuruudda leh iyo kuwa aan shuruudda lahayn waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo lagu saleynayo siyaasadda qoondaynta deeqda ee ay ansixiyeen Golaha Wasiirradu.
- (c) Dhammaan deeqaha shuruudda leh iyo kuwaan shuruudda lahayn ee la siinayo Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka waa in uu qoondeeyaa Baarlamaanku ka hor intaan la bilabin bixintooda.

95. Codsiyada iyo dirista lacagaha taakulada ee shuruudo leh iyo taan shuruudda lahayn

- (1) Sarkaalka Idman ee ka socda dowladda xubinta ka ah federaalka wuxuu ka codsan doonaa Wasiirka inuu u soo diro qoondada deeqaha shuruudda leh iyo taan lahayn si bille ah ama saddex biloodle hadba sida waafaqsan Sharciga Baarlamaanka.
- (2) Agaasimaha Guud ee wasaaradda maaliyadda ee dowladda federaalka wuxuu u dirayaa qoondooyinka shuruudaha leh iyo kuwaan shuruudaha lahayn dowladaha xubnaha ka ah federaalka sida waafaqsan Sharciga Baarlamaanka, kaasoo masuuliyadiisu tahay—
 - (a) Xaqiijinta in lacagahaas loo diray dowladda xubinta ka ah federaalka—
 - (i) waxaa loo dejinayaa iyadoo la raacayo qaab-dhismeedka jaan goyanaya lacagaha la dirayo ee shuruudda leh iyo taan shuruudda lahayn ee loo dirayo dowladaha xubnaha ka ah federaalka;
 - (ii) In loogu riday keliya koontada loo asteeyey in loogu diro lacagta Dowladda Xubinta ka ah Federaalka.
 - (b) hubinta in wareejinta lacagta gargaarka la fuliyey, keliya kadib marka la helay macluumaadka loo baahan yahay shurudaha qaab dhismeedka maamul goboleedka ee wareejinta lacagta uu yahay mid ammaan ah iyo in dhammaan warbixinaha la xiriira lacagahaas la dirayo la siyey Wasiirka.

96. Kormeerka lagu samaynayo sida la isugu duway, looguna hogaansamay deeqaha shuruudda leh iyo kuwaan shuruudda lahayn

- (1) Sarkaalka Idmandowladda federaalku wuxuu fulin doonaa—
 - (a) Kormeer iyo qiimayn ku saabsan ka faa'iidaydiga qoondooyinka shuruudda leh iyo taan shuruudda lahayn ee la siinayo Dowladaha Xubnaha ka ah ederaalka iyo inay u gudbiyaan Wasiirka iyadoo nuqul ka mid ahna la siinayo Xisaabiyaha Guud —
 - (i) Warbixin saddex biloodle ah oo la soo saaro 30 maalmood gudahood dhammaadka saddexdii bilood ee kasta, warbixintaas oo ka hadlaysa waxa deeqahaas lagu qabtay;

- (ii) warbixin sanadle ah saddex bilood gudahood lagu soo saaro marka la gaaro dhammaadka sannad-maaliyadeedka.
 - (b) Warbixinaha lagu tixraacay jumlada (a) ee kore waxaa lagu diyaarin doonaa sida waafaqsan hab raaca uu dejiyey Wasiirku.
- (2) Sarkaalka Idman ee dowladda xubinta ka ah federaalka wuxuu—
- (a) masuul ka noqon doonaa xaqiijinta u hogaansamidda shuruudaha la xiriira sharciga iyo qaab dhismeedka maamul ee maaraynta lacag dirista shuruudda leh iyo taan lahayn ee ka imanaysa dowladda federaalka.
 - (b) waa in uu hubiyaa in dhammaan lacagaha laga soo diray dowladda federaalka uu ku daro si gaar ah xisaabaadka maaliyadeed ee Dowladaha xubinta ka ah Dowladda Federaalka;
 - (c) kormeerii iyo qiimayn ayuu ku samayn doonaa hawlaha lagu fuliyey taageeradii maliyadeed iyo taan maaliyadda ahayn ee lagu bixiyey shuruudda ama shuruud la'aanta ee ka timid dowladda federaalka iyo inuu diyaariyo, una gudbiyo Wasiirka isagoo nuqul siinaya Xisaabiyaha Guud—
 - (i) warbixin saddex bilood oo uu ku diro 15 maalmood gudahood dhammaadka saddex bilood kasta warbixintaas oo loo diyaariyey habka uu u cadeeyey Wasiirku;
 - (ii) warbixin sanadle oo middo bil gudaheed ah uu ku soo saaro dhamaadka sanad maaliyadeed kasta, warbixintaas oo uu u raacayo qaabka uu dejiyey Wasiirku.
 - (d) warbixinaha lagu sheegay jumlada (c) ee hoos imanaysa xeer-nidaamiyahaan waa warbixinaha cadaynaya qaybahaan soo socda—
 - (i) lacagaha sida joogta ah Dowladda Federaalku ugu dirto dowladda xubinta ka ah federaalka;
 - (ii) kharashaadka caadi ahaan lagu bixiyey lacagaha la soo diray;
 - (iii) ilee heerka ay le'egtahay in lacagahii la soo diray lagu gaaray ujeedooyinkii laga lahaa iyo waxa ka soo baxay ;
 - (iv) wixii kale ee warbixin ah sida lagu cadayn karo qaab dhismeedka la xiriira lacagaha la dirayo iyo wixii kale ee warbixin ah ee Wasiirku ama Sarkaalka Idman lacag bixinta ee dowladda xubinta ka ah federaalka ka socdaa uu go'aamin karo.
 - (e) Xisaabiyaha Guud wuxuu soo saari karaa hagid dheeraad ah oo ku saabsan sida warbixinta lagu caddeeyey jumlada (c) loo diyaarin doono, si ay u fududaato xisaab xir lagu sameeyo lacagaha loo diray Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka.
- (3) Haddii la go'aamiyay in lacagaha loo diray Dawlad Xubin ka ah Federaalka loogu diray si khalad ah, lacagtaas sida khaladka ah loo wareejiyey sharci ahaan masuuliyadeed ma lahan Dowladaha xubinta ka ah Federaalka.
- (4) Wax kastoo khalad lacag diris ah oo dhacday sida ku cad jumlada (3), si degdeg ah ayaa loo soo celinayaa ama waxaa la hakinayaa wixii lacag loo dirayey dowladas xubinta ka ah federaalka, ama haddii kale waxay noqon donotaa mid ay bixiso dowladaas xubinta ka ah federaalku.

Qaybta VIII. Warbixinta iyo Xisaabinta

97. Heerka tayada xisaabinta iyo habka loo marayo soosaarista xisaabinta

- (1) Ujeedka Qodobka 43(1) ee Sharciga, Xisaabiyaha Guud wuxuu cadayn doonaa nidaamka xisaabin ee qoraaladda maaliyadeed ee hay'addahaan soo socda:
 - (a) Dowladda Federaalka;
 - (b) Xisaabiyaha hay'adwarbixin soo gudbisa;
 - (c) Hay'addaha dowladda oo ay ku jiraan mashaariicda deeq bixiyayaashu dhaqaalaha siiyaan iyo sanduuqyada maaliyadaha dheeraadka ah;
 - (d) Lacaglaha gaarka ah ee loo abuuray sida uu qabo Dastuurku;
 - (e) Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka iyo dowlad hoosyaadyada iyadoo la fulinayo faqradda Qodobka 1(4) ee Sharciga;iyo
 - (f) Hay'adaha dowladdu leedahay.
- (2) Iyadoo la raacayo cutubka (1) iyo sida waafaqsan Qodobka 43 (2) ee Sharciga, hay'adaha ku xusan cutubyada (1) (a) – (e) waxay raaci doonaan Habka Salka u ah Sharciga Caalamiga ah ee Xisaab Xirka iyo Xisaabinta ee loo soo gaabiyo (IPSAS).
- (3) Hay'addaha dowladdu leedahay waxay raaci doonaan Hanaanka Caalamiga ah ee soo saarista Warbixinta Maaliyadeed ee loo soo gaabiyo (IFRS).
- (4) Iyadoo la raacayo Qodobka 43 (4) ee Sharciga, Xisaabiyaha Guud wuxuu sameynayaa oo daabacayaa Tilmaamaha Xisaabaadka, si uu u qoro habraacyada iyo shuruudaha diiwaangelinta, xisaabinta iyo ka warbixinta howlaha kala gudbinta lacageed ee ay sameeyeen hay'adaha ku xusan cutubka (1).
- (5) Xisaabiyaha Guud wuxuu la socon doonaa Habraacyada xisaabinta in loo joogteeyey habka lagama maarmaanka ah iyo inay waafaqsan tahay in lagu dabaqay nidaamka.

98. Haynta iyo baabi'inta warqadaha xisaabaadka iyo kaydada maaliyadeed

- (1) Siwaafaqsan Qodobka 43(5) ee Sharciga, iyo qodobada shuruucda kale ee dhaqan-galka ah, hay'addaha lagu cadeeyey Qodobka 94(1) ee Xeer-nidaamiyahaan waxay adeegsan doonaan in ay ku kaydiyaan xogtooda qoraal ahaan ama hab elagtaroonig ah oo ay ku joogteeyaan xisaabaadkooda iyo xogtooda kaydka maaliyadeed, iyadoo ay la socdaan dhammaan warqadaha taageeraya xisaabaadka, waxaana lagu kaydinaayaa warqadaha xisaab xirka meel bedqabkeedu sareeyo ugu yaraan 10 sanadood oo ka bilaabanaysa sanadka ugu horeeya ee maaliyadda ee lacagtaas la soo diray la dhamaystiray.
- (2) Diiwaanada maaliyadeed ee mudada kaydsanaa, wakhtigii loogu tala galay in la hayana ay dhammaatay waa la baabi'in karaa haddii aysan suuro gal ahayn in la

keydiyo muddo dheer, waxaana lagu samaynayaa intaan la baabi'in xisaab hubin.

- (3) Dukumiinti maaliyadeed lama burburin karo haddii ay dacwado ku socdaan, xisaab xirkeeda aan weli la samayn, muran xisaabeed ka taagan yahay ama baaritaano ku socdaan. Burburinta dukumiintiyada waa inay markhaati ka noqodaan koox ka kooban ugu yaraan saddex sarkaal oo uu ku jiro Madaxa xisaabiyaha Gudaha ee Dowladda Federaalka ama cid metelaysa.
- (4) Saraakiisha loo idmaday burburinta dukumeentiyada waxay xaqiijin doonaan in dhammaan warqadaha xisaabaha la burburiyey ay yihiin kuwo si sax ah loo kaydiyey xogtooda, loona hubiyey.

99. Jaantuska xisaabaadka

- (1) Ujeedka Qodobka 43(5) ee Sharciga, Xisaabiyaha Guud isagoo la hawl gelaya Agaasimaha Maaliyadda, wuxuu go'aamin doonaa muujinta jaantuska xisaabaadka Miisaaniyadda Qaran.
- (2) Isla shaxda jaantuska xisaabaadka ayaa loo adeegsan doonaa diyaarinta Miisaaniyadda Qaranka iyo warbixinnada fulinta maaliyadda ee Miisaaniyadda Qaranka
- (3) Muujinta jaantuska xisaabaadka Miisaaniyadda Qaran waxaa si buuxda loo gelinayaa hanaanka SFMIS, waxaana gelinaya Xisaabiyaha Guud.
- (4) Ujeedka Qodobka 43(5) ee Sharciga, Xisaabiyaha Guud wuxuu isagoo la shaqaynaya Agaasimaha Maaliyadda, go'aamin doonaa heerarka jaantuska xisaabaadka, taasoo ay isticmaali doonaan hay'addaha dowladda, mashaariicda deeq bixiyayaashu maal geliyaan, dowladaha xubnaha ka ah federaalka iyo dowlad hoosaadyadu.
- (5) Kala soocidda loo adeegsaday jaantusyada xisaabaadka Miisaaniyadda Qaranka iyo jaantuska caadiga ah ee xisaabaadka ku xusan farqadda (4) waa inay ahaadaan kuwo waafaqsan heerarka caalamiga ah ee la oggol yahay illaa heerka lagu dabaqi karo.
- (6) Uguyaraan, Jaantuska Xisaabaadka waa inay lasocotaa qaybaha muhiimka ah, si ay u suurta gasho soo saarida macluumaad maaliyadeed ee ku saabsan lacagaha Dowladdu u kala gudbisay, sidaan soo socota; -
 - (a) Maamulidda – unugyada cadaynaya maamulka iyo waaxaha masuulka ka ah maamulka Maaliyadda Dowladda Federaalka iyo hantida;
 - (b) Isha maaliyaddu ka timid – oo sharaxaya ilaha maaliyadda ka timid iyo kharashaadka la bixiyey meelaha lagu bixiyey;
 - (c) Barnaamijyada iyo qaybaha – oo sharaxaya barnaamijyada iyo barnaamij hoosaadyada la xiriira siyaasadaha dowladda, ujeedooyinka iyo yoolka laga leeyahay;
 - (d) Kala soocidda dhaqaalaha – oo cadaynaya ujeedooyinka ama xaaladaha xisaabaadka caadiga ah ee lacagaha la kala gudbiyey oo ay ku jiraan dakhliga, kharashaadka, hantida, daymaha, haraaga kaydada; iyo

- (e) Goob juqraafiyeed - oo sharaxaya goobta juquraafi ahaan ay ku yaalaan ka-faa'iideystayaasha kharashaadka dowladda.
- (7) Xisaabiyaha Guud wuxuu soo sari doonaa heerka jaantus ee xisaabaadka lagu dejinayo, si uu u hago habka lagu dabaqayo jaantus xisaabeedka oo ay ku jiraan hab raaca lagu samayn karo isbedel lagu sameeyo jaantuska xisaabaadka.
- (8) Wax dib u eegis ah ama bedelaad ah laguma samayn karo Heerka Jaanusta Xisaabinta iyadoo aan ogolaansho laga helin Xisaabiyaha Guud.

100. Masuuliyadaha aasaasidda iyo joogtaynta SFMIS

- (1) Iyadoo la raacayo Qodobka 9(8) ee Sharciga, Wasiirku wuxuu guud ahaan masuul ka nodon doonaa horumarinta iyo joogtaynta nidaamka SFMIS, iyo in loo isticmaalo nidaamkaan dhaamaan maamulka maaliyadeed ee Dowladda Federaalka.
- (2) Xisaabiyaha Guud wuxuu isha ku haynayaa siday u socdaan hawlaha maalinlaha ah ee nidaamka SFMIS;
- (3) Xisaabiyaha Guud wuxuu xaqiijin doonaa masuuliyadda iyo suurto galnimada nidaamka si isticmalayaasha iyo joogtaynta waxtarkiisa nidaam loogu xaqiijiyo in dhammaan habraaca ammaan ee loo baahan yahay ay u degsan yihiin, kuna filan yihiin.
- (4) Waxay noqon doontaa mas'uuliyadda Xisaabiyaha Guud inuu hubiyo inay jiraan dib-u-habeyn ku filan oo si buuxda u shaqeyneysa iyo soo-kabashada nidaamka.
- (5) Xisaabiyaha Guud waa inuu soosaaraa oo faafiyaa habraaca hawlgalka ee socodsiinta iyo dayactirka nidaamka SFMIS, si loo hubiyo in nidaamkaani si hufan oo waxtarleh loogu isticmaalo nidaamka looga shaqaynayo xogta maaliyadda.
- (6) Nidaamyada caadiga ah ee habraaca hawlgalku waa inay sharxaan habraaca iyo ilaalinta, oggolaanshaha, meelmarinta, tirtirka ama wax ka beddel kasta oo lagu samaynayo lacag kala gudbin kasta ama xog kasta oo uu samaynayaan isticmaalayaasha idman ee nidaamku.
- (7) Sarkaalkastoo u idman iyo isticmaalayaasha loo ogolaaday inay ku shaqeeyaan nidaamka SFMIS waxay xaqiijin doonaan inay u hogaansamaan heerka habraaca tayada ee u degsan SFMIS ee Xisaabiyaha Guud u dejiyey.

101. Warbixinaha billeha ah ee maaliyadda iyo kuwaan maaliyadda ahayn ee hay'addaha dowladda

- (1) Ujeedka Qodobka 44(1) ee Sharciga, muddo todoba maalmood ah kadib dhammaadka bil kasta, Sarkaalka Idman lacag bixinta ee hay'ad kasta wuxuu u gudbin doonaa Xisaabiyaha Guud warbixinta maaliyadeedka billaha ah ee hay'adda dowladda, waxaana ku jira warbixinahaas uu gudbinayo:-
 - (a) dakhliga iyo kharashaadka ku aadan warqadaha lacagaha iyo lacagaha laga bixiyey Miisaaniyadda Qaran, iyadoo la barbar dhigayo miisaaniyadda;

- (b) dakhliyada soo galay iyo kharashaadka la bixiyey ee ah deeqaha aan ku jirin Miisaaniyadda Qaran;
 - (c) wixii kale ee dakhli ah iyo kharashaad ah oo aan ku jirin Miisaaniyadda Qaran;
 - (d) qoraalka xisaabta ku hartay baanka marka la bixiyo kharashaadka billaha ah iyadoo la waafajinayo buugga dakhliga lagu qoro; iyo
 - (e) wixii kale ee qoraal ah sida hadba uu ugu baahdo Xisaabiyaha Guud.
- (2) Waxaa intaas dheer warbixinaha maaliyadeed ee billaha ee ku cad faqradda (1), Sarkaalka Idman maalinta 7 ee bil kasta kama dib marin karo inuu u gudbiyo Wasiirka xogta billaha ah ee waxyaabaha aan maaliyadda ahayn ee la xiriirta hawlaha hay'adda dowladda ee ay bisha qabatay, iyadoo la waafajinayo hab raaca uu u dejiyey Wasiirku, iyadoo nuqul la siinayo Agaasimaha Miisaaniyadda iyo Xisaabiyaha Guud.
- (3) Mawduucyada xogta waxay hoos imanaysa sida ku cad jumlada (2), waxaana ku jiri doonaa—
- (a) faahfaahinta ku aadan wax kasoo kala duwanaan ah oo u dhaxaysa misaaniyadda bille iyo dakhliga caadiga ah iyo kharashaadka hay'adda dowladda;
 - (b) wax kastoo lacag dayn taagan oo la sugayo, oo ka badan 90 maalmood;
 - (c) odoroska dakhliga iyo kharashka la filayo inta ka hartay sannad-maaliyadeedka;
 - (d) soo koobidda tallaabooyinka la qaadayo, si loo hubiyo in kharashka iyo dakhliga la odorosay ay ku jiraan miisaaniyadda;
 - (e) hawlaha muhiimka ah iyo waxsoosaarka ka soo baxaya bisha;
 - (f) joogtaynta cusboonaysiinta tilmaamaha muhiimka u ah waxqabadka hay'adda dawladda; iyo
 - (g) wixii kale ee warbixin ah hadba siduu ugu baahdo Wasiirku.
- (4) Wasiirku wuxuu isku darayaa dhammaan warbixinaha ku cad jumlada (2) ee kore ee uu helay, wuxuuna warbixinaha u gudbiyanaa golaha Wasiirada, waxana lagu daabacayaa bogga internetka ee Wasaaradda muddo (7) maalmood gudahood marka uu u gudbiyo golaha Wasiirada.
- (5) Sarkaalka Idman waa inuu dejiyaa nidaam hufan oo wax ku ool ah, si uu ula socdo, ugana warbixiyo waxqabadka maaliyadeed ee barnaamijyada kala duwan iyo mashaariicda, iyadoo lagu saleynayo qaabka loo dejiyey ee ku xusan jumlada (2).
- (6) Wasiirka ayaa sidoo kale dejinaya nidaam dhexe, si loo fududeeyo xog ururinta hufan ee wax ku oolka ah, keydinta iyo isdhaafsigu macluumaadka ee ku xusan xeer hoosaadka (3), si loola socdo, loogana warbixiyo waxqabadka maaliyadeed ee barnaamijyada kala duwan iyo mashaariicda ay fuliyaan hay'adaha dowliga ah.
- (7) Warbixin maaliyadeedka billaha ah ee hay'ad dowlad sida lagu tixraacay faqradda 1-aad waxaa lagu diyaarin doonaa hab raaca uu cadeeyey Xisaabiyaha

Guud, iyadoo ay la socdaan bayaanka masuuliyadaha Sarkaalka Ogolaansho bixinta.

- (8) Si looga hortago shaki, faqradda 1-aad waxaa lagu dabaqi doonaa Khasnadda guud, Mashaariicda Deeq Bixiyayaashu maal geliyaan, Sanduuqa dhaqaalaha gaarka ah, Dowlad Hoosaadyada iyo Miisaaniyadaha Dheeraadka ah.

102. Warbixinaha maaliyadeed ee saddex bilood kasta ay soo saaran hay'addaha dowladdu

- (1) Ujeedka Qodobka 44(2) ee Sharciga, marka saddex bilood kasta dhammaato bil gudaheed, Sarkaalka Idman ee hay'ad kastoo dowladeed wuxuu u soo gudbin doonaa Xisaabiyaha Guud warbixinta maaliyadeedka saddexda bilood ee hay'adda, waxaana ka mid ah warbixinahaas:

- (a) Qoraalada warqadaha lacagtaha lagu dalbaday iyo lacag bixinta;
- (b) Qoraalada la isku bar bar dhigayo miisaaniyadda iyo wax qabadyada;
- (c) Qoraalada sida lacaguhu u baxeen;
- (d) warqadda cadaynaysa lacagaha haray, kuwaasoo caadi ahaan ay ku jiraan hantida maaliyadeed iyo daymaha iyo waxyaabaha lagu bixiyey dhammaan maaliyadda iyo daymaha;
- (e) qoraalka ku aadan misaaniyadda dheeraadka ah, sida loo kala gudbiyey, taasoo ay ku jiraan is bar bar dhigga misaaniyadda iyo wax lagu qabtay;
- (f) qoraalka ballanqaadka ee ku saabsan waxqabadka qandaraasyada oo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan dalabaadka wax iibinta ee taagan.;
- (g) qoraal koobaya diwaan gelinta hantida sida lagu cadeeyey Qodobka 114(1)(a) ee Xeer-nidaamiyahaan.
- (h) faahfaahinta qoraaladan;
- (i) faahfaahinta waxa la heli karo iyo waxa la bixin karo;
- (j) qoraalada xisaabaadka ku haray baanka oo la waafajiyey diwaanka lacag bixinta;
- (k) qoraalada xisaab xirka ee lacagaha kaashka ah ee maalinlaha la isticmaalo;
- (l) Qorshaha Hormarinta Maamulka Maaliyadda ama warbixinta caddaynaysa xisaab xirka ee ay ku cad yihiin waxyaabaha uu ku soo jeedeeyey Xisaabiyaha Guud xisaab xirkii hore; iyo
- (m) wixii kale ee qoraal ah ee uu u bahahan karo Xisaabiyaha Guud.

- (2) Warbixin maaliyadeed saddex bilood ah oo hay'ad dawladeed leedahay waxaa lagu diyaarin doonaa qaababka uu dejiyey Xisaabiyaha Guud oo ay weheliso bayaanka mas'uuliyadaha Sarkaalka Ruqsadda bixiya

- (3) Si looga hortago sharki, xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu dabaqayaa Khasnadda dowladda, Mashaariicda deeq bixiyayaashu maal geliyaan, Dowlad hoosaayada iyo sanduuqa maaliyadda dheeraadka ah.

103. Warbixin sanadeedka maaliyadda ee hay'adaha dowladda

- (1) Ujeedka Qodobka 45 (2) ee Sharciga, dhammaadka sanad maaliyadeedka mudo laba bilood gudahood ayaa Sarkaalka Idman ee hay'ad kastoo dowladeed laga doonayaa in uu u soo gudbiyo Xisaabiyaha Guud warbixinaha sanadka ee maaliyadda ee hay'adda dowladda, taasoo ay ku jirayaan wixii ku jiray qaybihii warbixinaha saddex bilood la ahaa ee lagu soo xusay Qodobka 99(1) ee Xeer-nidaamiyahaan.
- (2) Iyadoo aan laga tegey jumlada (1), warbixin sanadeedka maaliyadda hay'ad dowlad waxaa loo diyaarin doonaa hab waafaqsan siduu cadeeyey Xisaabiyaha Guud iyo oo ay la socdaan qoraaladda masuuliyadaha Sarkaalka Idman.
- (3) Xeer-nidamayaan waxaa sidoo kale lagu dhaqayaa Khasnadda guud, mashaariicda deeq bixiyayaashu maal geliyaan, sanduuqyada gaarka ah, dowlad hoosaadyada iyo Sanduuqa dhaqaalaha dheeraadka ah ay ku jiraan.

104. Warbixin sanadeedka hay'addaha dowladda

- (1) Ujeedka Qodobka 45(2) ee Sharciga, lix bilood gudahood kasta marka uu dhammaado sanadka Sarkaalka Idman ee hay'ad kasta wuxuu u soo gudbin doonaa Wasiirka iyo Xisaabiyaha Guud, warbixinahaan soo socda,, waxaana lagu daabici doonaa bogga mareegta internetka hay'adda dowladda ay ledahay:
 - (a) warbixin sanadeedka ay ku jiraan warbixinaha faahfaahinaya wax qabadka hay'adda dowladda, dhaqalaha ku baxay iyo sida waxtarka leh oo loo gaaray ujeedooyinkii hay'adda iyo wixii ka soo baxay waxqabadyada la tilmaamay in la qabtay; iyo
 - (b) warbixinaha sanadlaha ah ee maaliyadda.
- (2) Warbixin sanadkeedka hay'adda dowladda ee lagu qeexay jumlada (1) waxaa loo diyaarin doonaa qaabka habraaca ee Wasiirku cadeeyey.

105. Warbixinta ku saabsan sida loo fuliyey miisaaniyadda billaha

Ujeedka Qodobka 44(3) ee Sharciga, muddo bil gudaheed ah marka bil kasta dhamaato Xisaabiyaha Guud wuxuu diyaarin doonaa, uuna bogga wasaaradda ku daabici doonaa sida loo fuliyey miisaaniyadda billaha ah ee Miisaaniyadda Qaranka. Warbixinta ku saabsan sida Miisaaniyadda wax loogu qabtay waxaa ku jiri doona qaybahaan soo socda:

- (a) Faahfaahinta ku saabsan dakhliga cashuuraha iyo kharashaadka miisaaniyadda qaran ee la qoondeeyey iyo jaantuska faahfaahinaya;
- (b) Balanqaadyada lacageed ee taagan ee Miisaaniyadda Qaranka oo la waafajinayo qoondaynta iyo qaybaha loo kala qorsheeyey;
- (c) Liiska cusub iyo kuwa horay u taagnaa ee daymaha dibadda iyo kuwa gudaha iyo damaanadaha Dowladda Federaalka; iyo
- (d) Kharashaadka waxa la iibinayo ee aan weli lacagahooda laga bixin Miisaaniyadda Qaranka.

106. Warbixin sanadlaha maaliyadeed ee Dowladda Federaalka

- (1) Ujeedka Qodobka 45(6) ee Sharciga, muddo lix bilood gudahood ah kadib dhammaadka sanad maaliyadeed, Xisaabiyaha Guud wuxuu diyaarin doonaa, kuna daabici doonaa bogga mareegta internetka ee Wasaaradda –
 - (a) warbixinaha maaliyadeed ee sanadla ah ee Sanduuqa Isku Dhafka Qaranka ee Dowladda Federaalka, kaasoo ay ku jiraan mawduucyada looga baahan ee waafaqsn sharciga caalamiga ah ee xisaabaadka qaybaha dowladda; iyo
 - (b) warbixinaha tilmaamaya muuqaal xisaabeedka maaliyadeed ee sanadka ee Dowladda Federaalka oo uu soo saaray Xisaabiyaha Guud.
- (2) Warbixinaha maaliyadeed ee sanadka ee Dowladda Federaalka waa inay ku jiraan warbixinno ku haboon oo daboolaya;-
 - (a) qoraalka dhadhaqaaqa ama socodka lacagaha;
 - (b) qoraalka cadaynaya haraaga – kaasoo ay ku jiri karan dhaqaalaha maaliyadeed, daymaha iyo waxqabayada dhammaan hantida iyo daymaha;
 - (c) faahfaahinta lacagaha la heli karo iyo kuwa la bixin karo;
 - (d) soo koobidda diwaan gelinta hantida Dowladda Federaalka;
 - (e) kaydka kharashka aan la bixin iyo daynta dowladda;
 - (f) liiska balanqaadyada
 - (g) dhammaan miisaaniyadaha dheeraadka ah ee loo diray hay'addaha dowladda; iyo
 - (h) dhammaan xogaha hay'addaha Dowladda Federaalku maamusho.

107. Xisaab xirka bille iyo dhamaadka sanadka

- (1) Xisaabiyaha Guud wuxuu xiri doonaa qoraalada hagaya Miisaaniyadda Qaranka hab waafaqsan bille.
- (2) Sarkaalka Idman hay'adkastoo dowlad wuxuu xiri doonaa qoraalada hagaya xisaabaadka hay'adda dowladda bil kasta ku baxay.
- (3) Xisaabiyaha Guud ayaa soo saari doona tilmaamo hagaya habraacyada iyo qaab dhismeedka mudada xisaab xidhka bisha – xiritaanka dhamaadka Miisaaniyadda Qaran iyo hay'addaha dowladda.
- (4) Ka hor dhammaadka sanad maaliyadeedka, Xisaabiyaha Guud wuxuu bixin doonaa hab raaca dhammaadka sanadka lagu xirayo buugta xisaabaadka Hay'addaha Dowladda iyo diyaarinta qoraalada sanadlaha maaliyadeed ee Dowladda Federaalka.

108. Warbixinta ka imanaysa Maamulada xubnaha ka ah Federaalka iyo Dowladaha hoose

- (1) Ujeedada Qodobka 6-aad ee Sharciga oo aan wax u dhimeyn faqrada qodobada 94,98,99,100, Dowlad kasta oo xubin ka ah Federaalka waxay siineysaa Wasaaradda xogta soo socota iyo qoraal xisaabeedka ugu yaraan inta jeer ee ay khuseyso iyo mudada loo dejiyey in lagu bixiyo warbixinahaas ee ay ku heshiiyeen Wasaaradda iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka.
 - (a) xogta ku aadan hawlaha Dowladda xubinta ka ah Federaalka oo ku salaysan saddex bilood, iyadoo loo raacay qaabkii lagu heshiiyey in loo qoro ee ay ku heshiiyeen Wasaaradda iyo Dowladda Xubinta ka ah Federaalku;
 - (b) miisaaniyadda ay meel mariyeen Dowladda Xubinta ka ah Federaalka oo salaysan sanadlaha;
 - (c) xisaab maaliyadeedka sanadlaha ah ee la xisaabiyey iyo taan weli lagu samayn xisaab xirka ee Dowladda xubinta ka ah Federaalka oo ku salaysan sanadle; iyo
 - (d) wixii kale ee xog ah iyo wixii kale ee qoraal xisaabeed ah sida ay ku heshiiyeen Wasaaradda iyo Dowladda xubinta ka ah Federaalka.
- (2) Ujeedka Qodobka 6 ee Sharciga, dowlad hoosaad kasta waxay siin doontaa Wasaaradda xogtaan iyo qoraal xisaabeedyadaan soo socda ugu yaraan sida joogta ah ee looga rabo iyo sida waafaqsan qaab dhismeedka wakhtiyeed ee Wasaaraddu dejisay.
 - (a) xogta ku saabsan hawlaha dowladda hoose oo ku salaysan saddex bilood oo loo diyaariyey qaabka ay u dejisay in loo diyaariyo Wasaaraddu;
 - (b) miisaaniyadda loo meel mariyey dowladda hoose oo ku salaysan sanadlaha;
 - (c) qoraalada maaliyadeed ee sanadlaha ah ee la xisaab xiray iyo kuwaan xisaabtooda la xirin ee dowladda hoose ee sanadlaha; iyo
 - (d) wixii kale oo xog ah iyo qoraal xisaabeed ah sida uu cadeeyey Wasiirku.

109. Xogta maaliyadda Dowladda

- (1) Xisaabiyaha Guud isagoo ka wakiil ah Wasiirka wuxuu mas'uul ka noqon doonaa uruurinta iyo faafinta xogta maaliyadeed ee dowladda, taas oo loo diyaarin doono hab waafaqsan hababka sharciga xisaabaadka caalamiga ah ee dunidu isla aqbashay.
- (2) Wasiirku waa inuu bulshada u faafiyaa xogta maaliyadeed ee soo socota ee dawladda ugu yaraan inta jeer ee ay khusayso iyo muddada ku habboon:
 - (a) xogta ku aadan guud ahaan hawlaha dowladda oo ku salaysan miisaaniyadda sanadlaha muddo saddex bilood gudahooda waa inuu ku gaarsiiyaa kadib dhammaadka miisaaniyad sanadkeedka;
 - (b) xog ku saabsan hawlaha dowladda dhexe oo ku salaysan saddex bilood oo uu soo gudbiyo kadib dhammaadka saddex bilood oo kasta
- (3) Maamulada dhexe iyo guud ee ku xusan cutubka (2) waa inay yeeshaan macno isku mid ah oo lagu diyaariyey heerarka xisaabaadka caalamiga ah ee la isla aqblay.

- (4) Wasaaraddu waa inay ku daabacdaa boggeeda internetka hababka loo maray cusboonaysinta iyo ilaha loo isticmaalay dhamaystirka xogta dowladda sida hoos imanaysa jumlada (2).
- (5) Wasaaradda iyo Xafiiska Tirakoobka Soomaaliya waxay dhisi doonaan isku duwid ay ku agaasimaan dhamaystirka iyo ururinta xogta maaliyadeed ee dowladda.

110. Warbixinta shirkadaha dowladdu leedahay iyo kuwa qaata lacagaha dowladda

- (1) Ujeedka Qodobka 3 ee Sharciga, shirkadaha dowladdu leehay waxay fulin doonaan waajibaad la mid ah tan loo dejiyey hay'addaha dowladda oo waafaqsan sharciyada caalamiga ah ee xisaabaadka.
- (2) Ujeedada Qodobka 47, 48 iyo 49 ee Sharciga, shirkad kasta oo dowladdu leedahay waa inay siisaa Wasiirka iyo Xisaabiyaha Guud xogta iyo qoraalada xisaabeed ee soo socda ugu yaraan inta jeer ee ay tahay in la siiyo iyo mudada loo qabtay:
 - (a) warbixinaha maaliyadeed oo saddex bilood ah oo lagu diyaariyey hab raaca uu cadeeyey Xisaabiyaha Guud, waxaana warbixinaha lagu dirayaa laba todobaad gudahood marka saddex bilood oo kasta dhammaato;
 - (b) qorshayaasha maaliyadeed ee la meel mariyey iyo miisaanayadaha ku saabsan sanadlaha in todobaad gudahood lagu soo diro marka ay dowladdu u mel mariso hay'addaha dowladdu leedahay;
 - (c) qoraalada maaliyadeed ee aan weli lagu sameyn xisaab xirka in laba bilood gudahooda lagu soo diro kadib marka uu dhammaado sanad maaliyadeedku;
 - (d) warbixinaha maaliyadeed ee xisaab xirka lagu sameeyey iyo aragtiyada xisaab xira ka soo baxday waa in lagu diraa shan bilood gudahood kadib dhammaadka sanad maaliyadeedka;
 - (e) qodobada la cusboonaysiiyey ee raacaya iyo qoraalada sharciyada kale ee ku saabsan xisaab sanadkeedka in laba bilood gudahooda lagu soo diro kadib dhammaadka sanad maaliyadeedka; iyo
 - (f) wixii kale ee xog ah iyo qoraal xisaabeed ah ee uu cadeeyey Wasiirku.
- (3) Ujeedka Qodobka 9 ee Sharciga, Wasiirku wuxuu u baahan karaa warqad kastoo cadaynaysa in lagu bixiyey lacag dowlad oo ka baxday Miisaaniyadda Qaran, si uu u gudbiyo xogtan iyo qoraal xisaabeedkaan soo socda, uuna ugu gudbiyo Wasiirka iyo Xisaabiyaha Guud sida hadba uu u rabo, iyadoo la raacayo wakhtiga Wasiirku u qabtay inuu ku soo gudbiyo:
 - (a) warbixin sanadeedka maaliyadda oo waafaqsan nidaamka uu qeexay Wasiirku uuna ku tala bixiyey Xisaabiyaha Guud;
 - (b) qorshayaasha maaliyadeed ee la meel mariyey iyo miisaaniyadda;
 - (c) qoraal xisaabeedka sanadhalaha ah ee aan xisaab xidhka lagu samayn;

- (d) qoraal xisaabeedka sanadlaha ee la xisaab xidhay iyo aragtida xisaabtaas laga bixiyey;
- (e) qoraalada lagu daray xogihii ugu danbeeyey ee la xiriira iyo qoraalada sharci; iyo
- (f) wixii kale ee xog iyo qoraal xisaabeed ah ee Wasiirka u bahan karo,

Qayta IX. Guddiga hantidhowrka iyo hantidhowrka Gudaha

111. Magacaabidda Hantidhowraha gudaha

- (1) Ujeedka Qodobka 46(4) ee Sharciga, Wasiirku wuxuu u magacaabi doonaa hay'ad dowladeed oo hoos imanaya Wasaaradda Hantidhowre gudaha, si uu u kormeero, isuguna duba rido hawlaha hantidhowr iyo xisaab xidh gudaha ee Dowladda Federaalka.
- (2) Madaxa Hantidhowrka Gudaha wuxuu si habsami leh ula socodsiiinayaa Guddiga Hantidhowrka ee lagu aasaasay qawaaniinta 110 iyo maamul ahaana Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, wuxuuna mas'uul ka yahay bixinta jiheynta istiraatiijiyadeed iyo dejinta siyaasadda hawlaha hanti dhowrka gudaha ee Dowladda Federaalka, isagoo kormeeraya hannaanka hanti dhowrka, iyo ka talinta qaadashada heerarka Hantidhowrka Gudaha oo ku habboon dhammaan hay'adaha dowladda federaalka
- (3) Madaxa hantidhowraha guduhu wuxuu sidoo kale warbixin siin donaa Saraakiisha ogolaanshaha lacag bixinta, warbixintaas oo ku saabsan wax kastoo la xiriira hay'adahooda.
- (4) Masuuliyadaha Madaxa Hantidhowraha gudaha waxaa ku jiri doona:
 - (a) inu xaqiijiyo in hawlaha hantidhowr iyo xisaab xidha gudaha ee dhammaan Dowladda Federaalka loo fuliyey hab waafaqsan sharciyada caalamiga ah ee loo maro xisaabxidhka gudaha iyo hanti dhowrnka;
 - (b) hormarinta iyo cusboonaysiinta Qorshayaasha Hantidhowrka sanadlaha oo ku salaysan hanaan ku habboon halista oo ay ansixiyaan Guddiga Hantidhowrka;
 - (c) fulinta iyo meel marinta qorshaha hanti dhowr gudaha oo ay ku jiraan waajibaadyo khaas ah ama mashaariic gaar ah hadba sida ay codsadaan Guddiga Hantidhowrku;
 - (d) joogtaynta xirfadda shaqaalaha hantidhowrka oo ay u leeyihiin xisaabxidhka ee aqoon, xirfad, khibrad iyo cadaymaha xirfadeed ama aqoonta xirfadeed ee looga baahan yahay iyo awoodda wax qabad ee ay ku fulinayaan wajibaadka unuga hantidhowrka guduhu.
 - (e) bixinta warbixinaha hantidhowrka gudaha oo la siiyo Saraakiisha Ogolaanshaha talaabo kastoo la qaaday iyo nuqul ka mid ah xisaab xidh kastoo la sameeyey in la siiyo Guddiga Hantidhowrka, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda iyo Xisaabiyaha Guud;

- (f) bixinta daba gal warbixinaha la siinayo Guddiga Hantidhowrka oo ah hab ku salaysan nus sanadeed ku aadan talaabooyinka maamul ee qorshayaasha taagan;
 - (g) uu hormariyo tilmaamayaasha waxqabadka muhiimka u ah howlaha hanti dhowrka gudaha, isla markaana la siiyo warbixin seddexdii biloodba mar ah Guddiga Hantidhowrka halka ay marayaan hawlaha iyo talaabooyinka la qaadayaa;
 - (h) inuu si joogta ah ula socodsiiyo, uguna sheego Guddiga Hantidhowrka wax kastoo soo kordhay oo degdeg ah iyo talaabooyinka wanaagsan ee loo qaaday xisaab xirka gudaha;
 - (i) gacan ka geysato baadhitaanka hawlaha loogaa shakiyey musuqmaasuq iyo lacagaha sharci darada ah oo la tuhunsan yahay oo ka dhex jira hay'adaha Dowladda Federaalka iyo inuu ogaysiiyo maamulka iyo Guddiga Hantidhowrka si waafaqsan xeerka;
 - (j) inuu siiyo Hantidhowrka guud hadba sida ay lagama maarmaanka u tahay wajibaadka hanti dhowr iyo xisaab xir ee la fuliyey;
 - (k) horumariyo lana ilaaliyo xaqiijinta tayada iyo horumarinta barnaamijka;
 - (l) bixinta taageero farsamo oo uu siiyo hantidhowrka gudaha, si ay u fuliyaan waajibaadyada hanti dhowr iyo xisaab xidh ee ay ka fulinayaan dhammaan hay'adda Dowladda Federaalka; iyo
 - (m) diyaarinta iyo in uu u gudbiyo xisaab xidhka la sameeyey Guddiga Hantidhowrka iyo Wasiirka, iyadoo nuqul uu siinayo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda iyo Xisaabiyaha Guud, waxaana lagu lifaqayaa warbixinaha xisaab xidh ee saddex biloodle iyo sanadle ee hantidhowr iyo xisaab xidh gudaha ee lagu sameeyey dhammaan hay'addaha.
- (5) Ujeedada laga leeyahay gudashada waajibaadkiisa ama waajibaadkeeda ee ku xusan cutubka (4), Madaxa Hantidhowrka Gudaha waa inuu lahaadaa in si aan xadidnayn uu u gaari karaa ama u heli karaa macluumaadka hanti iyo maamulka shaqaale ah, si uu ugu sameeyo xisaabxidh Hay'adda Dowladda Federaalka, waana in la siiyaa dhammaan sharaxaadda uu u baahan yahay.

112. Abuuridda iyo waajibaadka ay ku shaqaynayaan unugga hantidhowrka gudaha ee hoos imanaya Wasaaradda

- (1) Ujeedka Qodobka 46(1) ee Sharciga iyo in la bixiyo adeegyo hantidhowr iyo xisaab xidh gudaha ah oo lagu sameeyo Saraakiisaha Ogolaanshaha lacag bixinta, Wasiirka wuxuu abuuri donaa xarun dhexe oo ah unug hanti dhowr gudaha ah oo hoos imanaysa Wasaaradda.
- (2) Madaxa Hantidhowrka guduhu wuxuu noqon doonaa madaxa unuga hantidhowrka gudaha
- (3) Iyadoo la raacayo Qodobka 46 (1) ee Sharciga, Sarkaal kastoo Ogolaanshaha qaabilsan waxaa caawinaya Hantidhowrka Gudaha ee Unugga Hantidhowrka Gudaha oo lagu aasaasay jumlada (1).
- (4) Hantidhowrka Gudaha ee loo xilsaaray Sarkaalka Idman lacag bixinta sida ku xusan cutubka (3) waa inuu maamul ahaan warbixinta u gudbiyaa Sarkaalka

Idman, sarkaalkaanina si buuxda ula shaqeeya Madaxa Hanti Dhoworaha gudaha.

(5) Iyadoo lagu xadgudbeyn Qodobka 46 (1) ee Sharciga, shaqada unugga hanti dhowrka guduhu waa in lagu go'aamiyaa haddii nidaamka maaraynta khataraha ee Saraakiisha ogolaanshaha, Ilaalinta gudaha iyo habraacyada maamul, aadaan kuwo ku fulina sida lagu dejiyey maamulka, ayna ahaadaan kuwo ku fulan shaqadooda, una shaqaynaya qaab la hubiyey si ay u xaqiijiyaan qodobadaan soo socda;

(a) In ay si rasmiya u cadeeyeen Khataraha, lana maareeyey;

(b) Cadaymaha xisaabaha maaliyadeed, maamul iyo warbixinaha hawl galku inay yihiin sax, la isku halayn karo iyo inay wakhtigii saxda ahaa ee loo asteeyey ay soo baxaan;

(c) Waxqabadka shaqo ee shaqaaluhu inay waafaqsan yihiin oo u hogaasan yahay siyaasadaha, heerarka sharciyada, habraaca, xeerka anshaxa iyo ku dhaqmidda xeerarka; iyo

(d) Dhaqaalaha in si joogto ah loo dhaqaaleeyo, si waxtarleh loo isticmaalo iyo in si fulin le loo ilaaliyo.

(6) Iyadoo la raacayo jumlada (5), shaqaalaha Unugga Hantidhowrka Guduhu waa in;

(a) Aan la xadidin inay baadhitaan ku sameeyaan dhammaan shaqooyinka, xogaha kaydka ah, hantida iyo shaqaalaha;

(b) Ay si buuxda oo xor ah galangal ugu yeeshaan Guddiga Hantidhowrka;

(c) Loo qoondeeyaa dhaqaale, loo dejiyaa goob laga helo, loo xulaa ujeedooyin, la cadeeyaa xeerka shaqo iyo meel marinta farsamada u noqon karta lagama maarmaan, si ay u fuliyaan ujeedooyinka hanti dhowr iyo xisaab xidh; iyo

(d) Hellaan taageerada lagama maarmaanka ah ee ay u baahan yihiin oo ay ka helaan shaqaalaha Wasaaradda meeshii ay doonayaan inay ka sameeyaan xisaab xidh iyo hanti dhowris, sidoo kale adeegyadii kale ee khaaska ee gudaha iyo banaanka wasaaradda ee la xiriirta miisaaniyadda la meel mariyey.

(7) Shaqaalaha Unugga Hantidhowrka guduhu ma noqon doonaan;

(a) Kuwa fuliya hawl kastoo ah waajibaadka hay'ad;

(b) Qabtaan ama meel mariyaan xisaabaadka lacag kala gudbinta ee ka baxsan unugga Hanti Dhowrka gudaha;

(c) Shaqaalaha sida tooska ah ugu lugta leh hawlaha shaqo ee hay'ad kama shaqayn karo Unugga Hanti Dhowrka, intaan ka ahayn in qofkaas shaqaalaha loo xilsaaray in uu la shaqeeyo koox xisaab xidh samaynaysa ama uu caawinayo xisaab xidhayaasha ama hanti dhowrayaasha gudaha.

(8) Ujeedada, awooda iyo waajibaadka faahfaahsan ee Qaybta Hantidhowrka Gudaha iyo shaqaalaha waxaa lagu qeexi doonaa qoraal sharciyeedka hanti dhowrka gudaha oo uu soo saaray Wasiirka, ka dib markii ay soo jeediyeen Guddiga Hantidhowrka.

- (9) Hantidhawrka Gudaha ee loo xilsaaray Sarkaalka Idman ayaa diyaarin doona, una soo gudbin doona Madaxa Hantidhawrka Gudaha warbixinta hawlgal kasta oo la sameeyo lana dhammaystiro, si dib u eegis loogu sameeyo loona soo saaro sida ku xusan Qodobka 108 (4) (e) ee Xeer-nidaamiyahan. Warbixinta waxaa loo gudbinayaa Madaxa Hantidhawrka Gudaha ka dib markuu kala tashado Sarkaalka Idman.
- (10) Dhamaadka seddexdii biloodba mar, Hantidhawrka Gudaha ayaa diyaarin doona, una soo gudbin doona warbixin seddex biloodle ah oo ku saabsan dhammaan howlaha iyo adeegyada la qabtay ee ku saabsan fulinta qorshaha hanti dhowrka Sarkaalka Idman iyo Hantidhawrka Gudaha. Warbixinta waxaa lagu soo saari doonaa 30 maalmood gudahood ka dib dhammaadka rubuca iyo ka dib marka wada tashi lala yeesho Sarkaalka Idman.

113. Abuuridda Guddiga hantidhowrka ee Dowladda Federaalka

- (1) Si loo xaqiijiyo waxtarnimada shaqada hanti dhowrka gudaha, Wasiirku wuxuu abuuri doonaa Guddi hantidhowr dhexe si ay u caawiyaan saraakiisha ogolaanaha inay buuxiyaan wakiilnimadooda iyo masuuliyadahooda kormeer;
- (2) Guddiga hanti dhowrku wuxuu ka koobnaan doonaa ugu yaraan (3) laakiin kama badnaan karo 5 oo uu magacaabay Wasiirku.
- (3) Madaxa Hantidhowrka Guud wuxuu u shaqeyn doonaa sidii xoghaynta guddiga hanti dhowrka laakiin xaq uma laha inuu wax doorto.
- (4) Xubnaha guddiga waxaa laga soo xuli doonaa qeybaha kala duwan ee khubradda, si kor loogu qaado aqoonta Guddiga hanti dhowrka. Xubnaha la magacaabay waa inay si wadajir ah u yeeshaan xirfadaha iyo khibradaha soo socda:
- (a) ganacsiga balaadhan, maamul shirkadeed iyo / ama khibrad maarayn maaliyadeed;
- (b) fahamka xisaabaadka iyo hababka ilaalinta gudaha
- (c) faham ku saabsan dhaqammadda maamulka maaliyadda dowladda;
- (d) faham ku saabsan doorarka hantidhowrayaasha gudaha iyo dibadda; iyo
- (e) in ay leeyihiin anshax sareeya iyo sharaf dhaqaale.
- (5) Ugu yaraan hal xubin oo ka tirsan Guddiga Hantidhowrka waa inuu lahaadaa khibrad la taaban karo oo ku saabsan xisaab xidhka iyo maareynta maaliyadda.
- (6) Dadka loo magacaabayaa Guddiga Hanti dhowrku waa inay ka madaxbanaan yihiin dadka fulinaya maamulka hawlaha hay'addaha dowladda ee ay xisaab xidhka ku samaynayaan.
- (7) Xubnaha Guddiga Hantidhowrku wuxuu iska casili karaa waajibaadkiisa isagoo xor ah ama codsi kaga yimaadda Wasiirka intaan la gaarin xilliga shaqadiisa xafiiska ku egtahay. Is casilaadda wajaabaadkiisa ee xubinta ka mid ah Gudigga Hanti dhowrka wuxuu ku samayn doonaa qoraal rasmiya oo uu u diro Wasiirka oo uu ku cadaynayo inuu is casilay.
- (8) Guddiga Hantidhawrka waa inuu kulmaa ugu yaraan afar jeer sanadkii, isagoo awood u leh inuu qabto shirar dheeri ah, sida hadba loogu baahdo. Haddii ay

dhacdo shirarka noocan oo kale ah, Guddiga Hantidhawlka waa inay tixgeliyaan oo keliya waxyaabaha ku jira ajandaha marka laga reebo haddii ay jiraan soo jeedin wax ka beddel ku ah ajandaha bilowga kulanka.

- (9) Sarkaalkastoo Ogolaanshaha ah ama shaqaalaha ka tirsan Unuga Hantidhawlka gudaha waxaa lagu caasuumi karaa inuu ka qayb galo kulamada Guddiga Hantidhawlka, hadba siday lagama maarmaanka u tahay.
- (10) Haddii hadba sida loogu baahdo ay noqoto, Guddiga Hantidhawlku wuxuu u yeeran karaa xisaabiyayaal dibaadda ah ama wixii kale ee dad ah ee ay uga baahdaan la talin dhinaca tayada wax qabadka iyo xisaab xidhka ah.
- (11) Dadka lagu casuumay inay ka qayb galaan kulamada Guddiga Hantidhawlka xuquuq uma laha in ay ka qayb qaataan codadka loo qaadayo go'aamada kulanka lagu gaaro.

114. Waajibaadka iyo Masuuliyadaha Guddiga Hantidhawlka

- (1) Masuuliyadaha iyo waajibaadka guddiga Hantidhawlka waxaa ka mid noqon doona;
 - (a) Dib u eegis ay ku sameeyaan qoraalada xisaab xir iyo inay fiiriyaan in xisaab xiradaas la sameeyey ay dhamays tirayn yihiin, xogtooda ku jirtaa ay og yihiin xubnaha guddigu iyo inay waafaqsan yihiin xeerarka nidaamka xisaab xirka;
 - (b) Tixgeliyaan siday waxtar u leedahay ama u shaqaynayaan nidaamyada ilaalinta gudaha, oo ay ka mid yihiin bedqabka ammaan ee qalabka casriga ah ee lagu shaqaynayo iyo ilaalintooda;
 - (c) Fahmaan baaxadda dib-u-eegista xisaabiyayaasha gudaha iyo dibedda ee ku saabsan ilaalinta gudaha ee ku aadan warbixinta maaliyadeed iyo helitaanka warbixinno ku saabsan natiijooyinka muhiimka ah iyo talooyinka oo ay la socdaan jawaabaha maamulka;
 - (d) Hubinta jiritaanka qaab-dhismeed ku filan oo si macquul ah loo filan karo si looga hortago loona ogaado khayaanada iyo wax isdba marinta;
 - (e) In ay dib u eegis ku sameeyaan maamulka iyo Madaxa Hantidhawlka gudaha, axdiga iyo xeerarka hantidhawlka gudaha, qorshayaasha, waxqabadyada, shaqaalaha, iyo qaabdhismeedka maamul ee Qeybta Hantidhawlka Gudaha.;
 - (f) In ay dib u eegis ku saabsan dib u qaabayn iyo beddelidda Madaxa Hantidhawlka Gudaha iyo ansixinta qorshaha shaqada xisaab xirka sanadlaha;
 - (g) Dib u eegid ay ku sameeyaan xaaladdaha loogu hogaansamay fulinta sharciga iyo qaab dhismeedka xeerka sharciyada, xeerarka, siyaasadaha, hab raaca, heshiisyada iyo habraacyada; iyo,
 - (h) Dib u eegid iyo meel marin ku saabsan qoraalka maaliyadeed ee Unuga hantidhawlka guduhu diyaariyey iyo xaqiijinta in unugaasi uu helay ilihii xogta ee ku filnaa xisaab xidhkooda ay samaynayaan, si ay u gutaan waajibaadooda si ku cad axdiga hantidhawlka gudaha.

- (2) Guddiga hanti dhowrku wuxuu joogtayn doonaa xiriir xor ah oo furan oo dhex mara Guddiga, Wasiirka, Xisaabiyaha Guud, Hantidhowrka Guud, Hantidhowrada gudaha iyo Saraakiisha Ogolaanshaha lacag bixinta.
- (3) Guddiga Hantidhowrku waxay awood u leeyihiin inay u yeertaan sharciyaqaan madax banana, xisaabiye ama la taliyeyaal kale. Wasiirku wuxuu siin doonaa dhaqaalaha ku fulan sida ay ku go'aamiyaan cidday u bahan yihiin Guddiga, si ay dhaqaalahaas ugu bixiyaan shaqada uu u qabto lataliye kasta oo Guddigu u yeerto.
- (4) Ka hor dhammaadka saddexda bilood ee socota, Guddiga Hanti dhowrku waxay u soo gudbin doonaan Wasiirka iyagoo nuqul siinaya Agaasimaha Guud ee Wasaaradda iyo Xisaabiyaha Guud warbixinta saddex biloodlaha ah ee tilmaamysa arrimaha muhiimka ah ee u baahan in tix gelin gaar ah la siiyo ama u baahan in kormeer lagu sameeyo.
- (5) Lix bilood gudahood oo ah dhammaadka sanad xisaabeedka, Guddiga Hantidhowrku wuxuu diyaarin doonaa, gudbinna doonaa Warbixin Sanadeed uu siinayo Wasiirka. isagoo ku ururinaya wixii ka dhashay shaqooyinkii la qabtay ee xisaab xirka ahaa, waxaana lagu gunaanadayaa talo bixinno iyadoo nuqul ka mid ahna la siinayo Xisaabiyaha Guud ee Wasaaradda, Xisaabiyaha Guud iyo Madaxa Hantidhowrk gudaha.
- (6) Hantidhowraha Guud wuxuu galangal u yeelan donaa inuu arko warbixinaha lagu xusay jumlada (4) iyo (5) markasta oo uu codsado inuu arko warbixinahas.
- (7) Wasiirku wuxuu amri karaa doorar cayiman, masuuliyado iyo isku duwid Guddiga Hantidhowrka oo la xiriirta talo bixino uu sinaayo Madaxa Hantidhowrka gudaha.

115. Dhismaha nidaamyada ilaalinta gudaha ah

- (1) Sarkaalka Idmanwuxuu abuuri doonaa, fullinna doonaan nidaamyo waxtar leh oo ilaalinta gudaha hay'adda ah, si ay wax uga qabato dhammaan nooc kastoo khataro ku ah wax qabadka, shaqada iyo hawlaha anshaxa hay'adda, si looga hortago ama loo qabto wax isdaba marinta, sharci darada iyo wixii kale ee nidaam darro ah, sidoo kale inay xaqiijiyaan u hogaansamidda sharciyada iyo xeerarka.
- (2) Ujeedka Qodobka 10(1),(d) iyo (i) ee Sharciga, Xisaabiyaha Guud waa inuu dejiyaa habraaca hay'adeed, maamulka lagama maarmaanka u ah iyo isku duwidda maamul, si loo xaqiijiyo in nidaamka ilaalinta maaliyadda guddaha ee uu ku shaqaynayo sarkaal kastoo u xilsaaran ogolaanshaha lacag bixinta uu yahay mid waxtarleh oo ku filan shaqada.
- (3) Nidaamyada maaliyadeed iyo xakameynta gudaha ee la aasaasay waa inay ku saleysnaadaan Qaab-dhismeedka Xakamaynta Gudaha oo la jaanqaadaysa dhaqanka ugu wanaagsan iyo heerarka sharci ee laga aqoonsan yahay adduunka.
- (4) Hantidhowrka Gudaha waa inuu qiimeeyaa nidaamyada ilaalinta gudaha, sida lagu aasaasay oo ay u soo bandhigaan hubin macquul ah oo la xiriirta isku halaynta iyo inay talo ka bixiso waxa ka soo baxa hanti dhawrka.

Qaybta X. Maamulka hantida iyo alaabada Dowladda Federaalka

116. Masuliyadda maamulka Hantida dowladda

- (1) Iyadoo la raacayo qodobbada 50 iyo 51 ee Sharciga, hantida guud waxaa ka mid ah hantida guuri karta iyo hantida ma guurtada ah ee Dowladda Federaalka. Siwaafaqsan Xeer-Nidaamiyahaan, wuxuu dabooli doonaa dhammaan hantida maguurtada ah ee Dowladda Federaalka.
- (2) "Hantida ma guurtada ah" waxaa loola jeedaa hantida lagu qoondeeyey Xeerarka caalamiga ah ee Xisaabaadka waaxda Hantida Dowladda ama xeerar kale ee caalamiga ah oo la ogol yahay oo lagu xisaabiyo hanti dowladi leedahay.
- (3) Wasiirku wuxuu soo saari doonaa qaab dhismeed lagu maamuluo hantida iyo siyaasado si loo xaqiijiyo in hantida dowladdu ay tahay mid amaano ah oo bed qabta, la diwaan geliyey, la xisaabiyey iyo in laga warbixiyey.
- (4) Sarkaalka Idman Hay'ad Dawladeed, Dawlad hoose ama shirkad Dawladdu leedahay ayaa leh mas'uuliyadda buuxda oo ku saabsan helitaanka, adeegsiga, dayactirka iyo iibinta hantida dadweynaha ee ay maamusho asaga ama iyada oo raacaysa sharciga, Xeer-Nidaamiyahaan iyo sharciyada iyo xeerarka kale ee la xiriira.
- (5) Ujeeddada Qodobka 50 (1) (c) ee Sharciga iyo Awoodda loo igmaday, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda wuxuu mas'uul ka noqon doonaa maaraynta iyo maamulka dhammaan hantida guurtada ah oo aan toos u hoos imaan maamul ahaan Sarkaalka Idman.

117. Diwaan gelinta iyo maamulka hantida ma guurtada ah

- (1) Sarkaalka Idmanwuxuu xaqiijin doonaa waxyaabahan soo socda ee hantida ah inay ku jiraan gacanta maamulkiisa/maamulkeeda;
 - (a) xaqiijinta agabka hantida dadweynaha in si hagaagsan loo diwaan geliyey oo hantida lagu qoray hanaanka nidaamka diwaan gelinta hantida dowladda ee SFMIS, iyadoo la raacayo habka maamul qaabdhismeed ee loo dejiyey in la raacdo, siyaasadaha iyo sida ugu hagaagsan, oo ay ku jiraan, taariikhda hantidaas la helay, faahfaahinteeda, calamadeeda, cadadkeeda, meeshay ku taal, qiimahay joogtay iyo qiimaha lagu iibiyo;
 - (b) xaqiijinta in sarkaal kastaa shaqsi ahaan iyo khaas ahaan uga mas'uul yahay hantida iyo ilaalintiisa iyo inuu jiro diiwaanka dhexe ee magacyada mas'uuliyiinta haya iyo goobaha hantida loo xilsaaray ay ku taal;
 - (c) hubinta in hantidu hesho dayactir ku fulin, iyada oo lagu darayo soo gudbinta miisaaniyada sanadlaha ah dhammaan qiyaasta dayactirka iyo kharashka ku baxaya dayactirka iyo hawlaha laga qabanayo hantida dowladda, sida;
 - (d) fulinta hubin lagu sameeyo muuqaalka iyo cadaymaha hantida dowladda ee aan diwaanka la gelin sanadkiiba la hubiyo iyo in lagu daro qoraal xisaabeedka;
 - (e) xaqiijinta agabyada kale ee la hayo laakiin aan loogu baahnayn in si degdeg ah loo isticmaalo ama loo adeegsado, waxaana lagu kaydin donaa

qaybta lagu kaydiyo agabka ama bakhaarka, halkaasoo si raasmiya loogu diwaan gelinayo inay yaalaan laguna dayac tirayo;

(f) haynta macluumaadka iyo diiwaanada dhammaan hantida dowladda si waafaqsan Qodobka 95-aad ee Xeer-nidaamiyahan;

(g) u hoggaansamaan amarrada iyo tilmaamaha wasiirrada ee ku saabsan maaraynta hantidaas

(2) Masuuliyadaha hoos imanaya jumlada (1) waxaa lagu fulin doonaa hantida uu maamulo Agasimaha Guud ee wasaaradda Maaliyadda oo hoos imanaya Qodobka 113(5) ee Xeer-nidaamiyahan.

118. Maamulka Alaabada Dowladda

(1) "Alaabo" waxay leedahay macno uu u dejiyey Xeeraka Caalamiga ah ee Xisaabinta Qaybta Hantida Dowladdu ama wixii kale ee caalami ah loo aqbalay in lagu xisaabiyo xeerar ahaan hantida dowladda, waxayna yihiin;

(a) wax kastoo alaab ah iyo sahay oo la doonayo in loo isticmaalo habaynta wax soo saarka;

(b) wax kastoo alaab ah oo loo isticmaali dono fulinta adeegyada;

(c) wax kastoo loo qabtay iib ama qaybinta hawsha caadiga ah; iyo

(d) ku jira habayn wax soo saar la iibinayo ama la qaybinayo.

(2) Wasiirku wuxuu soo saari doonaa Qoraal nidaaminaya hawl galka, oo uu ku cadaynayo hab raaca keenista ama helitaanka, bixinta, diwaan gelinta iyo iibinta alaabta iyo ka ilaalinta hantida dowladda sida khaldan ee loo isticmaalo iyo xatooyada;

Qaybta XI: Maamulka Dakhliga ka yimaadda Kheyraadka Dabiiciga ah

119. Abuurista sanduuqa dakhliga ka soo xerooda khayraadka dabiiciga ah

(1) Iyadoo la raacayo faqrada Qodobka 61 ee Sharciga, Wasiirku wuxuu abuuri donaa sanduuqa lagu ururiyo dakhliga ka soo xerooda khayraadka dabiiciga ah.

(2) Sanduuqu wuxuu noqon doonaa-

(a) in lagu ururiyo dhaqaalaha lagu qeexay Qodobka 61 ee Sharciga ee dowladda soo gala;

(b) maalgaliyo dakhligaas si ay uga faa'iideystaan jilasha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka;

(3) Dakhliyada sanduuqa ayaa ka koobnaan doona-

(a) dakhliga dowladdu heshay sida lagu qeexay Qodobka 61 ee Sharciga; iyo

(b) dhaqaalaha ka soo xerooda maalgashiga maaliyadeed ee Sanduuqa.

120. Ururinta iyo ku shubista sanduuqa dakhliga khayraadka dabiiciga ah ka yimadda

- (1) Khayraadka ka yimadda dakhliga ee dowladda qaaddo waxaa qiimaynaysa oo uururinaysa hay'ad masuul ka ah ururinta dakhliga oo ah heer Dowlad Federaalka, waxayna wakhtiga loogu tala galay ku shubaysaa dakhligaas Sanduuqa loogu tala galay.
- (2) Ujeedka Qodobka 57(2) ee Sharciga iyo faqradda (1), Xisaabiyaha Guud wuxuu ka furi doonaa koonto xisaabeed Baanka Dhexe ee Soomaaliya oo hoos imanaysa Khasnadda Guud, kaasoo loogu tala galay in lagu ururiyo dakhliga ka soo xerooda khayraadka dabiiciga ah sida lagu xusay Qodobka 70(1)(b)(iv) ee Xeer-nidaamiyahan.
- (3) Dhammaan dakhliga ka soo xerooda kheyraadka dabiiciga ah waxaa lagu shubayaa Khasnadda Guud marka la soo ururiyo, waxaana loo wareejinayaa koonta xisaabeedka u sii gaarka ah Sanduuqa dakhliga Khayraadka Dabiiciga ah loogu tala galay ee ka furan Bangiga Dhexe ee Soomaaliya todobaad walba, iyadoo la raacayo tilmaamaha ku saabsan habka lacagaha loogu kala wareejiyo elektarooniga ah ee Xisaabiyaha Guud soo gudbinayo.
- (4) Xisaabiyaha Guud wuxuu diyaarin doonaa, kuna cusboonaysiin doonaa nidaamka SFMIS, habka ugu haboon ee qoraalada xisaab xirka si ay gacan uga geysato hab raaca wareejinta eletranikada ah ee dhaqaalaha lagu kala wareejinayo. Sida ku cad jumlada (3) ee kore.
- (5) Dhammaan dakhliyada dhaqaale ee lagu shubo koontada Bangiga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah waxay ka mid noqonayaan Sanduuqa.
- (6) Haddii dakhliga kheyraadka la helay, laakiin aan lagu wareejin Khasnadda Guud taariikhda kama dambaysta ah ee loogu tala galay in lagu wareejiyo, cidda ama qofka mas'uulka ka ah ee haya dakhligaas wuxuu bixinayaa lacag dheeraad ah oo uu go'aaminayo Wasiirku laakiin aan ka badnayn 2% ugu badnaan maalin kasta inta uu lacagtaas wareejinteeda dib u dhaca ku sameeyey.

121. Ururinta faada'da dakhli ee ka soo baxa maalgashiga sanduuqa

Dakhliyada, lacagaha soo xerooda, faa iidada, lacagaha lagu helay hab raaca, lacagaha kale ee la helay iyo wax kastoo ah lacag laga helay maal gashigii hantida Sanduuqa waxaa lagu haynayaa sanduuqa, wuxuuna qayb ka noqonayaa dhaqaalaha Sanduuqa.

122. Maalgelinta maaliyadda sanduuqa

- (1) Wasiirku wuxuu magacaabi doonaa Guddiga La talinta Maalgashiga, iyadoo la raacayo sida u degsan shuruudaha Xeer-nidaamiyahan.
- (2) Guddiga La talinta maalgashiga waxay lacagta sanduuqa ku maal gelin doonaan sida ku cad siyaasadda maalgashiga ee uu meel mariyey Wasiirku.
- (3) Si looga fogaado shaki, Guddiga La-talinta Maalgashiga waa inaysan maalgelin ku sameynin ilaha Sanduuqa qalab kasta oo ay soo saaraan bangi, shirkad, ama shaqsi deggan Soomaaliya ama ay leeyihiin ama ay gacanta ku hayaan muwaadin Soomaaliyeed ama shirkad ka diiwaan gashan Soomaaliya..
- (4) Wasiirka ayaa la gelaya heshiis rasmi ah oo qoraal ah Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo ku saabsan maaraynta howlaha Sanduuqa.

- (5) Baanka Dhexe ee Soomaaliya wuxuu maamuli doonaa maalgashiga dhaqalaha Saduuqa si waafaqsan siyaasadda maalgashiga ee uu meel mariyey Wasiirka.

123. Kharashaadka ku baxa hawl galka Sanduuqa

- (1) Kharashaadka ku baxa maareynta Sanduuqa waxaa lagu bixinayaa lacag ujeedkeeda uu qoondeeyay Baarlamaanku, waxaana laga bixinayaa Khasnadda Dowladda Federaalka.
- (2) Lacag lagama bixin karo Sanduuqa, lacagtaasoo ujeedkeedu yahay in lagu bixiyo kharashaadka hawl galka Sanduuqa

124. Lacagta laga saarayo ama laga celinayo Sanduuqa

- (1) Ka bixinta lacagta Sanduuqa, si loogu isticmaalo in ay ka qayb noqoto maalgelinta miisaaniyadda qaranka, waa inaysan ka badnaan tirada miisaaniyadda uu oggolaaday Baarlamanka oo waafaqsan Xeerka Qoondeynta Dheeraadka ah sida dhici karta, waa inay ahaataa sanad maaliyadeedkaas.
- (2) Lacagta laga saarayo xisaabta Sanduuqa keliya waxaa lagu samayn karaa ujeeddo la xiriirta lacag lagu bixinayo miisaaniyadda qaranka.
- (3) Lacagaha kale ee laga saarayo Sanduuqa waxaa loola dhaqmi doonaa lacag lunsii ku timid lacagta dowladda.
- (4) Lacagaha laga saaray Sanduuqa waxaa lagu xukumayaa qawaaniin iyo habraacyo khuseeya maaraynta Xisaabaadka Khasnadda Guud, sida ku xusan Sharciga.

125. Mamnuucidda in dhaqaalaha sanduuqa looga faa'iidaysto si aan sharci ahayn

- (1) Hantida Sanduuqa oo ay kujiraan dhammaan noocyada hantida, ha ahaato mustaqbalka ama mustaqbalka mid imanaysa, midna looma qoondeyn doono, looma ballanqaadi doono, looma goyn doono, lama amaahan doono, ama haddii kale shirkad ama qofna ugama faa'iidaystaan doono hantida sanduuqas, waxyaabaha mamnuuca ah waxaa kale ka mid ah-
- (a) Bixinta dayn ay siiso dowladda, hay'ad dowladeed, shirkadaha gaarka loo leeyahay aa cid kale ama hay'ad;
- (b) adeegsiga hantida Sanduuqa oo loo isticmaalo dammaanadda deynta, dammaanadaha, ballanqaadyada ama waajibaadka kale ee qof ama hay'ad; iyo
- (c) amaahda kaydka Sanduuqa.
- (2) Hantida Sanduuqa looma isticmaali karo qandraas kasta, heshiis ama qaabayn kale, ha ahaato qaab dammaanad, nabadgelyo, amaah ama nooc kale oo xayiraad ah, wixii saas ah ee hantida sanduuqa loo isticmaalay waxay noqon doontaa waxba kama jiraan;

126. Guddiga la talinta maalgelinta sanduuqa

- (1) Wasiirku wuxuu magacaabi doonaa, go'aamiinna doonaa magacaabidda xubnaha ka mid noqonaya Guddiga La talinta Maalgashiga Sanduuqa, isagoo la tashanaya Gudoomiyaha Baanka Dhexe; iyo
- (2) Shaqada Guddiga La talinta Maalgashigu waxay noqon doonaan in ay kala taliyaan Wasiirka arrimaha ku saabsan-
 - (a) siyaasadda maalgashiga Sanduuqa
 - (b) wax qabadka Sanduuqa;
 - (c) heshiiska Baanka Dhexe ee Soomaaliya ee ku saabsan maaraynta Sanduuqa;
 - (d) isbedelada lagu tala bixiyo in lagu sameeyo siyaasadda maalgashiga sanduuqa; iyo
 - (e) wixii kale ee la xiriiira arrimahaas oo uu Wasiirka u codsan karo talo ahaan.
- (3) Guddiga La talinta maalgashiga sanduuqa waxay ka koobnaan doonaan ugu badnaan (5) xubnood oo uu Wasiirku magacaabi doono.
- (4) Wasiirku wuxuu ku tala bixin doonaa magacaabidda qof, kaasoo leh khibrad, tababar iyo xirfad maal gashiga maaliyadda, si uu u noqdo xubin ka mid ah Guddiga la talinta maalgashiga
- (5) Qofka aysan marna noqon karin in loo magacaabo inuu xubin ka noqdo ama uu ku sii jiro xubinimada guddiga, haddii qofkaasi yahay -
 - (a) in lagu cadeeyey inuu musalafay ama kacay;
 - (b) lagu cadeeyey inuu galay denbi; ama
 - (c) uusan u qalmin xafiiska.
- (6) Xubinnimada guddiga waxaa lagu magacaabi doonaa wakhti aan ka badnayn hal sano, waxaana suuro gal ah in dib loo magacaabo hadba sida Wasiirka u arko.
- (7) Shuruudaha magacaabista iyo shuruudaha xubnaha Guddiga La-talinta Maalgashiga waxaa go'aamin doona Wasiirka, waxaana lagu siinayaa qaab qoraal ah xubnaha guddiga iyadoo nuqul la siinayo Baarlamaanka.
- (8) Wasiirku wuxuu ku daabici doonaa bogga mareegta internetka ee Wasaaradda xubnaha Guddiga La talinta Maalgashiga..

127. Warbixinaha Baanka Dhexe ee Soomaaliya

- (1) Baanka Dhexe ee Soomaaliya wuxuu u bandhigi doonaa Wasiirka iyo Guddiga La talinta Maalgashiga, isagoo siinaya nuqul Xisaabiyaha Guud, warbixinaha bisha ee ku saabsan wax qabadka iyo hawlaha la maamulay ee Sanduuqa, waana in warbixintaasi aysan ka dib dhicin 15 maalmood marka bisha dhamaato.
- (2) Baanka Dhexe ee Soomaaliya wuxuu daabici doonaa warbixinta sanadlaha ee ku saabsan sida loo maamulay Sanduuqa kama danbaysa 15 Janaayo iyo 15 July sanadkasta, wuxuuna warbixintaas ka dhigi doonaa mid dadkoo dhan wada heli karaan, isagoo ku daabacaya barta mareegta internetka muddo hal todobaad ah.

128. Xisaabinta iyo Warbixinta Sanduuqa Dakhliga Khayraadka Dabiiciga ah

- (1) Iyadoo la raacayo qodobka 61 (1) (a) ee Sharciga, Xisaabiyaha Guud waa inuu si hagaagsan u hayaa buugaagta xisaabta iyo diiwaannada loogu talagalay Sanduuqa lagu shubo Dakhliga ka soo baxa Kheyraadka Dabiiciga ah ee SFMIS, lana waafajiyaa Qodobada Xeer-Nidaamiyahaan.
- (2) Ujeeddada qodobka 57 (2) ee Sharciga, Xisaabiyaha Guud waa inuu fuliyaa kala soocidda xisaabaadka, taas oo xaqiijin doonta kala saaridda kaydinta xogta ee warqadaha lagu helay lacagaha dakhliga khayraadka oo ka timaadda nooc kasta oo kheyraad dabiici ah oo laga helo sida, shatiyada la bixiyo, canshuuraha ama ka faa'iideysiga kale ee kalluumeysiga, macdanta iyo khayraadka batroolka.
- (3) Guud ahaan, Qodobada tirsigoodu yahay 94, 98, 99, 100 ee Xeer-Nidaamiyahaan waxaa lagu dabaqi doonaa diyaarinta warbixinaha maaliyadeed ee Sanduuqa, si khaas ah waxaa Xisaabiyaha Guud u diyaarin doonaa, uguna gudbin doonaa si saddex bilood leh iyo qoraalka maaliyadeed ee sanadlaha Wasiirka iyo Hantidhowrka Guud muddo bil gudaheed ah marka saddexda bilood ee warbixintu dhammaato iyo laba bilood marka sanad maaliyadeedka dhammaado.
- (4) Iyadoon loo eegeyn faqrada Qodobada tirsigoodu yahay 98, 99, 100 ee Xeer-Nidaamiyahaan, warbixinahaan soo socda waxa lagu dari doonaa warbixin maaliyadeedka laga diyarinayo sanduuqa.
 - (a) Jadwalka ama shaac ka qaadista cadadka dakhliga kheyraadka dabiiciga ah ee la soo ururiyey oo aan weli lagu shubin koontada bangiga ee Sanduuqa Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah.
 - (b) Jadwalka ama shaac ka qaadista lacagaha la soo ururiyey loona wareejiyey koontada Bangiga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ee laga soo wareejiyey Qasnadda Guud; Tan waxaa lagu taageerayaa bayaanka isla xisaabtanka Dakhliga oo si cad isu waafajinaya qaddarka lacagta la soo ururiyay iyo inta dhabta ah ee lagu wareejiyay ee lagu shubay koontada bangiga ee Sanduuqa Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah.
 - (c) dhaqaalaha laga helay maalgelin kasta oo lacagta Sanduuqa ku hartay ah
 - (d) jadwalka ama shaacinta maalgashiyada ka yimid sanduuqa
 - (e) jadwalka ama shaacinta lacagaha laga saaray sanduuqa oo loo kala qaybiyey lacagaha lakala diray ee lagu bixiyey miisaaniyadda iyo kuwa lagu bixiyey maalgashiyada; iyo
 - (f) wixii kale ee warbixin ah ee uu u baahan karo Wasiirka ama uu go'aamin karo Xisaabiyaha Guud.
- (5) Ujeedka Qodobka 61 (2) ee Sharciga, Xisaabiyaha guud wuxuu diyaarin doonaa warbixin sanadeed sanduuqu leeyahay, wuxuuna u gudbin doonaa Wasiirka sida waafaqsan Qodobka 101 ee Xeer-nidaamiyahan.
- (6) Wasiirku wuxuu u gudbin doonaa warbixin sanadeedkaas Sanduuqa Baarlamaanka muddo bil gudaheed ah marka uu ka helo Xisaabiyaha Guud, isagoo nuqul ka mid ah siin doonaa Xubnaha ka mid ah Dowladaha Federaalka sida ku cad ujeedka Qodobka 61(3) ee Sharciga.
- (7) Qaabka u degsan tahay warbixin sanadeedka waxaa cadayn doona Wasiirka.

129. Hantidhowrka sanduuqa

- (1) Hantidhowrka guud wuxuu noqon doonaa hanti dhowraha Sanduuqa.
- (2) Iyada oo la raacayo qodobada Sharciga Hantidhawrka, Hantidhawraha Guud wuxuu keeni karaa shirkad hanti dhawr caalami ah oo sumcad leh, si ay hawsha uu rabo u qabato, si u go'aamiso haddii-
 - (a) xisaabaha sanadla ah si sax ah loo hayo;
 - (b) lacagaha dhammaan ay ahayd in sanduuqa lagu shubo la helay;
 - (c) haddii Sanduuqa loo maamulay sida waafaqsan Qodobada Xeer-Nidaamiyahaan; iyo
 - (d) shuruudo kale oo la buuxiyay oo uu Hantidhawraha Guud u arko inay lagama maarmaan u yihiin xisaabinta.
- (3) Hanti-dhowraha guud wuxuu soo saari doonaa aragtiyo ku aadan qoraal xisaabeedyada sanadlaha ah muddo 2 bilood gudahood, laga soo bilaabo markuu helay xisaab xirka sanadlaha ah, wuxuuna siinayaa nuqul ka mid ah warbixinta hantidhawrka Wasiirka iyo Xisaabiyaha Guud.
- (4) Hantidhowraha Guud wuxuu baarlamaanka hor geyn doonaa xisaab xirka la sameeyey.

Qaybta XII. Maareynta Maalgelinta Guud

130. Isticmaalka qeybtaan

- (1) Qodobada 130 ilaa 135 ee Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu dhaqayaa mashruuca soo buuxiya shuruudaha soo socda:
 - (a) kharashka guud waxaa uu ka koobanyahay maalgashi raasumaal; iyo
 - (b) kharashka guud oo ka badan 5 milyan oo dollarka Mareeykan ah
- (2) Iyada oo aan loo eegayn faqradda 1-aad, Qodobadda 130 ilaa 135 ee Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu dhaqayaa dhamaan mashaariicda Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships).

131. Mabda'a miisaaniyadda mideeysan

- (1) Si waafaqsan Qodobka 15-aad ee Sharciga:
 - (a) dhamaan mashaariicda Hay'addaha Dawliga ah waa in lagu daraa Miisaaniyadda Qaranka; iyo
 - (b) dhamaan mashaariicda Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships) waa in lagu daraa Qorshaha Sanadlaha ee Mashaariicda (annual concessions plan) oo ay meel mariyaan Golaha Wasiirada si waafaqsan Qodobka 125 (1) ee Sharciga libka Qaranka, ee 2016.

(2) Wasiirku waa inuu usoo gudbiyaa Qorshaha Sanadlaha ee Mashaariicda oo ay meel mariyeen Golaha Wasiirada, Baarlamaanka, iyagoo qeyb ka ah Miisaaniyada Qaranka ee lasoo jeediyay.

(3) Wasiirku isagoo adeegsanaaya awoodihiisa ku xussan Qodobka 8-aad ee Sharciga, waxa uu kusoo dari karaa Miisaaniyadda Qaranka iyo Qorshaha Sanadlaha ee Mashaariicda (annual concessions plan) mashruuc ay leedahay Hay'ad Dawladeed, haddii shuruudaha soo socda uu buuxiyo:

(a) Wasiirka ayaa hubiyay in mashruuca ama Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships) laga bixi karo kharash ahaan; iyo

(b) mashruucu ama Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships) waxaa lasoo marsiiyaya baaritaan (appraised), kadib waxaa loo soo doortay hab waafaqsan shuruucda quseeya arrinkaan ee markaa dhaqan-galka ah.

(4) Haddii Mashruucu ama Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships) aan lagu darin Miisaaniyadda Qaranka ama Qorshaha Sanadlaha ee Mashaariicda (annual concessions plan), Wasiirku waxa uu diidi karaa :

(a) inuu saxiixo heshiiska deyn-qaadashada ee ku xussan Qodobka 36-aad ee Sharciga;

(b) inuu ansixiyo balan-qaadyada/gedebta sannadaha taagan ee ku xussan Qodobka 30-aad ee Sharciga; iyo

(c) inuu waxa ka saxiixo skaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships) ee ku xussan Qodoka 131 ee Xeer-nidaamiyahaan.

132. Xaqiijinta in la awoodi karo (Verification of affordability)

(1) Markii Hay'ad Dawladeed ay soo jeedineyso Mashruucu ama Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships), Hya'adda Dawladda waa inay heshaa shahaado tilmaameys in la xaqiijiyay in la awoodi karo mashruuca (Verification of affordability Certificate) ee uu Wasiirku saaro heerkasta ee qorsheeynta mashruucu maraayso si waafaqsan Sharciga dhaqangalka ah ee markaas jira.

(2) Wasiirku waa diidi karaa inuu soo saaro shahaadada tilmaameys in la xaqiijiyay in la awoodi karo mashruuca (Verification of affordability Certificate), haddii tillaabooyinkii hore ee qorsheeynta mashruuca aan lasoo xaqiijin.

(3) Haddii uusan jirin sharci kale oo dhaqangal ah, Wasiirka ayaa dalbanaya xaqiijinta in la awoodi karo (Verification of affordability) mashruuca ama Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships) si waafaqsan habka iyo waqtiga uu isagu dejiyo.

133. Dukumintiyada Miisaaniyadda

(1) Siwaafaqsan Qodobka 18 (1) ee Sharciga, Miisaaniyadda Qaranka ee lasoo jeediyay waa inuu ka koobnaada lifaaq kusaabsan maalgelinta guud kaaso muujinaya warbixinnada kusaabsan mashaaricda iyo Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships) ee cusub iyo kuwa socda ee kujira Miisaaniyadda Qaranka:

(a) kharashka asalka ahaa iyo kii ugu danbeeyay ee mashruuca, haddii uu yahayna maalgashi ka dhashay Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships), qiimaha maalgashigii asalka ahaa iyo kii ugu danbeeyay oo laga helay hay'addaha gaarka loo leeyahay;

(b) taarikhdiisii asalka aheyd ee dhameystirka mashruuca iyo tii u danbeesay;

(c) haddii uu isbedel weyn kuyimid maalgashigii asalka ahaa iyo midka hadda uu ku kacayo iyo haddii farqiweyn udhaxeeyo taarikhda dhameystirka iyo midda hada laisku raacay, sharaxaad ku saabsan arrimaha keenay isbedelka;

(d) cidda maalgashiga dhiibeysa;

(e) kharashkii ugu danbeeyay ee balan-qaadyada/gedebta sannadaha taagan ee hay'addaha Dawladdu galeen

(f) iskudarka kharashka ama maalgashiga taaso labixiyay ilaa markii mashruuca ama Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships) uu bilaawday;

(g) lacagaha aan wali labixin oo ay qabaan hay'adaha Dawladda;

(h) qiyaasta kharashka sanadlaha ah ee shanta sano ee soo socota ku kaceysa mashruuca, hadii uu yahayna Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships), maalgashiga lasameeyn doono shanta sano ee soo socota; iyo

(i) Warbixinkasta ee Wasiirku u arko muhiim.

(2) Hay'adda Dawladda waa inay usoo gudbisaa Wasiirka warbixinta kusaabsan mashruuca ama Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah (public-private partnerships) siwaafaqsan habka iyo waqtiga Wasiirku jideeyay

134. Heshiisyada Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah (public-private partnerships)

(1) Siwaafaqsan Qodobka 30 (4) iyo Qodobka 37(1) ee Sharciga, Heshiisyada Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah (public-private partnerships) kaaso ku nuuc ah balan-qaadyada/gedebta sannadaha taagan ama damaanadaha Dawladda waa inuu Wasiirka Maaliyaddu lasaxiia Sarkaalka Idman ee Hay'adda heshiiska galeeysa.

(2) Heshiisyada Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah (public-private partnerships) waxaa loo aqoonsanaya inay ku nuuc yihiin balan-

qaadyada/gedebta sannadaha taagan ama damaanadaha Dawladda, haddi shuruudahan laga arko:

(a) Heshiiska Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah (public-private partnerships) waxa uu ka koobanyahay waajibaadyo lacag bixin taaso dul-fuulidoonta Miisaniyadda Qaranka; ama

(b) Heshiiska Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah (public-private partnerships) wuxuu abuuraya masuuliyad lacag bixin ee ka imaanaysa Miisaniyadda Qaranka taaso kuxiran dhacdada xaalad, haba-ahaato mid aan laga yaabin inay dhacdo.

(3) Isbedelkasta ee kuyimaada Heshiiska Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah (public-private partnerships) ee u baahan in Wasiirku wax ka saxiixo sida uu qabo faqradda 1-aad, waa inuu Wasiirku lasaxiixo Sarkaalka Idman ee Hay'adda.

(4) Heshiis Iskaashi ee udhaxeeya Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah (public-private partnerships) ama isbedel isla heshiiskaas oo lasameeyo iyadoo lagu xad-gudbaayo faqradda 1-aad ama midda 3-aad waa waxba kama jiraan, mana lahan wax saameyn sharci ah.

(135) Isbedellada Mashruuca

(1) Markii Hay'ad Dawladeed damacdo inay bedesho mashruuc kasoo kor uqaadaya kharashka mashruuca in gaareysa boqolkiiba toban (10%) ama ka badan, isbedelkaas mashruuca waxaa loo aqoonsanaya inuuyahay mashruuc cusub, sidaa darteedna waa inuu Wasiirku xaqiijinta in la awoodi karo (Verification of affordability).

(2) Markii kharashka mashruuca ku baxayaa uu kor ukaco inkabadan boqolkiiba toban (10%) sababo aan aheyn isbedel mashruuca kuyimid darteed, Wasiirka ayaa dalban karaa in la xaqiijinta in la awoodi karo (Verification of affordability) mashruuca.

(3) Haddii hay'ad Dawladeed ay rabto inay isbedel kusameeyso heshiis iskaashi ee udhaxeeya Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah (public-private partnerships) kasoo u baahan sixiixa Wasiirka, Hay'adda Dawladdu waa inay ka heshaa Wasiirka xaqiijinta in la awoodi karo (Verification of affordability) isbedelka.

(4) Haddii isbedel lagu sameeyo mashruuc ama heshiis iskaashi ee udhaxeeya Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah kaas oo aan waafaqsaneen faqradda 1-aad ama 3-aad, Wasiirka wuxuu diidi karaa:

(a) in isbedelka mashruuca ama heshiis iskaashi ee udhaxeeya Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah lagu daro Miisaaniyadda Qaranka;

(b) inuu sixiixo heshiiska lacagta dheeriga ah lagu soo deeynsanaayo ee loogu talagalay isbedelka mashruuca.

(c) inuu sixiixo balan-qaadyada/gedebta sannadaha taagan ee xiriirka laleh isbedelka mashruuca; iyo

(d) inuu waxa ka sixiixo heshiis iskaashi ee udhaxeeya Hay'adaha Dawladda iyo Kuwa Gaarka ah ee isbedelka lagu sameeyay.

Qaybta XII. Cunaqabtaymaha iyo Xeerar dheeraad ah

136. Cunaqabataynta

- (1) Marka hay'ad dowladeed ay ku guuldaraysato inay u hogaansanto shuruudo kasta oo hoos imanaya Sharciga ama Xeer-Nidaamiyahaan, Wasiirku wuxuu ka qaadi karaa mid ama labadaan talaabo ee soo socda:
 - (a) Uga baahdo in ay soo gudbiyaan talaaboyinka la qaadayo ee khaladkii dhacay lagu saxayo iyo warbixino dheeraad ah;
 - (b) daabicidda xaqiiqda xadgudubyada iyo magaca Sarkaalka Idman ee xeerka jebiyey oo ku soo baxa warbaahinta hadba sida Wasiirku u arko inay ku haboon tahay;
 - (c) fulinta baaritaanno khaas ah iyadoo uu fulinayo sarkaal uu magacaabay Wasiirku;
 - (d) la laalo ama la joojiyo lacag bixin kastoo uu sameeyey iyadoo aan la helin meel marin;
 - (e) loo yeelo la taliye khaas ah xafiiskaas oo lasocda hawlaha hay'adda; iyo
 - (f) in sarkaal kale oo wasiirku magacaabay uu la wareego awooda noocan ah ee ah maaraynta maaliyadda hay'adda dowladda sida uu Wasiirku go'aamiyey.
- (2) Marka hay'ad dowladeed ay ku guul daraysato inay soo gudbiso xisaab xirka maaliyadeed ee bisha iyo warbixinaha kale ee aan maaliyadda ahayn ee sanadlaha ama xisaabaadka maaliyadeed ee sanadlaha wakhtiga kama danbaysta loo qabtay, Wasiirku wuxuu ka qaadi karaa mid ama labadaan talaabo ee soo socda:
 - (a) wuxuu hakinayaa qondooyinka iyo maaliyadaha loo ogolaaday kharash garaynta ilaa iyo inta la soo gudbinayo bil maaliyadeedka iyo warbixinta aan maaliyadda ahayn ama qoraalladda xisaab xirka maaliyadeed ee sanadlaha; iyo
 - (b) ku daabacaan warbaahinta xaqiiqda fashilka iyo magaca Sarkaalka Idman, sida uu Wasiirku u arko inay habboon tahay

137. Xisaabinta iyo qoraalka khasaaraha ku dhaca lacag ama hanti dowlad

- (1) Khasaaruhu wuxuu u dhici karaa qaab lacag cadaan ah, alaab, hanti dowladeed, lacago la sheeganayey oo la iska dhaafay ama laga tegey, lacago aysan waxba ka soo noqon, kharashaad si sharci darro ah loo bixiyey iyo in la lumiyo warqadaha ama dukumentiyada la iskula xisaabtamayo
- (2) Sarkaalka Idmanwuxuu xaqiijin doonaa:

- (a) In ay jirto qaab farsamo oo loo dejiyey in si degdeg ah loo ogaado, loogana warbixiyo khasaaraha;
 - (b) In khasaaraha la ogaaday baaritaan lagu sameeyo, iyadoo la raacayo Qodobka 54(1) ee Sharciga, waxaan lagu qorayaa nidaamka SFMIS oo loogu diwaan gelinayo habka loogu tala galay ee ku haboon, isla markaasna si dakhso leh ayaa loo soo sheegayaa xisaabaadkaas;
 - (c) In cadadka laga soo celin karo sarkaalka qaaday masuuliyadda khasaaraha dhacay laga soo celiyo sida ugu dhakhisa badan iyadoo aan dib u dhac jirin;
 - (d) In khasaaraha aan la soo celin karin la qoro sida waafaqsan hab raaca lagu cadeeyey Qoraalka Nidaaminaya Hawlaha;
 - (e) In muddo laba bilood gudahood ah marka sanad maaliyadeedka xisaabu dhamaaddo, ay ama uu u soo gubiyo Xisaabiyaha Guud sharaxaad ku saabsan talaabooyinka anshax siinta iyo xanibaadaha kale ee laga qaaday, iyadoo la eegayo wax kastoo khasaaray ee lagu diwaan geliyey nidaamka SFMIS sida ku cad jumlada 2(b).
 - (f) In qoraalada sanadle ee ku saabsan khasaaraha dhacay lagu daray, ayna ku jiraan qoraaladda maaliyadeed ee sanadlaha ah ee hay'dda dowladda ay u soo gudbiso Xisaabiyaha Guud, kaasoo diyaarin doona warbixin sanadeed ka hadlaysa khasaaraha qaybta ka ah qoraalada xisaab maaliyadeedka sanadle ee dowladda federaalka ee loo gudbiyey hanti dhowrka.
- (3) Xisaabiyaha Guud wuxuu dhisi karaa guddi baadhitaan, si ay baadhis ugu sameeyaan waxyaabaha ama duruufaha keenay khasaare kastoo balaaran ama khasaare kastoo aan caadi ahayn, iyagoona xogta baaritaankaas siinaya Xisaabiyaha Guud, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Madaxa Hantidhowrka gudaha ama Hantidhowrka Guud.
- (4) Wasiirku wuxuu ku qori doonaa Qoraalka Nidaaminta Hawlaha faahfaahinno ku aadan talaabooyinka maamul ee loo qaadayo wax ka qabashada khasaaraha lagu xusay jumlada (1).

138. Dhaqan gelinta iyo fulinta Xeer-Nidaamiyahaan

- (1) Xeer-Nidaamiyahaan wuxuu dheqangelayaa markii lagu daabaco mareegta Interneetka (website) ee Wasaaradda Maaliyadda, kadib ansixinta Golaha Wasiirada, sida uu qabo Qodobka 62 (1) ee Sharciga Maareynta Maaliyada Guud.
- (2) Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu-soosaaray Af-Soomaali iyo Af-Ingiriis. Haddii ay is khilaafaan, nuqulka ku qoran Afka-Soomaliga ayaa laqaadanaya.
- (3) Wasiirku wuxuu amar ku bixin karaa in dib loo dhigo ama la laalo dhaqangelinta qeybo kamida Xeer-Nidaamiyahaan, so loo hubiyo dhaqangalka hufan ee Xeer-Nidaamiyahaan.
- (4) Si hab wanaagsan loogu hir geliyo sharciyadaan iyo sida uu qabo Qodobka 9 ee Sharcigu, Wasiirku wuxuu dejin doonaa, kuna daabici doonaa hab raaca hawl galka maamulka maaliyadeed ee lagu cadeeyey siyaadaha guud, hab raacayada, habka

loo marayo iyo sharciyada ay tahay in ay si wax tar leh ugu hawl galaan oo u raacaan Saraakiisha Ogolaansha iyo inay ku shaqeeyaan hab waxtar leh oo ay ku maamulayaan dhaqaalaha iyo hantida dowladda.

(5) Iyadoo la tixraacayo qodobka 9 (6) ee Sharciga, isla markaana si wax ku ool ah loogu dhaqmayo Xeer-Nidaamiyahaan, Xisaabiyaha Guud wuxuu mas'uul ka noqonayaa qabashada iyo maaraynta barnaamijyada horumarinta xirfadeed ee saraakiisha dowladda eel eh wajaabaaadka maaraynta Maaliyadda Dowladda.